

QIIMAHA: ETB 9.90

ISBN: 978-99944-2-107-7

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA TILMAAME BARE FASALKA 5aad

JDFI WW






# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## TILMAAME BARE

## FASALKA 5aad





Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

Calamada Dawlad - Deegaanada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalke Itoobiya


Calanka Dawlad- deegaanka Tigraay


Calanka Dawlad- deegaanka Canfarta


Calanka Dawlad- deegaanka Amxaarada


Calanka Dawlad- deegaanka Oromiya


Calanka Dawlad- deegaanka Somaalida


Calanka Dawlad- deegaanka Benishangul- Gumus


Calanka Dawlad- deegaanka Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucaubta Konfureed


Calanka Dawlad- deegaanka Gambeela


Calanka Dawlad- deegaanka Hararida

XubnahaDawlad-Deegaanadu waxay u dhigan yihin sida ku xusan qodoba 47aad ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga federaalka Itoobiya.

# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## TILMAAME BARE
## FASALKA 5aad

**Qoraha Buuga:**
Xuseen Bille

**Tafatiraha:**
Anas Yusuf

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka
Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada

Laxmi Publications

Mahadnaq

Dib u habaynta, daabacaada iyo qaybinta buugta waxaa maalgaliyay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud ee loo yaqaano (GEQIP), kasoo ujeedadiisu tahay in la kobciyo tayada waxbarashada ee ardayda fasalka 5-8 ee dhamaan dugsiyada dalka Itoobiya.

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya deeqda ay ka heshay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud (GEQIP) waxay usoo martay ururka horumarinta caalamiga ah (IDA) Credit No. 4535ET, the Fast Track Initiative Catalytic Fund (FTICF) iyo qaybaha kale ee bahwadaagta horumarinta Talyaniga, gargaarka Holand iyo Boqortooyada Ingiriiska ee ka timaada waaxda horumarinta caalamiga ee loo yaqaano (DFID).

Waxaa kale oo gacan ka gaystay soo saarista buuga ardayga iyo Kan baraha ee ku lamaan, shaqsiyaad iyo ururo (hay'ado) kala duwan oo fara badan, islamarkana aanan halkan lagu soo koobi Karin. Hase yeeshe, waxaa xusid gaar ah mudan, Mayra Maarbi, oo wakhti badan gelisay kobcinta awoodeed ee qorayaasha buuga ee wasaarada, si loo soo saaro qalab xidhiidh isdhexgal iyo jawi saaxiibtinimo la leh hawlaha baris-barashada. Taageerada maaliyadeed ee u midawga Yurub u fidiyay hawlaha shaqo ee Mayra ka waday Itoobiya, waa mid loo jeedinayo amaan/bogaadin. Waxaa kale oo mahadnaq halkan looga soo jeedinayaa: Golha Faderashinka, -J.D.F.I, Wakaalada Warbaahinta Itoobiya, Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska, Wasaaradii hore ee Warfaafinta, Macadka daraasaadka Itoobiya, Ururka Macalimiinta ee Itoobiya, iyo Wakaalada wax soosaarka iyo baahinta (fidinta) qalabka tacliinta ee Itoobiya,oo dhamaantood u fidiyay taageero dhanka sawirada ah. Waxaa mahadnaq mudan shaqadii Helen PaPworth ee tabaruca ahayd, iyada oo ahaan jirtay Waaxda Cilmiga Milgaha qaranka iyo Anshaxa islamarkana tafatirtay,hubisay buuga ardayga iyo buuga baraha ee ku meelgaadhka ahaa. Waxaa kale oo mahadnaq mudan tabarucayasha Ingiriiska ee lagu meleeyay wasaarada dhexdeeda ee awood noo siiyay inaan isticmaalo khibradooda mashruucan iyo kuwo kaleba.

Waxaa kale oo la ilaawin Karin oo mahadnaq balaadhan mudan Xafiiska Waxbarashada Dawlad Deegaanka Somalida oo door wayn ka qaatay dadaalka loogu jiro in la soo saaro buug taya leh.

© Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada.

Daabacaada koobaad, 2002 T.I

Dib u qabaynta, daabacaad iyo soo saarida buugta waxaa wasaarada waxbarashada u sameyay shirkada gaarka ah ee daabacaada Laxmi iyo Gopsons Paper Ltd, Indiya heshiiska tirsigiisu yahay GEQIP No. ET-MOE/GEQIP/IDA/ICB/G-10/09-B.

Xuquuqda buugani way dhawran tahay. Qayb ka mid ah daabacaada dib looma saari karo lamina kaydsan karo si markale dib loogu soo saarro ayadoo la adeegsanayo qalabyada kala duwan ee daabacaada. Waa in ogolaansho laga helo mulkiilaha ama fasax qoraal oo ku ogolaanayo inaad isticmashid daabacaadaha lagu mamnuucay xeerarka Jamhuuriyafa Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya eek u cad Federal Negarit Gazeta,bayaanka tirsigiisu yahay 410/2004 ee xuquuqda daabacaada(Copy Right and Neighbouring rights protection proclamations, 10th year, No, 55, Addis Ababa, 19 July 2004.

# Hordhac

Waxbarashada iyo horumarku waa laba shay oo aad iskugu dhaw islamarkana aan kala maarmayn. Taasi waa sababta ugu muhiimsan ee aan u leenahay waxbarashadu waa furaha horumarka ee Itoobiya.

Dunida casriga ah ee aan ku noolahay qof kasta wuxuu u baahan yahay inuu yeesho a qoon cusub, xirfad iyo aragti wanaagsan. Waana u jeedada manhajkan, kaas oo ka turjumaya nidaamka waxbarasho ee dalka, oo ay tahay inuu jawaab ka bixiyo isbadalka xaaladahan.

Mudo shan iyo toban sano ah ayaa laga joogaa markii ay Itoobiya hirgalisay siyaasada waxbarashada iyo tababarada. Tan iyo xiligaas, dalkeenu wuxuu kasoo hoyay guulo wax ku ool leh dhinacyada fidinta waxbarashada, isku dhelitirnaanta iyo jaan go'naanta mabaadiida waxbarasho. Waxaa kale oo dadaal dheeri ah loo galay loona gali doona kor u qaadida tayada waxbarashada.

Si loo joogteeyo horumarkan, waxay wasaarda waxbarashadu dajisay jihooyin lagu horumarinayo manaahijta. Qorshahu wuxuu taabanayaa dhamaanba maadooyinka iyo fasalada ka hor waxbarashada dugsiyada hoose, dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe, waxbarashada guud ee dugsiyada sare iyo tan heerka u diyaargarowga tacliinta sare.  Ujeedadeeduna waa in la hirgaliyo qodobadii iyo mabaadiida ku cad siyaasada waxbarashada iyo tobarada, waxayne gogol xaadh u tahay diyaarnta dhamaanba qabbyana manaahijta la xidhiidha uuna ka mid yahay buuganta tilmaanu Bare liyo kan ardayda ee ku lammaaan.

Daabacaada iyo dib usoo saarida jihooyin u dajisan manhajka iyo buugaag cusub ama tilmaame bare ma ehe xal ka kali ah ee lagu xaqiijin karo tayada waxbarashada ee dal walba. Kor u qaadis joogta ah waxay u baahantahay ka qaybgalka dhamaanba qaybaha doorka ku leh. Kaalinta barayaasha waa in ay nqote mid aad u firficoon u isugu jirta heer bare ilaa mid hawlwadeen ah ama hormuud. Si gacan loogasiiyo arintan, barayaashu waxay heleen, ayna sii wadandoonaan tobobar iyo  kor uqaadida xirfadoodo.

Wasaarada waxbarashada

# Tusmada Buuga


| | | |
|---|---|---|
| Cutubka 1: | Nidaamka Dimuqraadiyada | 3 |
| Cutubka 2: | Saraynta Sharciga | 17 |
| Cutubka 3: | Sinaanta | 37 |
| Cutubka 4: | Cadaalada | 49 |
| Cutubka 5: | Wadaniyada | 58 |
| Cutubka 6: | Masuuliyada | 70 |
| Cutubka 7: | Dhaqan Hawl-karnimo | 76 |
| Cutubka 8: | Isku-filaanshaha | 81 |
| Cutubka 9: | Kaydsashada | 87 |
| Cutubka 10: | Ka qaybgalka firfircoon ee Bulshada | 92 |
| Cutubka 11: | Hamiga Aqoon Raadiska<br>(raadinta Cilmiga Waxbarasho) | 96 |

# HORDHACA

Waxbarashadan fasalka 5aad ee Anshaxa iyo muwaadinimada (citizenship), buugeeda tilmaama bare oo hababka baris/barasho si guuli ku dheehan tahay uguna habboon islamarkaana loo adeegsan karo loo diyaarsiyayey waxaana lagu xoojiyo arrimo gacan weyn ka gaysanaya dhaqan galintiisa. Waxaa aad xil la isaga saaray in buuga tilmaame bare lagu sharaxo qodobada ama mawduucyada buuga ardeyda lagu soo bandhigay oo ka kooban koob iyo toban cutubiyada loo fiirinayo hawlaha baraha iyo kuwa ardeydu qabanayso islamarkaana lagu salaynayo ujeedooyinka waxbarashada.Sidaa daradeed waxaa la aminsan yahay in buugan tilmaamebare kaalin muhiim ah ka qaadan doono sidi loo dhaqan galin lahaa arrimaha aynu korka ku soo tilmaamnay.

Waxaa la isu-dayey in lagu tilmaamo hawlaha baraha iyo kuwa ardeyda sida uu baruhu u maamulayo iyada oo tilmaamana laga siinayo maadaama oo buuga ardeyga lagu soo bandhigay waxyaabo lagu dar-dar galinayo fir-fricooni barashada ardeyda oo ay ka mid yihiin su'aalo laga dhaqaaqayo, laylisyo iyo hawlo ama shaqooyin koox-koox loo fulinayo.

In lagu guulaysto hannashada ujeedooyinka waxbarashada natiijooyinka la rabo ama loogu talagalayna looga soo saaro buuga tilmaame bare in kaalin weyn ka ciyaari doono ayaa lagu rejo weyn yahay. Sidaa daradeed si loo soo bandhigo waxbarasho ardeydu si fir-fircoon uga qayb-qaadan karaan (partiapatory and self-teaching) baruhu kolba inti kartidiisa ah hababka baris/barashada ee buuga tilmaame bare lagu soo bandhigay in uu sida ugu habboon u adeegsado isaga oo ku salaynaya xaalada deegaanka iyo ardeyda in uu isu-daya lagula talinayo.

Waxaa la aminsan yahay in baruhu door muhiim u ah uu ku leeyahay xaalad kasta oo geedi-socodka hawlaha baris/barashadu ku sugan yihiin iyo waliba soo bandhigo waxbarashada iyo maamulkeeda. Iyada oo arrimahan aynu soo tilmaamnay loo fiirinayo ardeydu waxay ka shaqaynayaan su'aalaha hordhaca ah iyo laylisyada. Dhanka saxitaanka iyo dib u hagaajinta khaladaadka laga yaabo in ardeydu sammaysana sida uu baruhu ku taliyo ama uu doorto in mudnaanta la siiyo ayaa habboon. Tallooyinkan la soo sheegay oo dhan waxaa loogu talagalay in fahamka baraha lagu ballaadhiyo oo kali ah weeyaan. Laakiin ma'aha in loo qaato ama loo fahmo sida kali ah ee ama waxaa kali ah lagu soconayo. Si buuga tilmaame-bare sida ugu habboon loogu isticmaalo waxaa waxtar weyn leh in fikradahan soo socda tix-galin la siiyo.

## TILMAAMAHA GUUD EE ISTICMAALKA BUUGA TILMAAME-BARE

### 1. Su'aalaha Hoarahca ah marka aynu fiirino

- Ujeedo asaasiga ah ee su'aalaha hordhaca ah waxaa weeye in aqoonta iyo khibradaha ardeydu horray u lahayd ee la xidhiidha cinwaanada waxbarashada loo soo bandhigay lagu dhiirigaliyo in ay u adeegsadaan. Waxaa kale oo waliba inta dheer fahamka iyo aragtida ay ka qabaan nuxurka qodobada loo soo bandhigay in ay qeexaan, rabitaanka laxidhiidha ka qayb qaadashada hawlaha baris/barashada in la dar-dargaliyo iyo iyaga oo baraarugsan ama fir-fircoon in ay waxbarashada la socdaan. Baruhu waa in uu fahmo in looga baahan yahay 10, daqiiqadood gudahood in su'aalaha baraarujinta ama hordhaca uu

ku soo kobo islamarkaana u gudbo qodobka ugu muhiimsan casharka ama u wareego qodobka ku xiga ka dhammaaday.

- Su'aalaha hordhaca dhammaantood jawaabahooda in aan buugan tilmaame bare laga helin ayaa dhici karta. Jawaabaha laga bixiyey ee buuga tilmaamebare lagu xusay hadi xata ay yihiin waxyaabaha kali ah ee fursad ahaan (alternative) in loo qaato ay tahay waxaa weeye jawabaha ay ardeydu ka bixisay su'aalaha laga hordhaca ah ama loogu talagalay in ardeyda lagu baraarujiyo in loo adeegsado in lagu saxo khaladdaadka la sammeeyo iyada oo lagu xoojinayo fikradaha sharaxaada lagu xusay ayaa la heli karaa. Hase ahaatee, laakin, waxaa looga baahan yahay in ay ka digtoonaadaan in ayna ka boodin ujeedada su'aalaha loogu talagalay baraarujinta qodobada ugu muhiimsan ee waxbarashada lagu soo qaaday dhammaantood in ay soo qaataan wada hadalkuna ka ballaadhan in islamarkaana isuna qasin fikradaha. Mararka qaarkood waxaa suurta gal ah jawaabaha laga bixiyey su'aalaha, hordhaca ah ee ay ardeyda in la hagaajiyo, fikradaha buuga tilmaame bare iyo buuga ardeyda lagu soo bandhigay in ay ku filnaan waayaan. Xiligan oo kale baruhu isaga oo aqoontiisa iyo khibradihisa adeegsanaya in uu sixitaan ama dib u hagaajin ku habboon in uu ku sammeeyo ayaa laga sugaya.

## 2. Waxqabadyada marka aynu fiirino

- Waxaa aad loogu dadaalay in jawaabo ku habboon laylisyada loo soo bandhigo. Mararka qaarkood laylis walba jawaab qudha in laga bixiyo halka mar-mar kalena su'aalo dhawr ah inta la isu-soo gaabiyey sharaxaad iyo qeexitaan lagu sammeeyey islamarkaana fikrado jawaab noqon kara waxyaabo laga heli karo (qalab/dhokumeenti) in la adeegsado ayaa la isu-dayey.

## 3. Qodobada iyo xiisadaha loo qoondeeyey

- Qaar ka mid ah qodobada waxbarashada ama xiisadaha loo qoondeeyey ee loogu talagalay in qodobada lagu soo bandhigo laguna fuliyo dhammaan waxqabadyada in ay iswaafaqi waayaan ama isu-dheelitirnaan waayaan ayaa dhici karta. Xaaladaha noocan oo kale ah marka ay kula soo gudboonaadaan baraha waxaa laga sugaya in uu doorto waxqabadyada iyo qodobada uu is-leeyahay waxtar dheeri ah bay leeyihin kadibna xiisadaha iyo waxbarashada in uu ku saleeyo kolba xaalada ardeyda, dugsiga iyo deegaanka sida ay yihiin.

## 4. Shaqo kooxeedyada marka aynu fiirino

- Buuga tilmaame bare shaqo-kooxeedyada lagu soo bandhigay hawlaha la is-leeyahay ardeyda dhammaantood waa in ay ka shaqeeyaan kuwa ka baxsan oo loogu talagalay in kooxo-dhawr ah oo kali ah ay ka shaqeeyaan ayaa jira. Tanina ama sidana ardeyda kale ee hadhsan waxaa la mooda kuwa bilaa camal iska fadhiya.

  Ujeeddooyinka shaqo-kooxeedka ay ardey dhawr ah ay ka qayb gasho shaqo-kooxeedyada buuga tilmaame bare lagu soo bandhigay oo dhan in ay fuliyaan iyo ururo kale duwan oo yar-yar oo ardeyda oo dhan xiliyo kala duwan maadaama ay ka qayb-qaataan aqoonta iyo xirfadaha ay ka hellaan sidi loo sii korodhin kari lahaa weeyaan. Xaaladan oo kale marka ay timmaado baraha waxaa laga sugaya in ardeyda aan ka qayb qaadanin shaqada kooxaha shaqooyin ay qabtaan in uu u diyaariyo.

# CUTUBKA 1: NIDAAMKA DIMUQRAADIYADA

## *(11-Xiisadood)*

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ardeydu dhammaystirto barashada cutubkan kadib waxay awoodi-doonaan in ay:

- Kordhiyaan fahamka macnaha Diimuqraadiyada iyo nidaamka diimuqraadiga ah.
- Gartaan nidaamka diimuqraadiga ah xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed ee ay tahay in la daryeelo.
- Fahmaan macnaha faraqyada ama aragtiyada lagu kala duwan yahay siyaabaha faraqyada la isu-waafajin karo islamarkaana loo wada noolaan karo.
- Fahmaan macnaha dawladaha heer fadaraal iyo heer deegaan.
- Fahmaan macnaha xidhiidhka dibbada.

| No. | Waxbarashada | Ujeedooyinka faah-faahsan | Qodobo kale oo waxtar ah. |
|---|---|---|---|
| 1. | Diimuqraadigu waa maxay? | • Qeexaan macnaha diimuqraadiga iyaga oo tusaale adeegsanaya.<br>• Soo bandhigaan habab nidaamka diimuqraadiga ee dugsiyadooda ka jira ay ku qeexayaan. | • Sawiro, footoo giraafyo tilmaamaya dhaqanka diimqraadiga. |
| 2. | Macnaha xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraad -iyadeed | • Qeexaan macnaha xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiga.<br>• Daryeelaan xuquuqaha saaxiibadooda.<br>• Qeexaan waxyaabaha ay isaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadu. | • Sawiro footoo giraafyo tilmaamaya dhaqanka diimqraadiga.<br>• Boostoro, sawiiro iyo footogiraafyo muujinaya qaaramada, qoomiyadaha shucuubta. |
| 3. | Faraqa | • Liisgareeyaan faraqa ama waxyaabaha ardeyda, fasalada iyo dugsiyadu ku kala duwan yihiin.<br>• Qeexaan waxtarka ay leedahay in is-waafajiyaan waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin dugsiga iyo agagaarada ay ku nool yihiin islamarkaana si nabad galyo leh ku wada noolaadaan.<br>• Wada ciyaaraan kadib marka ay xaliyaan faraqyada ama aragtiyada ay ku kala duwan yihiin. | • Boostaro, sawiro iyo footogiraafyo muujinaya qaramada, iyo qoomiyadaha, iyo shucuubta Itoobiya Itoobiya. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4. | Nidaamka dawladeed ee Itoobiya | • Liisgareeyaan hawlaha ugu waa weyn ee dawladaha heer fadaraal iyo kuwa heer deegaan.<br>• Sharaxaan macnaha ama waxaa ay tahay dawlada deegaanku.<br>• Qeexaan macnaha maamulka magaalada | • Footogiraaf muujinaya asaasida dawlada fadaraalka Itoobiya.<br>• Boostaro-iwm. |
| 5. | Xidhiidhka dibbada | • Qeexaan waxaa uu yahay xidhiidhka dibadu.<br>• Sharaxaan waxaa ay tahay siyaasadaha xidhiidhka dibadu.<br>• Qeexaan sababaha loogu baahday ama lagama-maar-maan ka dhigay siiyaasada xidhiidhka dibada iyaga oo labo tusaale adeegsanaya. | • Sawiro kala duwan oo muujinaya wada jirka. |

## 1.1. DIIMUQRAADIGU WAA MAXAY? (2XIISADOOD)

***Qalabka Waxbarashada fasalka***

- Sawirada aqoonyahanada cilmiga fasalada ee Giiriga iyo Ateensi.
- Sawir muujinaya ardeyda oo dooranaysa horjoogahooda.
- Sawir muujinaya dad aad u tiro-badan oo dooranaya shakhsiyaadka xaafadahooda maamulka u qabanaya.

***Hordhaca***

***Sawir 1.1, 1.2. Iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawir 1.1. Maxaad ka arkaysaan ama idiinka muuqda? Fasalka dhexdiisa waxaa ka socda qiyaas ahaan ku sheega.
- Sawirka 1.2. Midka aad arkaysiin ee hoolka ku jira muxuu sammaynaya?
- Waxaad in badan maqashin erayga diimuqraadiyad. Marka aad maqashiin erayga fikradaha maskaxdiina ku soo dhaca waa maxay?

Bare buuga ardayda boga 5aad sawirada ku yaala (sawirka 1.1. Doorashada hor joogaha fasalka iyo sawirka 1.2. Tilmaamaha nidaamka maamul ee dugsiga) in ay u fiirsadaan kana jawaabaan su'aalaha korka ku xusan ku dhiiri-gali. Ardeydu si guud jawaabo afka ay ka sheegaan ha ka bixiyaan ama kuwa is-garab fadhiya in ay ka wada hadlaan kana jawaabaan way karaan.

***Hawsha la fulinayo (hawl-kooxeedka fasal ka dhexdiisa)***

- Ardeydu koox-koox ha isu-qaybiyaan kadibna sheekada ku saabsan doorashada hor joogaha fasalkana ha akhriyaan islamarkaana layliska koobaad ha ka shaqeeyaan. Kooxuhu iyaga oo is-bed-bedalaya midba midka kale shaqada uu qabtay ha u fiirsadaan. Su'aalaha in ay aad u qiimeeyaan ugana baraan dagaan ku dhiiri-gali.
- Macnaha diimuqraasiga u sharax. Hadi wax su'aalo ah ay qabaana in ay soo bandhigaan ku dhiiri-gali.

***Diimuqraadigu Waa Maxay?***

Qaamuuska erayadu sida uu ku qeexay macnaha diimuqraasigu waxaa weeyaan nidaamka dawladeed oo Awooda ugu saraysa ee bulshadu leedahay. Xubnaha awooda ama xilka dhaqan galisana waa wakiilo bulshadu si xor ah u soo dooratay oo matalaya isla bulshada u codaysay.

Dulucda diimuqraasigu waxaa weeyaan mid bulshada laga soo dheegay; Awood-dawladeed oo lagu dhisay ugu saraynta rabitaanka bulshada; mid bulshadu dooratay bulshadana laga dhex-doortay, oo dhab ahaan u buuxinaya ama wata macnaha runta ah ee ay xambaarsan tahay weedha Dawlada Bulshada. Awooda dawlada waxaa laga soo dheegay bulshada marka aynu leenahayna ujeedadu waxaa weeyaan dawladan cida asaasaysa islamarkaana dhisaysa waa bulshada. Bulsho marka la leeyahayna goobaha hoos yimmaada maamulka uu hal dal leeyahay xad-ahaan dadka ku nool dhammaantood ayaa la yidhaahda taas oo nidaam diimuqraadiga ah dawlada lagu asaasayo ka qayb gasha ee da'doodu ka sarayso 18 jir oo ah muwadiniin sharcigu ka mamnuucay in ay fal-dambiyeed halis ah fuliyaan weeyaan.

Rasmi ahaan diimuqraasiga labo qayboodba loo qaybin karaa. Wayna kala yihiin; Nidaam diimuqraadiga oo toos ah iyo mid wakiilo loo doortay in bulshada ay matalaan. Diimuqraasiga tooska ah muwaadiniintu iyaga oo wax wakiil ah aan u diran go'aan kasta ama arrin kasta oo la wado si toos ah ayey uga qayb qaadanayaan. Nidaamkan oo kale wuxuu jiri karaa meelaha bulsho tiro-yari ka jirto sida macad, urur bulsho ah leeyahay tusaale ahaan urur ama jimciyad iskaashato ah–IWM ururka arrimaha deegaanka ama marka uu jiro shirku saabsan arrimaha horrumarinta xaafada ama shaqaalaha, dhalin yarada gabdhaha iyo ururada kale ee la midka ah inta la ururiyo wakiiladoodu in ay goob isugu yimmaadiin kadibna wada hadlaan heshiina ka gaadhaan ama cod wax ku go'aamiyaan xaalad awood u siinaysa weeyaan.

Taariikhdi Ateens ee dalka Giriiga mar kali ah ayey shan kun iyo lix kun dad gaadhaya inta ay isu-soo urursadeen ayey u coddaynayeen si ay si toos ah ugu dhaqan galiyaan nidaamka diimuqraadiga ah. Mudo marku sida ku socday maadaama codadka bulshadu marba marka xiga si kordhayey nidaamka diimuqraadi ee tooska ah in la dhaqan galiyo ayaa adkaatay ama la karii waayey. Sida daraadeed fursada kale ee la haysto waxaa weeye in nidaamka diimuqraadi ee wakiilo lagu dooranayo la qaato lana dhaqan galiyo. Nidaamka diimuqraadiyadeed ee wakiilashada waxay bulshadu doorata xubno go'aamiya arrimo siyaasadeed oo amniga bulshada ku salaysan, mas'uuliyiin diyaaariya barnaamijyo la xidhiidha maamulka oo sharciga waafqsan. Mas'uuliyiinta, iyaga oo wata ama adeegsanaya magaca bulshada arrimaha asaasiga ah ee dalka ayey si qoto dheer uga wada hadlaan uga doodaan islamarkaana go'aano uga soo saaraan.

Dalkeena mas'uuliyiinta noocan oo kale ah waxaa soo doorta bulsho tiradeedu dhan tahay boqol kun oo qof oo meel ku wada nool oo loo qaadanayo hal goob doorasho hal qof oo wakil ah ayey soo dooranayaan kadibna waxaa loo soo diraya golaha wakiilada shacabka ee heer fadaraal.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-koox)***

- Layliska labbaad ha ka shaqeeyaan si fursad ay afka kaga sheegaan jawaabaha. Si ay fir-fircooni u hellaan sii tilmaamo si dadban u fahamsiinaya jawaabaha laakiin si toos ah ha ugu sheegin waxyaabaha lagu xoojinayo.

1. Waxyaabo qeexaya arrimaha nidaamka diimuqraadiga ee dugsiga dhexdiisa.
   - ❖ Ardeydu ururka ay doortaan in ay xor u noqdaan xubin ka noqoshada.
   - ❖ Dhibaatooyinkooda in ay wada hadal ku xaliyaan.

2. Waxtarka ay leedahay in nidaamka diimuqraadigu dugsiga dhexdiisa ka jiro.
   - Ardeyda iyo shaqaalaha dugsiga in si habboon loo daryeelo xuquuqahooda ayu fursad u siinaya.
   - Is-ixtiraam, isfaham/isu-tanaasul iyo in midba midka kale taageero ayuu fursad u siinaya.

## 1.2. XUQUUQAHA ADAMAHA IYO KUWA DIIMUQRAADIYADA (2-XIISADOOD)

Hawlaha fasalka lagu diyaarinayo qalabka xog urursiga:

- Sawiro, boostaro---iwm qeexaya xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiga.
- Bayaanada/go'aanada la xidhiidha dastuurka dawladaha heer fadaraal iyo kuwa heer deegaan.

### 1.2.1. Macnaha Xuquuqaha Adamaha

***Su'aalaha Hordhaca ah***

- Macnaha xuquuqaha adamuhu waxaa uu yahay warqad ha ku qoraan iyaga oo odhaahyadooda gaarka ah isticmaalaya.
- Jawaabta ama macnaha ay ku qeexeen saaxiibadooda ay is-garab fadhiyaan ha kala wada sheekaystaan.
- Su'aalaha kale ee bare aad u soo bandhigto in ay ka shaqeeyaan ku dhiiri-gali.

***Faah-faahin***

- U sharax macnaha xuquuqda Adamuhu waxaa ay tahay wax ayna fahmin hadi uu jiro si fursad ay su'aal kugu weydiiyaan.

***Macnaha Xuquuqaha Adamaha (Biniadamnimo)***

Xuquuqaha Adamuhu waa xuquuqo uu qofku ku helay biniadamnimadiisa oo qofna aan laga xoogi Karin ama lagaga xadgudbi Karin islamarkaana qofka la siiyey. Qodob ahaan xuquuqahani ma'aha kuwa qofka la siiyo ama loo biiriyo ama cid guudka kaga timmaada awood kaga naaqusi karto. Tanina waa mid lagu qeexay dastuurka jamhuuriyada diimuqraadiga fadaraalka Itoobiya (JDFI) cutubka 2aad qodobka 9aad.

Xuquuqaha adamaha iyo xoriyaduhu waa kuwo ku salaysan abuurka biniadamka oo aan la jabin Karin islamarkaana aan laga riixi karaynin.

Xuquuqaha Adamuhu waa kuwa loo baahan yahay in qofwalba loo tixgaliyo, loo aqoonsado islamarkaana aan habboonayn in lagu tunto. Xuquuaha Adamaha waxaa ka mid ah nolosha shakhsiga u gaarka ah, caafimaadka xubnihiisa, xoriyadiisa, sinnaanta, dinta, waxyaabaha uu aminsan yahay iyo aragtida–iwm ujeedaduna waxaa weeye in qof kasta oo muwaadin ah oo aan xukuun maxkamadeed ku dhicin islamarkaana ayna amarin in aan la xidhin, in aan gurigiisa la baadhin, in aan la dilin, in hantida ama alaabtiisa aan la dhaxlin, si madaxbanaana kolba goobta uu rabo u guuro xaqa uu u leeyahay in loo tixgaliyo iwm.

Xuquuqaha ma'aha kuwo Dastuurka iyada oo loo cuskanayo dadka waayi karo ama mas'uuliyiinta dawladu shakhsiyaadka u qeexi karaan, ka naaqusi karaan. Marka sedan la leeyahay macnuhu ma'aha sharci ku saabsan xuquuqaha adamaha oo la soo saaro ma jiro. Waxaa jira sharciyo badan oo xuquuqaha adamaha ku saabsan oo la soo saaro. Sharciyadani laakiin waa kuwo loogu talagalay in lagu daryeelo ama lagu sugo xuquuqaha biniadamnimo ee ma'aha kuwa loogu talagalay in lagu xadido xuquuqaha adamaha.

Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya (JDFI) cutubka saddexaad qaybta 1aad ee qodobka 14-48 ayaa xuquuqaha Adamaha si fah-faahsan u sharaxaya.

### 1.2.2. Macnaha Xuquuqaha Diimuqraadiyadeed

***Hordhaca***

***Sawirka 1-3 iyo Su'aalaha Hordhaca***

- Xuquuqda diimuqraadiyadeed ee sawirku muujinaya waxaa ay tahay sheega.
- Idinka oo sawirka ka dhaqaaqaya qeexa waxaa uu yahay macnaha xuquuqda diimuqraadigu.
- Bare cinwaankan hoostiisa sawirka lagu soo bandhigay iyaga oo ku salaynaya (sawirka 1.3. ururo sammaynta) ardeydu ha kawada hadlaan su'aalaha ku hoos qorana hana ka jawaabaan, jawaabo afka ah in ay ardeydu ka bixiso way karaan.
- Adiga oo halki ka sii wada macnaha xuquuqda diimuqraadiyadeed waxaa uu yahay u sharax ardeyda xuquuqaha iyo waajibaadka wax la kala qaadi karo in ayna ahayn iyo si qofku u helo xuquuqdiisa in ay ku xidhan tahay kolba sida uu waajibaad ka saran uga soo baxo tusaale ahaan ugu soo bandhig kuna fahamsi.

**Macnaha Xuquuqaha Diimuqraadiyadeed**

Xuquuqaha diimuqraadiyadeed kuwa la yidhaahdo waxaa weeyaan xuquuqo qof kasta oo muwaadin ah nidaamka siyaasadeed ee ka jira agagaarka ama dalka uu ku noolyahay aragtida siyaasadeed ee uu aminsan yahay oo ka soo dheegantay nidaamka diimuqraadiyadeed in uu si nabad galyo ku dheehan tahay ugu dhaqmo xuquuqo lagamamaar-maan ah in loo tixgaliyo weeyaan.

Sida-daradeed, waxaa uu xaq u leeyahay in uu sharaxo fikradaha ama aragtidiisa, qabto shirar iyo in uu banana baxyo nabadgalyo ah abaabulo, is-habayn ama is-abaabul la sammeeyo, waxaa uu xor u yahay in uu tago ama u wareego goobaha uu rabo, xuquuqaha gaar ahaaneed iyo kuwa qoys ahaaneed, xuquuqda gabdhaha, xuquuqaha carruurta, xaqa uu u leeyahay in qofka muwaadinka ah helo xukun/xal caddaalad ah, xaqa uu u leeyahay in uu wax doorto lana doorto, xaqa uu u leeyahay inuu hanti/alaab yeesho, xaqa uu u leeyahay in uu noqdo shaqaale, xaqa uu u leeyahay in uu ka qayb qaato barnaamijyada horrumarinta (maal-galin) iyo waliba xaqa uu u leeyahay in uu ku noolaado deegaan ama goobo nabadgalyadeedu sugan tahay iwm.

Marka loo fiiriyo Dastuurka Itoobiya u yaala xuquuqaha diimuqraadiyadeed kuwa loogu yeedho ee ay diyaariyeen waaxyaha sharci dejinta, sharci fulinta ama garsoorku waa xuquuqo kolba sida xaaladu tahay ku xidhan oo mararka qaarkood la waayi karo ama xaalada jira awgeed mudo kooban ama cayiman muwaadinintu waayi karto.

Xuquuqahani waxay si faah-faahsan ugu qeexan yihiin Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya gaar ahaana cutubka saddexaad, qaybta labbaad qodobka 29-44aad dhaqan galinta Diimuqraadiyada (shaqo fasal oo qof-qof ah).

- Si aad u garatid inta uu dhan yahay fahamka ay ka helleen laysliska saddexaad faraqa u dhexeeya xuquuqaha adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeed waxyaabaha ay fahmeen in ay qoraal ahaan ku soo gudbiyaan ku dhiirigali in ay is-weydaarsadaan waxyaabaha ay qoreen islamarkaana midba midka kale isu-saxaan.

## 1.3. KALA DUWANAANSHAHA (2-XIISADOOD)

Qalabka loogu Talagalay in Warbixinada Shaqada Fasalka lagu urursado.

- Sawiro, boostaro, footogiraafyo muujinaya Qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya.

### 1.3.1. Faraqyada ama Waxyaabaha aragti ahaan Ardeydu ay ku kala duwan yihiin Fasalada iyo Dugsiga Dhexdiisa (1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Sawirka 1.4. Iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawirka 1.4 si fiican ugu fiirso adiga oo ardeyga dhinacaaga fadhiya la tashanaya.
- Liis gareeya waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin ardeyda dugisigiina wax ka barata.
- Liis gareeya aragtiyada midkiinba midka kale ay isaga midka tihiin iyo waxyaabaha aad ku kala duwan tihiin.
  - ❖ Sawirka 14aad in ay ka wada hadlaan waxbarashadana bilaabaan su'aalaha baraarujinta ee korka ku xusan ha ka shaqeeyaan. Jawaabaha ardeydu ka bixiso adiga oo dhax wareegaya fiiri.

***Faah-faahin.***

- Ardeydu iyaga oo ka dhaqaaqaya waxqabadyada ay korka ku soo qabteen sii fursad ay ku qeexaan macnaha faraqa ama aragtiyada lagu kala duwanaan karo waxaa ay yihiin. Arday gaadhaysa labo illaa iyo Shan jawaabtooda marka aad ka dhagaysatid kadib sharaxaada lagu soo bandhigay buuga ardeyga ee ku saabsan macnaha faraqa ama arragtiyada lagu kala duwan yahay u faah-faahi.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal)***

- Layliska 4aad su'aasha ugu horraysa ardeyda fasalka si guud ugu soo bandhig kadibna dhawr ardey ah sii fursad ay afka ugaga jawaabaan kadibna casharka xiga waad u dhaafi karta.
- Layliska 4aad koox-koox ha uga wada hadlaan hana uga jawaabaan. Ugu dambayna u soo koob nuxurka casharka.

### 1.3.2. Aragtiyada lagu kala duwan yahay oo laga heshiiyo Islamarkaana si nabad galyo leh loo wada noolaado (xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Isu-daya in aad xasuusataan mar saaxiibada ama gabdhaha iyo wiilasha walaalaha ah aad ciyaar ama wada hadal aad ku heshiin weydeen kadibna aad is-dirirteen ama aad isu-dhacdeen.
- Sheega saaxiibada wiilasha iyo gabdhahaba aad kala kulantay. Si kooban ugu sheeg sababaha aad isu-dirirteen waxaa ay ahayd iyo xiliga wixii dhacay.

Ardeydu iyaga oo labo-labo u wada shaqaynaya hawlgalada labada ah ee korka ku xusan ee loogu talagalay baraaruujinta ha fuliyaan. Bare adiga oo dhex wareegaya islamarkaana dhegaysanaya waxaa ay leeyihiin dhiirigali ama isu-day in aad dhiiri galiso. Haddii ay jiraan ardey leh dhacdooyinkani soo maray waxyaabo fiican (waayo arragnimo) ayaa laga baran karaa, fursad ay ardeyda intooda kala ugu soo ban dhigaan sii. Marka ay dhammaystiraan soo bandhigi waayo araganimadooda waydi ardeyda fasalka waxaa ay ka fahmeen wixii loo soo bandhigay. Ugu dambayna waxyaabaha la isku-maan dhaafsanyahay hadi laga heshiin waayo dhibaatooyinka ka dhalan Kara guud ahaan ha sheegaan.

***Hawsha la fulinayo (shaqo shakhsi ahaan ah)***

- Ardeyda sheekada safiya iyo fadumo qof-qof ha ku soo diyaariyaan. Bare adiga oo dhex wareegaya isu-day in aad dabagal ku sammayso in ay amusnaan ku akhriyayaan islamarkaana jawaabaha qorayaan. Marka ardeydu dhammayso dhawr ka mid ah ardeyda sii fursad ay ku akhriyaan jawaabaha ay soo diyaariyeen. Iyaga oo mudnaan gaar ah siinaya su'aasha 2aad, iyo tan 3aad in khilaafyada laga heshiiyo islamarkaana dadka kale si nabad galyo ku dheehan tahay loola noolaado waxyaabaha loo baahan yahay waxaa ay yihiin in ay

sheegaan iyo taariikhaha shimbiraha iyo (kafado) waxbarashada ay ka bartaan in ay dhaqan galiyaan inlooga baahan yahay sharaxaad ka sii kadibna casharada xiga uga gudub.

***Sharaxaad ama faah-faahin***

- Faraqyada (aragtiyada lagu kala duwan yahay) ee layliska shannaad ku xiga inta la is-waafajiyo Lana wada noolaado macnaheeda iyo waxtarka ay leedahay si qoto dheer ugu faah-faahi. Sharaxaadu qodobadan soo socda waa in lagu xuso.
- Faraqyada (waxyaabaha lagu kala duwan yahay aragti ahaan) in laga heshiiyo dadka kalena si nabad ah loola noolaado waxyaabaha muhiimka ah ee loo baahan yahay in ay yihiin dulqaad iyo in la isdhegaysto.
- Abbuur ahaan waxyaabaha dadku ku kala duwan yihiin in ay aad u badan yihiin iyo in ayna habboonayn in uu qofna qof kale ku odhanin fikradayda sax ah fikradaha dadka kale waa khalad.
- Aniga uunba sax ah fikrada leh in ay isu-dhac iyo daganaansho la'aan in ay dhaliso.
- Faraqyada (aragtida lagu kala gedisan yahay) oo la tix-galiyo ama si dhab ah loo aqbalo iyo in aragtiyada lagu kala duwan yahay laga heshiiyo si nabadi ku dheehan tahayna loo wada noolaado macnaheedu in uu yahay aminaada, aragtida, qaabka/muqaal–iwm in kasta oo lagu kala duwanaan karo waxaa kale oo lagu macnayn karaa in loo baahan yahay in qof walba xaq uu leeyahay aragtidiisa in loot ix-galiyo sharaftiisana loo illaaliyo.
- Fahamsi in kala duwanaanshuhu faa'iido leeyahay islamarkaana ay wanaagsan tahay in si kal-gacayl iyo niyad wanaag ku dheehan tahay loo aqbalo. Iyada oo adamuhu abbuuro ahaan aragtida ku kala duwan yahay in ay hadana lagamamaarmaan tahay in si nabadgalyo iyo is-jacayl ku dheehan yahay loo wada noolaan karo waa in ay fahmaan.

***Hawsha la fulinayo (qof-qof-shaqo guri)***

- 2 su'aalood ee layliska lixaad hoostiisa lagu soo bandhigay inay si fiican uga soo shaqeeyaan una keenaan ku dhiiri gali.
- Shaqada ay soo qabteen ka qaad islamarkaana akhri waxyaabaha aad is-leedahay aqoon fiican bay ka helayaan inta aad ka soo dooratid ama ardeyda aad ku dhiiri galiso in ay ka soo doortaan in ay ardeyda fasalka u akhriyaan ku amar.
- Dhacdo kasta oo ka mid ah kuwa ardeydu soo bandhigtay aqoonta ay ka barteen si ay u sheegaan ku dhiiri-gali.
- Ugu dambayna waxtarka ay leedahay in aragtiyada lagu kala duwan yahay si niyad wanaagsan leh loo aqbalo aragtiyada lagu kala duwan yahayna laga wada hadlo kadibna laga heshiiyo si wada jir ah oo nabad galyo ahna loo wada noolaado in ay mudnaanta siiyaan ku dhiiri gali.

## 1.4. NIDAAMKA DAWLADEED EE ITOOBIYA (2-XIISADOOD)

Diyaarinta fasalka: Macnaha iyo Muhiimada Diimuqraadiyada.

- Footoogiraafyo, boostaro–iwm muujinaya asaasida/golaha asaaska u ah jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka ah ee Dawlada Itoobiya.

### 1.4.1. Macnaha iyo Muhiimada ay leedahay Dawlada Diimuqraadiga ah

***Hordhaca***

***Sawirka 1.5, 1.6. Iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawirka 1.5. Dadka uu muujinayo maxay sammaynayaan?
- Sawirka 1.6. Muxuu muujinaya?
- Erayga Dawlada marka aad maqashaan waxyaabaha maskaxdiina ku soo dhacaya qeexa.

- ❖ Sii ardayda fursad ay kaga jawaabaan su'aalaha saddexda ah ee korka ku xusan kuwaas oo ku saabsan sawirada 1.5. Iyo 1.6. Iyaga oo afka kaga jawaabaya.
- ❖ Sii sharaxaad kooban oo ku saabsan macnaha iyo muhiimada Nidaamka Diimuqraadiyadu leedahay.

**Macnaha iyo Muhiimada Dawlada Diimuqraadiah**

Awooda Dawladeed ee Nidaamka Diimuqraadiga ah waxay ka soo asaasanta ama ka soo bilaabmata bulshada. Waa dawladalagu maamulo ugu saraynta sharciga. Sidi horayba loosoo sheegay mas'uuliyiinta dawlada ee heer xaafadeed (qabale) illaa iyo heer dal u dhexeeya bulshada dalka ku nool ayaa soo doorata.

Xubnaha la dooranayo waa in ay noqdaan kuwo bulshadu rabto islamarkaana ay aminsan tahay in ay wax u qabanayaan codkoodana siiyaan. Xubinka la doortay hadi uuna lahayn karti ama dambi lagu helo xiligi loogu talagalay in uu shaqeeyo oo aan gaadhin ayaa awooda ama xilka laga qaadi karaa. Hadii xata xiligi loogu talagalay dhammaysto mar labbaad lama dooranayo. Tanina waxay muujinaysa in awooda mas'uuliyiinta xilka haya ay ku xidhan tahay ogolaanshaha iyo illaalada ama dabagalka bulshada,

***Hawsha la fulinaya (shaqo-fasal-jawaab afka ah)***

- Bare/si ay qeexitaanka u dhammeeyaan layliska 7aad labada su'aalood ee ku hoos qoran jawaabo afka ah haka bixiyaan. Ardeyda oo dhani in ay isu-dayaan in ay ka jawaabaan ku dhiiri-gali si aad u hubiso fahamka sharaxaad ay ka helleen inta uu le'eg yahay ardeyda jawaabaha bixisay iyo kuwa kale ee aan gacmaha taagin ku dhiiri-gali in ay ka jawaabaan. Ugu dambayna jawaabaha saxda ah si kooban ugu soo bandhig ardeyda.

### 1.4.2. Macnaha Dawlada Fadaraalka ah

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Erayga fadaraal marka aad maqashin fikrada maskaxdiina ku soo dhacayso waxaa ay tahay warqad ku soo qora.
- Macnaha erayga fadaraal ee aad warqada ku soo qorteen ardeyda garabkiina fadhida kala tashada idinka oo jawaabihiina is-barbar dhigaya. In intee le'eg bay kala duwan yihiin ama isu-mid yihiin?
  - ❖ Qodobkan hoostiisa su'aalaha baraarujinta ah ee lagu soo bandhigay ha ka shaqeeyaan iyaga oo tilmaanta la siiyey ku soconaya ama ku salaynaya.
  - ❖ Inta ardeydu shaqaynayso bare isu-day in aad dhex-wareegto una kuur-gasho shaqada ay hayaan. Sida ay ula muuqato in ay uga jawaabaan ku dhiirgali.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu faah-faahi macnaha Dawlada Fadaraalka ah.

**Macnaha Dawlada Fadaraalka**

Qaab dhismeedka Dawlada Fadaraalka ah macnaheedu waxaa weeye awooda dawlada inteeda badani waxaa loo qaybiya labo qaybood. Marka hal dhinac laga fiiriyo waxay leedahay Dawladu gole dhexe oo fadaraal ah. DHinaca kalena waxaa jira Dawlada deegaano middoobay awoodooda hoos u dhigay ama naaqusay oo heshiis wada jir ah Dawlada Fadaraal ah ku sammaystay. Hadi aynu si kale u sheegno waxaa jira dawlad gobaleedyo lagu asaasay heeshiis si wada jir ah oo ku salaysan dawlada heer fadaraal iyo midaw ay middoobeen awoodoodana hoos u dhigeen. Itoobiya maadaama qarano, qoomiyado iyo shucuub kala duwan ay si nabada iyo barwaaqo leh u wada noolaadaan waxaa u suurto galiyey waxaa weeyaan rabbitaanka iyo xiisaha qoomiyadaha iyo shucuubta. Qaramada, Qoomiyadaha iyo shucuubtan iyaga si nabadgalyo

leh u wada nool kolbi inti awoodooda ah si ay deegaanadooda u illaalshadaan ama maamulaan waxaa lagamamaar-maan ah in awood ku filan la siiyo. Qaab dhismeed dawladeed oo la jaan qaadaya ama waafaqsan sidana waa qaab dhismeedka Dawlada Fadaraalka ah.

Deegaanadu iyaga oo awood ku filan oo ay isu-maamulaan la hadhaya mudnaantana siinayay danaha guud islamarkaana raba in illaalshadaan faa'iidooyinka ay la wadaagaan qoomiyadaha kale ee dalka ka jira, awood ay dawlada fadaraalka ay siiyaan weeyaan. Awooda dawlada dhexe waa inuu noqdo mid buuxa(aan naaqus ahayn) oo aan halis galinayn dadaalka ay qoomiyaduhu ugu jiraan in ay illaalshadaan faa'iidooyinka iyo midnimadooda.

Dhinac kale marka laga fiiriyana looma baahna in awooda oo dhan lagu soo ururiyo gacanta dawlada dhexe kadibna awooda qoomiyaduhu deegaankooda ku maamulaan ay yaraato ama soo koobanto. Inkasta oo ay jiraan nidaamyo kala duwan oo wax loo illaalio, Itoobiya laakiin xuquuqdooda bulshooyinka asafafarkooda, luqada, waxaa ay yihiin (cida ay yihiin) ama qaranimadooda waa mid xadayntoodu ku salaysan tahay rabbitaanka qoomiyadaha xaddaynta noocan oo kale ah waa mid qoomiyad kasta in ay iskood isu-maamulaan, luqadahooda, taariikhahooda–iwm in ay ku kobciyaan u fudaydinaysa islamarkaana u sahlaysa in xuquuqahooda noocan oo kale ah ku illaalshan karaan.Tanina waxay caawinaysa in ayna bulshooyinka u horseedin isu-dhacyo iyo in aan xuquuqahooda aan lagu xadgudbin.

Dawlada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya qaab-dhismeedkeedu waa mid asaas looga dhigay qodobada sharciga ku xusan dasatuurka dalka u yaala. Qodob 1aad ee Dastuurka ee ku saabsan magaca dawlada marka la qeexayo; "Dastuurkani in uu yahay mid fadaraal ah islamarkaana qaab-dhismeedka dawliga ah uu ku salaysan yahay" iyada oo qodobkan lagu salaynayo.

Dastuurka wuxuu leeyahay Dawlada Itoobiya waa in loogu yeedho"Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka "magic ah. Qodobka 8aad-na wuxuu dhigaya sedan: Qaramada Qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya waxay leeyihiin awooda qaranimo ee ugu saraysa. Sharcigan dastuurku wuxuu qeexaya awooda qaranimo ee ugu saraysa qeexaya wuxuu leeyahay wakiiladooda ay dooranayaan iyo ka qayb qaadashada diimuqraadiyadeed ee tooska ah mid ku saabsan ama la xidhiidha weeyaan.

Kadibna qodobkia 46aad Dawlada Fadaraalku waa mid laga soo asaasay Dawlad-gobaleedyada. Qaab-dhismeedka maamul-gobaleedyada waa mid ku salaysan ka qaybgalka,luqada, waxaa ay yihiin iyo rabbitaanka bulshada.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-afka)***

Bare! Sharaxaada marka aad soo gaba-gabayso kadib layliska 8aad hoos qoran in ay afka kaga jawaabaan ku dhiirgali.Si aad u xaqiijiyo fahamka ay helleen inta uu gaadhsiisan yahay ardeyda aan gacmaha taagin ha ka jawaabaan ugu dambayna jawaabaha aan saxda ahayn u sheeg ardeyda.

### 1.4.3. Macnaha Dawlada Deegaanka

***Hordhaca***

***Sawirka 1.7***

- Macnaha Dawlada Deegaanku waa maxay?
- Dawlada deegaanada Itoobiya leedahay waa imisa? Liis gareeya magacyada Dawlada deegaanada.
    - ❖ Sawirka 1.7. iyaga la xidhiidhinaya su'aalaha korka ku xusan ha ka jawaabaan. Iyaga oo qof-qof ama labo-labo ah jawaabaha su'aalaha qoraal ahaan ama afka ahaan way kaga jawaabi karaan.
    - ❖ Sharaxaan kooban oo ku saabsan macnaha dawlada deegaanada sii.

Siidi horrayba loo soo sheegay dawlada deegaan waa midaw awoodi uu lahaa iska naaqusay oo heeshiis wada jir ah ama midaysan lagu saleeyay in dawlada heer fadaraal ah lagu dhiso. Waa ismaamul dawladeed oo leh Dastuur ka duwan kan dawlada fadaraalka oo ay gaar u leeyihiin.

***Hawsha la fulinayo***

Bare!marka sharaxaad aad soo gababagayso su'aalaha layliska layliska sagaalad ku xiga ardeyda oo dhan in ay jawaabo afka ah ka bixiyaan ku dhiirigali. Si aad u xubiso fahamka casharka ay ka helleen inta uu dhan yahay ardeyda aan gacmaha taagin sii fursad ay kaga jawaabaan ugu dambayna jawaabaha saxda ah u sheeg.

### 1.4.4. Macnaha Maamulka Magaalada

***Hordhaca***

***Sawirka 1.8***

- Macnaha maamulka magaaladu waa maxay?
  - ❖ Sawirka 1.9 iyaga oo la xidhiidhinaya macnahah maamulka magalaadu waxaa uu yahay ka jawaabaaan ku macsuum ardeyda.
  - ❖ Faah-faahin kooban ka sii macnahah maamulka magaalada la xidhiidha.

Macnaha magaalo (maagalo macnaheed) magaalo waxaa la yidhaahda hal meel oo dadku ku soo ururay oo uu ku noolaado waxaana lagu qeexa nooca shaqada dadku ka shaqeeyo iyo aqliibiyada dadka deegaanka degan ku salaysan. Itoobiya gaar ahaan goobta magaalo waxaa lagu tilmaami kara marka tirada dadka ku nooli ka badan yahay 2000 oo qof islamarkaana dadka deegaanku shaqada ay ka shaqaystaani tahay mid ka baxsan shaqooyinka beeraha la xidhiidha.

Tusaale ahaan shaqooyinka laga adeegto sida shaqooyinka warshadaha iyo kuwa la xidhiidha dadka ka shaqaysta goobta ay ku nool yihiin ayaa magaalo loo yaqaano.

Macnaha maamulka magaaladu waxaa weeye goob waxaa magaalo loogu yeedhi karaa marka ay buuxiso shuruudihii magaalonimo oo ay ka mid yihiin maamulka ay magaalo lahayd loo diyaariyey. Itoobiya dhexdeeda magaca magaalo magaalooyin tiro badan shuruudaheeda buuxinaya ayaa jira. Magaalooyinkan waxaa lagu maamula maamulki magaalo inay yeelato ay ahayd. Marka laga reebo maamulka magaalada Addis-Ababa iyo maamulka magaalada Diri-dhaba oo Dawlada dhexe Fadaraalka hoos tega Maamulka magaalooyinka kale oo dhan waxay si toos ah u hoos tagaan Dawlada deegaanka Dalka ka jira.

Magaalooyinku in maamul loo sammeeyo iyo n lagu maamulo nidaamka kaantibada loo yaqaano waxaa loogu talagalay in ay darajada magaalada illaaliyaan, barnaamijyada lagu horrumarinayo magaalada in la de-dejiyo ayaa waxay ka mid yihiin arrimaha bulsho iyo kuwa dhaqaale ee dhibaatooyinka magaalada lagu tir-tirayo islamarkaana bulshada magaalada degan siinaya fursad ay kaga faa'iidaystaan dadaalada magaalada lagu horrumariyo.

Maamulka magaalada Addis-Ababa. Addis-Ababa wax xarunta Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Dawlada Itoobiya. Magaaladu waxay leedahay maamul u gaar ah oo loo sammeeyey waxayna hoos tegta ama mas'uuliyadeeda iska leh Dawlada Fadaraalka.

Maamulka magaalada Addis-Ababa waxaa hogaamiya Gole ka kooban xubno bulshada magaalada degan soo dooratay si ay maamulka magaalada sida duqa, kuxigeenka duqa magaalada iyo isu-duwaha shaqada/hawlaha (manager) ayaa laga doorta.

Maamulka magaalada Addis-Ababa waa xubnaha siyaasada lagu habbaynayo magaalada doorka ugu sareeya ka ciyaara.

Marka maamulka magaalada laga yimmaado waxaa jira maamulo u qaabilsan qaybaha ama

waaxyaha kala duwan ee magaaladu leedahay oo ay ka mid yihiin maamulka xaafadaha ay magaaladu ka kooban tahay. Maamulka xaafadu darajo ahaan waa waaxda ugu hoosaysa ee kaalin muhiim ah ka qaadata arrimaha siyaasadeed ee lagu habbaynayo laguna horrumarinayo magaalada.

Maamulka magaalada, maamulka waaxyaha magaalada iyo maamulka xaafaduhu mid walba waxay leedahay gole dhexe oo u qaabilsan maamulka. Golaha maamul ee xaafadina wuxuu hyoos yimmaada bulshada degan xaafada iyo golaha maamul ee waaxyaha magaalada. Maamulka waaxyaha/qaybaha magaaladuna wuxuu hoos yimmaada bulshada waaxda degan iyo golaha maamulka guud ee magaalada. Golaha maamul ee magaalada Addis-Ababa wuxuu hoos yimmaada Dawlada Fadaraalka iyo bulshada maagalada degan ama ku noo. Sida daraadeed, waax kasta oo ka mid ah maamulka heerarka kala duwan leh magaaladu mid walba wuxuu leeyahay Af-hayeen iyo isu-duwaha hawlaha ama shaqada magaalada.

Maamulka magaalada Addis-Ababa gaar ahaan golaha maamul ee magaladu dhammaan hawlaha ama barnaamijyada horrumarineed ee magalada ka socda misiaaniyadaha lacageed ee lagu fulinayo ayuu u qoondeeya. Bulshada ku nool magaaladuna waxay fudaydisa dhibaatooyinka dhaqaale iyo kuwa bulsho ee magaalada ka jira. Masiibooyinka sida lama filaanka ah ula soo gudboonaada ayey xal u raadiyaan. Barnaamijyada lagu ballaadhiyo ayey diyaariyaan. Waxay qorsheeyaan jihooyinka magaalada mustaqbalka ka kobcayso.

***Hawl fasal (shaqo-kooxeed)***

- Sii fursad ay labo-labo ama koox-koox ugaga wada hadlaan su'aasha 1aad ee layliska 10aad ka tirsan.
- Ardeyda oo wada hadlaya isu-day in aad dhex-wareegto una kuur gasho hawsha ay fulinayaan.
- Labo kooxood ardeyda fasalka intooda kale jawaabahooda ha soo bandhigaan.
- Ugu dambayna si kooban ugu soo gaba gabee nuxurka casharka.

## 1.5. XIDHIIDHKA DIBBADA (2-XIISADOOD) QALABKA URURINTA QALABKA URURINTA XOGAHA WAXBARASHO

- Sawiro kala duwan oo muujinaya midnimada ama midawga.

### 1.5.1. Macnaha Xidhiidhka dibbada iyo Siyaasadaha Xidhiidhka dibada

***Hordhaca***

***Sawirka 1.9. Su'aalaha Hordhaca***

- Dalalka dariska la ah arrimaha ay xidhiidhka kala leedahay waxaa ay yihiin ma garanaysiin?
    - ❖ Sawirka 1.9 su'aalaha sawirka hoostiisa ku xusan jawaabo afka ah in ay ka bixiyaan ku dhiirgali.

***Hawlaha la fulinayo (shaqo fasal koox)***

- Ardeydu dhawr kooxood oo waa wayn ha isu-qaybiyaan haka wada hadlaan sidi ay isu-fahmi lahaayeen si nabadgalyo ah u wada noolaan lahaayeen shaqadoodana mid midho dhal ah u noqon lahayd waxyaabaha lagamamaar-maanka ah ee loo baahan yahay in lala yimmaado.
- In loo baahan yahay in wada haddalkoodu mudnaanta koobaad hal ka mid ah hababka ama xirfadaha ay baranayaan in ay tahay ardeyda u sheeg.
- Kuwan soo socda hal ka mid ah oo aad ku xoojinaysid sii ardeyda, Tusaale ahaan, ay qoysaskooda nabadgalyo ugula noolaadaan in xubnaha qoyska la xaajoodaan. Kolba inti awoodooda ah inay qoyskooda caawiyaan, allaabada hantidooda ah oo aad daryeeshid, sariirta aad ku seexatid

oo aad laabtid, nadaafada guriga oo aad ka qayb qaadatid ayaa loo baahan yahay.

- La soco wada hadalka. Koox walba wada hadalkeeda marka ay dhammayso kooxba mar jawaabahooda ardeyda fasalka ha u soo badhigto.
- Ugu dambayn jawaabaha ardeydu bixisay adiga oo ku salaynaya waxyaabahan soo socda ku soo gaba-gabe.

Saaxiibadooda si loola noolaado in saaxiibka la tixgaliyo ama la ixtiraamo. Waxaa uu ka hadlayo si wanaagsan loo dhegaysto. Si naxariis leh oo loo wada hadlo, si lama filaan ah marka is fahmi waa uu u soo dhax galo in xaaladaha si dulqaad ku dheehan yahay loo fiiriyo arrinta ama mawduucana si nabad galyo ku dheehan tahay looga wada hadlo, kartidaada iyo aragtidaada iyo waliba maskaxdaada ama garaadkaaga oo aad jarabtid, waa sax qofka leh ee aminsan hadi aad noqotid si degan u fahmsi–iwm ayaa looga baahan yahay. Guud ahaan waxaa wanaagsan in la noqon qof anshax wanaagsan.

***Faah-faahin***

- Xidhiidhka iyo siyaasada xidhiidhka dibada faah-faahin ku saabsan u soo bandhig. Faah-faahinta siyaasada xidhiidhka dibada ee dalkeena kuwa dalalka kale inaga oo ixtiraamayna waa in uu mudnaan siiyo ama ku salaysnaado daryeelka danaha guud ee aynu la wadaagno.

Illaalinta waxtarka iyo xoriyada dalkeena macnaheedu waa maxay? Ilaalinta faa'iidada iyo xoriyad dalkeenu macnaheedu ma'aha dalalka kale iyo dawladaha xidhiidh lama sammaysan karo. Xiliyadan aynu ku jirno bulshooyinka caalamku xidhiidhka ballaadhan ee dhexeeya in aynu dibada ka ahaano kaligeena dadaalo kala duwan aynu sammayno ma noolaan karayno. Waxaa lagamamaar-maan ah in aynu xidhiidh dhaqaale, siyaasadeed, mid bulsho–iwm la yeelano bulshada caalamka si danaheena dalalka dibadu midho dhal u noqdaan.

Hadi aynu bulshada caalamka iyo dalalka kale xidhiidh wanaagsan oo dhinac walba leh la yeelan weyno suurtagal ma noqonayso in dalagyada dalkeena ka soo baxa ee dheeriga in aynu dalalka dibada u dhoofino islamarkaana dhaqaalaheena kor u qaadno. Sida daraadeed si aynu danaheena u gaadhno Dawladaha dibada waa in aynu xidhiidh wanaagsan la yeelano.

Marka aynu dhinac kale ka fiirino si danaha iyo xoriyada dalkeena u illaalshano xidhiidhka dalalka dibada aynu la leenahay ha noqdo mid aynu danaheena oo kali ah ku illaalshano ma odhan karno waxaa loo lagamamaar-maan ah in danteena iyo danaha dalalka kaleba aynu illaalino.

Laakiin hadi aynu danaheena oo kali ah illaalshano danaha dalalka kalena aynu xil iska saari weyno waxaa adkaanaysa in aynu helno dalal xidhiidh nala sammaysta. Sida daraadeed xidhiidhka aynu la yeelano dalalka kale danaheena ka sakow waa in aynu danaha dalalka kale xiisaabta ku darsamo. Hase yeeshee, dalalka kale waxaan xidhiidh la sammaysan karnaa marka aynu isu taagno in aan danaha guud ee aynu dalalka kale la wadaagno xoojino. Marka aynu soo koobno faa'iidada iyo xornimada dalkeena si aynu u sugno dhammaan arrimaha deegaanadeena jira oo dhan sida siyaasada, dhaqaalaha–iwm inaga oo faa'iidooyinka dalalka kale waxyeelo gaadhsiinayn in aynu dalkeena dulsaarnimada ka saarno waa tallaabo aynu bulshadeena faa'iidadeeda iyo sharafteeda ku illaalin karno.

Fikradaha asaasiga ah ee Dastuurka dalkeena ku xusan ee la xidhiidha daryeelka faa'iidada iyo xornimada dalkeenu waxay qeexayaan fikradaha korka ku xusan. Istraatiijiyadaha ku saabsan xidhiidhka dibbada qodobka 86aad ee dastuurka ayaa sedan soo socta u soo dhigay:

Itoobiya waa in ay ku socoto siyaasad ku saabsan xidhiidhka dibbada oo daryeesha ama illaalisa danaha bulshada iyo qaranimada dalka.

- Si loo illaaliyo qaranimada iyo sinaanta dawladaha arrimaha dalalka kale waa in aan lagu xadgudbin.
- Siyaasada dalka ee saabsan xidhiidhka dibada waa in ay noqoto mid ku salaysan faa'iidada iyo sinaanta wadaaga ah. Sidoo kale heshiisyada heer caalami waa in ay noqdaan kuwa tix-galinaya ama illaalinaya faa'iidada Itoobiya.
- Heeshiisyada heer caalami iyo sharciyada illaalinaya ama daryeelaya qaranimada Itoobiya iyo faa'iidooyinka bulshooyinka dalka waa in la qadariyo.
- In la xoojiyo allaabada dhaqaale ahaaneed iyo walaalnimada bulshooyinka dalalka dariska ah iyo gobalada kale ee Afrika ee marba-marka ka xiga sii kordhaya.
- Isu-dhacyada dalalka ka dhex qarxana in si nabadgalyo leh xal loogu hello in lagu dadaalo.

Qodobadan ku saabsan xidiidhka dibbada ee dastuurka lagu qeexay wax ka baxsan nooc kastaba ha ahaade in lala yimmaado ayaa mamnuu cah. Maadaama Dastuurka dalkeenu si faa'iidada iyo xornimada dalkeena illaaliya waxaa la odhan karaa dastuurka ugu sareeya ee dalkeena.

### HAWSHA LA FULINAYO (SHAQO-FASAL-KOOX)

- Bare! Qeexi taanka marka aad dhammaysid labada su'aalood ee layliska 11aad ardeydu koox-koox ah uga wada hadlaan.

***Gaba-gabada Cutubka***

- Bare gabagabada cutubkan marka aad soo gaadho adiga oo ardeyda fursad siinaya weydi in ay qeexaan waxyaabaha ay ka barteen kana fahmeen cutubki ay soo barteen.
- Ardey dhawr ah marka fursad aad siiso kadib si kooban ugu soo bandhig duluucda cutubka.

1. Macnaha diimuqraadiyadu waxaa weeye waa nidaam awooda maamul bulshada dalku iska leedahay.
   - Xuquuqda is-habbaynta xaga qofku u leeyaay in uu xal ama caddaalad helo.
   - Xaqa qofku u leeyahay in uu fikradiisa qeexo.
   - Xaqa loo leeyahay in la is-urursado banaan bax nabad galyo ahna la sammeeyo.
   - Xuquuqda Dumarka.
   - Xuquuqda carruurta.
   - Xaqa qofku u leeyahay in uu wax doorto lana doorto.
   - Xaqa qofku u leeyahay in uu allaab amah anti yeesho.
   - Xaqa la xidhidiha horrumarinta.
   - Xaqa qofku u leeyahay in uu hello deegan amnigiisu sugan yahay su'aalahan ka jawaab adiga oo tilmaamaha lagu siiyey.

1. Weedhahan soo socda tii run ah ku qor 'Run' tii aan sax ahayna ku qor 'Been'.

## QORSHAHA MUUNADA WAXBARASHADA

### Diimuqraadigu waa maxay?

| Xiisada | Hawsha Baraha | Hawsha Dadka |
|---|---|---|
| 10′ | **Hordhaca**<br>• Si waxbarashada loo bilaabo waxyaabaha loo adeegsado baraarujinta ama fir-fricooni galinta sida loo sammeeyo in la sheego boga 5aad oo cidhif ka ah su'aalaha ku qoran. | • Iyaga oo labo-labo ah ama koox-koox ah islamarkaana sawirada ku salaynaya su'aalaha ka jawaabaan. |
| 10′ | **Hawsha (shaqo-fasal-koox)**<br>• Qoraalka ku saabsan doorashada horjoogaha fasalka ha akhriyaan hana ka shaqeeyaan layliska koobaad. | • Cinwaanka leh doorashada horjoogaha fasalka qoraalka ku hoos qoran inay akhriyaan.<br>Layliska koobaad su'aalaha ku hoos qoran ee saddexda ah ha ku jawaabaan. |
| 5′ | **Faah-faahin**<br>• Macnaha diimuqraadiyada in faah-faahin koobad laga siiyo iyo in jawaabta su'aasha ardeyda la siiyo. | • In faah-faahinta la dhegaysto waxyaabo aan la fahmi hadi ay jiraana in la weydiiyo. |
| 10′ | **Hawsha (shaqo fasal-koox)**<br>• Layliska 2aad sida looga shaqaynayo in aad u sheegtid kooxo lix qof ka kooban inta loo qaybiyo labada su'aalood in ay ka wada hadlaan u sheeg. | • Iyaga oo lix-lix qof ah labada su'aalood ee laylis 2aad ku hoos qoran koox-koox ha uga wada hadlaan kadibna jawaabaha inta ay isu-hagaajistaan ardeyda fasalka in ay u soo bandhigaan ku amar. |
| 5′ | **Gaba-gabaynta**<br>• Inta si kooban loogu soo gunaanado in la hubiyo in ardeydu hanatay dulucdi casharka maanta ama xiisada.<br>• Iyada oo labo ardey ah fursad la siinayo nuxurka casharka ay barteen ha sheegaan. | • Gabagabada casharka in ay dhegaystaan in nuxurka casharka loo sheego. |

# CUTUBKA 2: SARAYNTA SHARCIGA

**(9-Xiisadood)**

## Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Fahmaan macnaha Dastuurka dawlada iyo sharciyada kale faa'iidooyinka ay leeyihiin.
- Gartaan sababaha loogu baahday saraynta sharciga.
- Ogaadaan sababaha loogu baahday sharciyada iyo nidaamyada dugsiyada.
- Sharaxaan macnaha awooda iyo waxtarka xaddaynta awooda.
- Gartaan waxaa ay tahay sirtu.
- Fahmaan macnaha anshaxa.
- Gartaan macnaha musuq-maasuqu waxaa uu yahay, iyo waxyeelooyinka uu gaysan karo.

| No. | Waxbarashada | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Qodobo kale oo waxtar leh |
|---|---|---|---|
| 1. | Muhiimada Dastuurka Dawlada | Marka ay dhameeyaan barashada casharadan kadib ardaydadu waxay awoodi doonaan in ay.<br>• Qeexaan waxa uu yahay dastuurka dawlada heer fadaraal iyo heer deegan.<br>• Sharaxaan muhiimada sharciyada kale leeyihiin.<br>• Qeexaan sababaha loogu baahday sharciyada dugsiga.<br>• Sharaxaan xidhiidhka u dhexeeya sharciyada dugsiyada, dastuurka iyo sharciyada kale.<br>• Ixtiraamaan sharciyada iyo nidaamyada dugsiyadooda iyo deegaanadooda. | • Bayaanada ama go'aanada dastuurka heer fadaraal iyo heer kilil ama deegaan. |
| 2. | Saraynta sharciga oo la taageero. | • Sharaxaan macnaha ugu saraynta sharciga.<br>• Qeexaan sababaha loogu baahday in ugu saraynta sharciga la taageero.<br>• Sharaxaan macnaha in muwaadiniinta oo dhani sharciga hortiisa siman yihiin. | • Go'aanada ama bayaanada Dastuurka heer fadaraal iyo heer deegaan. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 3 | Anshax | • Sharaxaan anshaxa laga filayo in ay ardeynimadooda muujiyaan.<br>• Qeexaan sababaha loogu baahday in hooyada iyo Abaha la ix-tiraamo.<br>• Ixtiraamaan hooyada, Abaha iyo dadka waa weyn. | • Ardey casharada gurigooda ku darsiyeysa, shaqo qabanaysa sawiro. |
| 4 | Awood-xileed | • Sharaxaan macnaha awood iyo waxtarka xaddaynta awooda mas'uuliyiinta.<br>• U adeegsadaan awoodooda si sharciga waafaqsan marka ay horjooge fasal noqdaan. | • Sawiro kala duwan oo muujinaya illaha ama meelaha ay awoodu ka soo asaasanto. |
| 5 | Sirta | • Qeexaan macnaha sirta.<br>• Liis gareeyaan astaamaha ama dabeecadaha sirta gaar ahaaneed ama qofku gaar u leeyahay.<br>• Sharaxaan baahida keentay in sirta la illaaliyo. | |
| 6 | Musuq-masuqa | • Sharaxaan macnaha musuq-maasuqa.<br>• Tallaabooyinka lagu liis gareeyo garto ama astaamaha u ah musuq-maasuqa.<br>• Liis gareeyaan dhibaatooyinka musuq-maasuqu keeno. | |

**Dastuurku waa maxay? (2-xiisadood)**

Qalabka xogta Waxbarashada lagu urursado:

- Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya.
- Dastuurka dawladaha heer qaran iyo kuwa heer kilil/deegaan.

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Dastuurka wax la yidaahdo wali ma maqsheen? Maxaad u malaynaysiin in uu yahay macnaha Dastuur?
- Dastuurku muxuu faa'iido leeyahay?

Bare!Buuga ardeyga qodob 2.1. Dastuurka ku yaala waa maxay? Cinwanka leh ee cinwaanka hoostiisa ku qoan ee labada su'aalood ah si aad u hubisid aqooanta hada ama cinwaanka macnaha dastuurka leh ka hor ay lahaayeen inta ay le'egtahay islamarkaana casharka xiisada ardeyda hordhaca ugu soo bandhigtid koox tiro ahaan aad u yar si fursad ay kaga wada hadlaan. Buuga Dastuurku ku daabacan yahay ee aad haysatid ha isu-dhibaan islamarkaana u fiirsadaan, ugu dambayntana si fursad ay fasalka ugu soo bandhigaan macnaha iyo faa'iidada Dastuurka ee ay ka wada hadleen iyo waxyaabihi ay isu-afgarteen.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-koox)***

- Sheekada ku saabsan macnaha Dastuurka ee boga 16aad ee sawirada ku xigta kali-kali ha u akhristaan.
- Akhriskooda marka ay dhammeeyaan lammaanihi ama kooxdi dib ha isugu timmaado layliska koobaadna ha ka shaqeeyaan. Qoraalkan inta ayna akhriyan ka hor aqoonti ay dastuurka u lahaayeen iyo aqoonta marka ay akhriyeen ay ka helleen waxyaabaha ay isaga midka yihiin am aay ku kala duwan yihiin ha ka wada hadlaan. Adiguna bare ahaan dabagal ku samee wada hadalkooda. Wadahadalka in ardeyda oo dhan si fir-fircoon uga qayb qaataan ku dhiiri-gali.
- Ugu dambayna sharaxaad kooban ka sii macnaha Dastuurka waxaa uu yahay.

***Macnaha Dastuurka***

Dastuurka macnihiisu waxaa weeye sharci mudnaanta siiya arrimaha siyaasada sharciyada kale oo dhana ka wada sareeya islamarkaana sharicyada kale oo dhan laga soo dheego ama asaas u ah. Waa sharci waxyaabaha asaasiga ah, xuquuqaha Adamaha iyo kuwa diimuqraadiyadeedba ku qeexan yihiin. Waxaa kale oo Dastuurka ku qeexan muwaadiniinta iyo dawlada iyo waliba xubnaha ama waaxyaha dawlada xidhiidhka lagama-maarmaanka ah in uu u dhexeeyo ama in ay yeeshaan loo baahan yahay.

Dastuurka wuxuu leeyahay labo ujeedo oo asaasi ah oo kala ah sharciga iyo nidaamka siyaasadeed. Marka dhinac laga fiiriyo laga soo bilaabo marki ama xiligi Adamuhu bilaabay in uu nolol dhaqameedki hore ka soo wareego islamarkaana dhiso Arrimahja siyaasadeed ee bulsho ahaaneed ee casriga ah isuna maamulo sharci iyo nidaam ee waaxyaha awooda dawladu u kala baxdo sida waaxda sharci-dajinta waaxda sharci fulinta iyo waaxda sharci illaalinta heer macad ahaan loo asaasay islamarkaana awooda iyo mas'uuliyadaha ay ku qeexan yihiin weeyaan. Ujeedada dastuurka wixii ka dambeeyey qarnigi 18aad soo xoogaysanayey islamarkaana awooda siyaasadeed kolba sida loogu soo kala horeeyo hal qof, macad, xisbi gacantiis aku dhacday kadibna kaligi-talisnimo si ayna uga abbuurmin in awooda dawlada waaxyo kala duwan iyo mas'uuliyado kala duwan loo qaybiyo ayuu Dastuurku qayb laxaad leh ka qaata. Dastuurku wuxuu qeexayay xubnaha ugu muhiimsan ee dawlada awoodaha iyo mas'uuliyadaha ay kala leeyihiin oo faah-faahsan iyo macadyadu xidhiidhka lagama-maarmaanka ah ee loo baahan yahay in ay yeeshaan.

Haddii aynu si kale u qeexno Dastuurku wuxuu kooba golaha asaaska u ah ee nidaam siyaasadeed leeyahay iyo tilmaamaha (directions) guud ama hadafka guud ee uu hiigsanayo. Midka mid ah astaamaha dastuurku leeyahay mid mudo dheer adeega oo awooda siyaasadeed si nabad galyo midba midka kale ugu wareejinayo ayuu si faah-faahsan u qeexaya.

Mid kale oo dastuurka astaan u ah waxaa weeyaan waa sharciga ugu sareeya marka loo fiiriyo dhammaan sharciyada kale ee jira Dastuurka waxaa lagu qeexa dhammaan awaamiirta ama tilmaamaha, waxaana si joogto ah loogu faah-faahiyo arrimaha sharciyada kale ee sida joogtada ah loo soo saaro.

Kaalinta ama doorka labbaad ee dastuurku leeyahay waxaa weeyaan awooda iyo mas'uuuliyadaha waaxyaha kala duwan ee dawlada la siiyey iyo waliba xidhiidhka ay yeelanayaan ama u dhaxayn doona kasokow wuxuu dhigaya ama qeexaya xaddaynta awooda. Nidaamyadi siyaasadeed ee taariikh ahaan dalkeena soo maray ee ay ka midka ahaayeen Dawlada boqortooyada iyo tii ciidanka ahayd iyo waliba xiliyadi dagaaladi 1aad iyo 2aad ee dunida ee sababta u ahaa dhimasho aad u tiro-badan iyo burburka allaabo aad u tiro-badan waxaa sabab u ahaa sharciyadi xiliyada jiray oo aan xaddaysnayn. Si kastaba ha ahaatee shaqada Dastuurku ma aha oo kali ah in uu awood siiyo macadyada iyo cida ama qaybaha awooda siyaasadeed ee dawlada haya, xaddaynta awooda mas'uuliyiinta dawlada

lagu sammeeyey ayaa ah doorka ugu muhiimsan ee furaha u ah dastuurka.

Muhiimada ama waxtarka Dastuurku leeyahay.

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Dastuurka maxaa loogu baahday?

Bare! Dastuurka maxaa loogu baahday? Su'aasha leh ee aad ardeyda u soo bandhigtay si firfircooni ku dheehan tahay ha uga qayb qaataan buugtooda ha xidhaan kadibna ha isu-dayaan in ay ka jawaabaan. Adiga oo ka dhaqaaqaya aqoonta hadka hor ardeydu ay u lahaayeen macnaha Dastuurka jawaabo afka ah ha kaga jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Sharaxaada buugooda ku qoran gaar ahaana boga 16aad dhammaadkiisa ee ku saabsan muhiimada Dastuurka ha akhriyaan.
- Marka ay dhammeeyaan akhriska aqoonti ay horray u yaqaaneen iyo tan ay ka helleen akhriska waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin iyo waxyaabaha ay isaga midka yihiin in ay ka sheekeeyaan ha isu-dayaan.

***Faah-faahin***

- Sharaxaad kooban oo muhiimada Dastuurku leeyahay ku saabsan ka sii.

***Muhiimada Dastuurku leeyahay***

Sida casharka koobaad lagu qeexay waxtarka Dastuurku leeyahay ma'aha mid la is-weydiinayo. Waxtarka Dastuurku leeyahay waa buuxinta uu buuxinayo ujeedooyinkan soo socda:

- Dastuurka laga dooday Lana ansixiyey wuxuu markhaati ama ballaan qaad u yahay bulshada isu-maamulaysa, wuxuuna qeexa rabbitaanka bulshada ee ku aadan wada noolaanshaha.
- Sido kale xubnaha ay bulshadu u wakiilatay maamulka xidhiidhka ay la yeelanayaan ayuu dastuurku qeexaya.
- Maadaama uu yahay dastuurka dawladi leedahay ka ugu horreeya uguna sareeya waa isha sharciyada kale ay ka soo asaasmaan kuna salaysan yihiin. Dastuurku waa aalad xeerarka kala duwani ay ka shidaal qaataan islamarkaana sharciyo aan waafaqsanayn hadi ay soo baxaan ama tallaabooyin maamul qaataan waa sharci fudaydinaya in xeerka ama tallaabooyinka la qaatay la khaldo islamarkana la saxo.
- Dastuurku waa sharci bulshada baraya xaqeeda iyo waajibaadka saran, waa sharci qoran oo bulshadu si sahlan u heli karto una akhrisan karto, fahmi karto, isu-maamuli karto islamarkaana xuquuqdeeda ku illaalshan karto.
- Dastuurka sharci dajiyayaasha, iyo maamulayaasha ay bulshadu soo doratay, magaca bulshada garsoorayaasha xukunka ku rida mas'uuliyadooda, la xiisaabtankooda iyo shaqooyinka ay u xil-saaran yihiin ayaa lagu qeexa. Tanina iyaga iyo bulshadaba waxaa la siiya fursado ay ku ogaadaan. Sida-daraadeed waa in tixgalin siiyaa xuquuqda bulshadu weydiisanayso dawlada. Waakiiladuna in bulshadu ma'suulka tahay in ay fahmaan ayuu u sahlaa sidaa-daraadeed, waxaa lagu dadaala in loo qeexo islamarkaana la fahmsiiyo mas'uuliyada iyo dammaanad qaadka ma'suuliyadooda.
- Dastuurku wuxuu kooba dhammaan istraatiijiyadaha uu dal leeyahay ee ay ka midka yihiin kuwa dhaqaale, siyaasadeed, kuwo bulsho oo dhan islamarkaana wuxuu gacan ka gaysta in dawlada iyo bulshaduba dhaqan galiyaan islamarkaana horrumar dalka loo gaadhsiin karo.
- Dastuurku wuxuu kooba muwaadiniinta hal dal ku nool xornimadooda iyo xuquuqahooda muxuuna muwaadiniinta u sahla in ay sida ugu habboon xuquuqahooda iyo waajibaadkooda u gartaan islamarkaana xuquuqdooda uga faa'iidaystaan uganasoo baxaan waajibaadkooda.

- Dastuurka wuxuu gacan ka gaysta in sawirka diimuqraadiyada iyo dhaqanka jiilba jiilka xiga ugu gubiyo. Wuxuu kaalin muhiim ah ka qaata in nidaamka waxbarasho uu ka qayb qaato carruurtu dugsiyadooda ay si sahlan ugu bartaan nidaamka diimuqraadiga, xuquuqahooda iyo waajibaadkoodana ay u gartaan. In la adeegsado xuquuqda qofku u leeyahay in la doorto islamarkaana uu wax doorto marka uu gaadho da'da lagu coddayn karo nidaamka diimuqraadiyadeedna uu ixtiraamo kuna waaniyo dadka kalena in ay tix-galiyaan, nidaamka diimuqraadiga in la ballaadhiyo lana xoojiyo shay ku habboon weeyaan.

***Gabagabada***

Si ardeyda fursad ay kugu weydiiyaan wixii su'aalo ah ee ay qabaan. Hadii ayna wax su'aal ah lahayn ama ayna qabin ha lama labo ardey ah waxaa ay ka fahmeen muhiimada Dastuurku leeyahay in ay qeexaan weydii.

## 2.1. DAWLADAHA DEEGAANADA (XIISAD)

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Jaantuuska korka lagu soo bandhigay maxaad ka fahmaysaan?

Bare! Si ay ardeydu si fir-fricoon oo xiiso leh ugu la socdaan casharka jaantuska qodobkan hoostiisa lagu soo bandhigay in ay qof-qof ama labo-labo ugu fiirsadaan kadibna wixii ay ka fahmeen in ay sheegaan ku dhiiri gali.

Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya maadaama uu yahay sharciga dalka oo dhan ugu sareeya badhtamaha jaantuuska iyaga oo ku qoraya ha ku qeexaan. Dastuurka dawladaha deegaanaduna iyaga oo ku salaynaya Dastuurka Dawlada Fadaraalka dawlad deegaan walba Dastuur xaaladaha deegaanada ee dhab ahaan uga jira iyaga oo waafajinaya ayey dastuur u gaar ah dajisteen. Adiga oo fahamsiinaya xidhiidhka dastuurka dawladaha heer fadaraal iyo kuwa heer deegaan ka dhexeeya u soo gunaanad casharka.

***Hawsha la Fulinayo (shaqo fasal-afka)***

- Bare! Su'aalaha layliska 2aad casharadi ay mawduuca ku soo barteen iyaga oo ku salaynaya maadaama ay u isticmaalayaan xaqiijinta illaa iyo inta ay fahmeen jawaabo afka ah ha ka bixiyaan kadibna iska dhaaf mawduucan marka aad u soo gabagabayso kadib.

***Sharciyada iyo Nidaamyada kale***
***Su'aalaha hordhaca***

- Macnaha sharci waa maxay?
- Marka laga reebo Dastuurka sharciyada kale in la soo saaro maxay faa'iido leedahay?
  - ❖ Labbadan su'aalood iyaga oo kooxo yar-yar ah daqiiqado kooban gudahooda in ay kaga wada hadlaan ku amar.
  - ❖ Ardeydu jawaabaha ay ka bixinayaan su'aalaha adiga oo dabagalaya ama la soconaya dhegayso wada hadalkooda adiga oo dhex-wareegaya.
  - ❖ Ardey dhawr ah sii fursad ay jawaabahooda ardeyda intooda kale u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn macnaha iyo faa'iidada sharciyada kale fahamsi adiga oo raacinaya qaybta soo socota.

**Macnaha iyo Faa'iidada Sharciyada kale**

Dastuurku asal ahaantiisa wuxuu koobaya qaynuuno iyo straatiijiyada guud ahaaneed. Hase yeeshee, ma dhici karto in hal qof arrimaha dastuurka lagu faah-faahiyey in uu jawaab hello. Arrimaha lagu faah-faahiyey sida u jawaab ugu heli karo waxaa weeye in uu sharciyada kale dhexdooda ka baadho. Tusaale ahaan, waxaa dhici karta in dastuurka lagu qeexo xaqa qofku u leeyahay in uu noolaado in loot ix-galiyey.

Marka ka xuquuqdan lagu xadgudbo qofka ku xadgudbay nooca ganaaxa la saarayo iyo waliba cida leh awooda lagu fulinayo ciqaabta jawaab faah-faahsan kama bixinayo. Su'aalahan oo kale jawaabtooda oo faah-faahsan waxaa laga helaya sharciyada kale ee faah-faahsan.

- Sharci waxaa la yidhaada nidaam qofka biniadamka ah u ogol in uu si nabad galyo leh islamarkaana macquul ah u noolaan karo, waajibaad looga baahan yahay in uu guto, xuquuq loo baahan yahay in loot ix-galiyo iyo waxyaabaha laga mamnuucay in uu qofku sammeeyo qaynuun lagu qeexa islamarkaana la isu-maamulo weeyaan.
- Sharci waxaa la yidhaahda qaynuuno ama qodob-xeer ah oo la soo ururiyey oo waaxyaabaha awooda dawlada haya ay soo saaraan islamarkaana ay fuliyaan oo ka kooban kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo kuwa bulsho.
- Sharci waxaa la yidhaahda xeer ama qaynuun loogu talagalay in biniadamka nolashiisa iyo xidhiidhka midba midka kale uu la leeyahay si asluub leh loogu hago ama maamulo oo dawladu soo saarto bulshaduna ay ix-tiraamto. Qaynuunkan si ay bulshadu u aqbasho dawlada waxaa laga sugaya in ay illaaliso. Marka la jabiyana cida jabisay ciqaab ayey mutaysanaysa.

Waxtarka sharcigu leeyahay wuxuu ku kala duwan yahay kolba xaalada bulshada adeegsanaysa sida ay tahay. Hase yeeshee, dhanka bulshada guud ahaanteed marka laga fiiriyo faa'iidooyinka ugu waa weyn sharicgu leeyahay kuwa lagu timaamo waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Sharcigu wuxuu gacan ka gaysta in la go'aamiyo xidhidhka bulsho ahaaneed ee muwaadiniinta dhexdooda ka jiraya.
- Waxaa loo adeegsada in nabad galyada iyo amniga bulshada lagu illaaliyo.
- Is-fahmid la'aanta ama khilaafyada dadka soo dhaxgali kara in hadi karo la tir-tiro haddii kalena wado habboon lagu xaliyo alad fudaydinaysa oo loo adeegsado weeyaan.
- Iyada oo awooda dawlada lagu xaddidayo ayaa xuquuqaha dadka kale lagu illaaliya.
- Waxaa loo adeegsada in lagu go'aamiyo xidhiidhka u dhexeeya waaxyaha dawlada.
- Dawlada iyo golayaasha dawlada in lagu abbuuro ama lagu habbeeyo ayaa loo adeegsada.
- Waxaa loo adeegsada xuquuqaha adamaha in lagu daryeelo.
- Waxaa loo isticmaalaa in horrumar la gaadhsiiyo nolosha bulshada.

Guud ahaan sharcigu qof kasta oo muwaadin ah wuxuu u fudaydiya in uu helo nolol bulsho oo nabadgalyo iyo faraxad leh in uu ku noolaado. Si himilooyinkan loogu gaadhana waxyaabaha loo baahan yahay in la sammeeyo iyo waxyaabaha aan loo baahnaynba maadaama uu si faah-faahsan u qeexayo faa'iido aad u heer saraysa ayuu leeyahay.

***Sharciyada Dugsiyada***

Ardeydu buugooda sawirada 2.1. iyo 2.2 waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin ugu yaraan labo qodob ha tilmaamaan. Labo ka mid ah ardeyda si fursad ay kaga jawaabaan su'aalaha sawirada ku xiga.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn u soo badhig faah-faahinta kooban ee soo socda:

Sawirka 2.1. Ardeyda oo barahooda si fir-fircooni leh islamarkaana edeb leh u dhegaysanaya ayaa la arkaya. Si ka soo horjeeda sawirka 2.2 fasalka dhexdiisa waxaa muuqata ardeyda oo aan casharka la soconin oo waxyaabo kale oo aan casharka ka mid ahayn ama ka baxsan ku hawlan islamarkaana buuq iyo rabshado sammaynaya

ardey ardeyda ka mid ah diyaarad uu war5qad ka sammeeyey inta uu tuuray daba orday si uu u soo qabto, gabadh ka mid ah ardeyda fasalka ayaa waxay garaacaysa miiska, ardey kalena ardey garabkiisa fadhiya isaga oo u sheekaynaya ayaa la arkaya.

Sawirka 2.1. Fasalka ka muuqda dhexdiisa hawlaha baris-barasho ee ka socda shiki laan wuxuu noqonaya mid natiijo wanaagsan leh.

Sawirka 2.2 Fasalka ka muuqda dhexdiisa laakiin hawlaha baris-barashada ka socda waxay wataan rabshado.

Ardeydu waxba ma baran karto. Sida daraadeed fasalkiinu in uu sawirka 2.1 fasalka ka muuqda in uu la mid noqdo ayaa loo baahan yahay.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-qof-qof)***

- Fasalkiinu sawirka 2.1 fasalka ka muuqda in uu u ekaado hawlaha baris-barashadana noqdaan kuwo midho dhal ah nidaamka (qaynuunka) dugsigu waxtarka uu leeyahay inta uu dhan yahay si ay u fahmaan faah-faahinta boga 19aad ku qoran ha akhriyaan islamarkaana layliska 3aad ha ka shaqeeyaan.
- Ardeyda layliska 3aad hoostisa su'aalaha ku yaala marka ay ka shaqeeyaan waxay si toos ah u rogan karaan waxa buuga ku qoran islamarkaana ku siiyaan ama ku sheegaan. Sidaa daradeed tusaalooyinkana iyaga oo soo raacinaya waa in ay soo gudbiyaan ama soo bandhigaan.

1. Waa maxay baahida keentay in dugsiga dhaxdiisa uu xeer ama nidaam ka jiro?

- Su'aashan oo jawaabteedu tahaysi ardeyda loo siiyo hawlo baris-barasho oo edeb iyo asluub leh oo kali ah marka ay ku siiyaan ha joojiyaan macnaha jawaabtan ay bixiyeen waxaa uu yahay ii sheega ama I sharaxa ku dheh.

2. Sharciyo iyo nidaam hadi uuna dugsiga dhexdiisa ka jirin dhibaatooyinka ka dhalan kara maxay noqonayaan?

- Su'aashan jawaabteeda oo ah "waxaa ka imanaya dhibaatooyin aad u tiro badan" marka ay ku siiyaan kadib tusaalooyinka edeb xumada ama asluub xumada ama asluub xumada ee ka dhalan kara labo tusaale iga sheega ka dheh ardeyda.

***Gabagabada***

- Su'aal kasta jawaabta ay ardeydu kaga jawaabto marka aad dhegaysatid kadib qodobadan soo socda ugu soo gaba-gabe ama ugu soo gunaanad.

1. Xeerka dugsigu waa qaynuun muujinaya ama qeexaya waxyaabaha ardeydu sammayn karaan iyo kuwa ama waxyaabaha ayna sammayn karin hadi ay ku sugan yihiin fasalka dhexdisia, dibadiisa ama dayrka dugsiga gudihiisa oo faa'iido wanaagsan leh. Waxyaabahan aynu soo sheegnay kasokow hawlaha barista ee fasalka dhaxdiisa ka socda ee barahoodu wado in ay si asluub leh u dhegaystaan, su'aal marka ay weydiinayaan ama iyaga la weydiinayo in ay gacmahooda taagaan oo barahoodu marka uu u fasaxo oo kali ah in ay ka jawaabaan ama weydiiyaan, ardeyda dhinacooda fadhida in aan lala sheekaysto iyo in lala ciyaaro aan la ogolayn, in looga baahan yahay maalinta lagu qoro nadiifinta fasalka in ay si fir-fircooni–iwm ayuu si cad u qeexaya. Fasalka dibadiisa marka ay joogaan gaar ahaan dayrka dugsiga dhexdiisa: bulshada dugsiga iyo xiliga nasashada oo la ixtiraamo ama la dhawro–iwm saxiibada oo si nabad galyo iyo kal-gacayl leh loola ciyaaro, in la dagaalamo, la is-caayo ama la is-af-lagaadeeyo–iwm in ay mamnuuc tahay ayuu si faah-faahsan u qeexaya arrimaha sharcigu dhigayo oo la fulin waayo laguna xad gudbo dhibaatooyinka ka yimmaada ayuu faah-faahinaya. Sidaa daraadeed sharciga dugsigu wuxuu kaalin weyn ka qaadanaya sidi fasalka iyo dugsigaba ka dhigo meel ku habboon

in laga fuliyo hawlaha baris-barashada. Fasalka dhaxdiisa in xiliga baris-barashada loo qoondeeyey sida ugu habboon loo isticmaalo ayuu suurta galinaya. Tanina waxay na tusinaysa in natiijo wanaagsan laga soo hoyn karo.

2. Dugsigu hadi uuna lahayn xeer ama nidaam hadi ay tahay fasalka dhaxdiisa iyo dibadiisaba waxaa ka lumaysa asluubta ama anshaxa wanaagsan. Waxaa adkaanaysa in ardeydu si habboon waxbarashada fasalada ay ula socdaan, waxaa dhacaysa in ardeydu qaarba qaarka kale rabishan, la ciyaaraan–iwm in baruhuna awoodi waayo in uu fuliyo hawlaha baris-barashada islamarkaana inta uu ku mashquulsan yahay amusiinta iyo dajinta fasalka xiligi casharka loogu talagalay in uu ku fuliyo uu ka khasaaro. Gudaha dayrka dugsiga iyo goobaha lagu ciyaarana anigu aan u horeeyo, anigu waa in aan noqdo qofka ugu horreeya iyaga oo ku mormaya ay ku dagaalamaan, kuwa xooga badan in ay kuwa kale la dagaalamaan goobta ciyaartana ay ka eryadaan ayaa dhici karta.

## 2.2. SARAYNTA SHARCIGA OO LA TAAGEERO (1-XIISAD

Qalabka lagu Urursado xogta Waxbarashada fasalka:

- Qaraarada (go'aanada)Dastuurka Dawladaha heer Fadaraal iyo heer Deegaan.

**Macnaha Taageerada ugu Saraynta Sharciga**

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Waa maxay macnaha taageerida ugu saraynta sharciga?

Maadaama su'aashan loogu talagalay in niyada ardeyda lagu soo jiito ama lagu baraarujiyo dhawr qof sii fursad ay kaga jawaabaan su'aasha kadibna si toos ah faah-faahin kooban ka sii ardeyda.

***Faah-faahin***

- Sheekada buuga ardeyga ku xusan ee qeexaysa macnaha taageerida ugu saraynta sharciga iyada oo sideeda loo qaadanayo qoraalkan soo socda adiga oo ugu xoojinaya u soo bandhig.

**Macnaha Taageerida ugu Sarayfnta Sharciga**

Go'aan kasta oo xafiiskasta ama mas'uul go'aaminayo ama qaadanaya waa inuu noqdo mid ku salaysan ama waa faqsan sharciga. Looma baahna in uu ka horyimaado sharciga dalka u yaala. Ugu saraynta sharcigu waa alaad loogu talagalay in lagaga hortego in fasal ama go'aano sharci daro ah lagula kaco muwaadiniinta. Ugu saraynta sharciga waxaa kale oo loogu talagalayu in lagu muujiyo in mas'uuliyiinta ugu saraynta sharciga ama leh awood-xileedka dalwada in ay mas'uuliyadooda iyo awoodooda u isticmaalaan sida sharcigu dhigayo iyo xadka loo sammeeyey awooda. Qofna mas'uuliyada iyo awooda la siiyey mid ka baxsan kuma shaqayn karo. Cid kasta oo lagu helo fasal noocan oo kale ah waxaa loo arkaya mid sharci daro ah.

***Hawsha la Fulinayo (shaqo-koox)***

- Waxbarashadi hada ka hor loo soo jeediyey si aad ugu xoojisid labada su'aalood ee layliska 4aad a hoostiisa lagu qoray in ay ka wada hadlaan amar ku sii kadibna kooxo dhawr ah sii fursad ay kaga war bixiyaan.

***Gabagabada***

- Ugu dambayn kuwan soo socdaa ugu soo gabagaabe.

Ugu saraynta sharciga qof kasta, xafiiskasta ama mas'uul walba go'aanka u qaadanayo waa in uu ku salaysnadoo sharciga laakiin waa mamnuuc in uu noqdo go'aan sida uu rabo ama sharciga ka baxsan uu qaato oo loogu talagalay in bulshada lagu illaaliyo.

Macnaha taageerida ugu saraynta sharciguna waxaa weeyaan qof kasta, xafiis kasta, mas'uul kasta oo awood leh–iwm mas'uuliyada iyo awooda la siiyey in uu ixtiraamo si sharciga waafaqsana uu u shaqeeyo in looga baahan yahay ayuu caddaynaya.

**Waa maxay Baahida keentay in Saraynta Sharciga la Taageero? (1-xiisad)**

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Sababaha lagamamaar-maanka ka dhigay in la taageero ugu saraynta sharcigu waa maxay?
- Ku dhiirigali ardeyda in ay isu-dayaan in ay tilmaamaan sababaha ugu muhiimsan ee loogu baahday in la taageero ugu saraynta sharciga. Dhawr ardey ah si fursad ay jawaabo afka ah uga bixiyaan.

***Hawsha la Fulinayo (shaqo fasal-kali-kali)***

- Buuga ardeyga cinwaanka hoostiisa faah-faahinta ku qoran qof walba isiki in uu u akhristo u sheeg. Marka ay dhammeeyaan akhriska dhawr arday ah sii fursad ay si kooban ugu sheegaan waxtarka ay leedahay in la taageero ugu saraynta sharciga.

***Faah-faahinta***

- Ugu dambayn sharaxaada soo socota u soo bandhig baahida keentay in ugu saraynta sharciga la taageero.
- Sababta ugu muhiimsan ee lagamamaar-maanka ka dhigtay in ugu saraynta sharciga la taageero waxaa weeye, qofkasta oo mas'uul ah, leh awood xileed, xafiis kasta–iwm in ay waajibku tahay in uuna dhaafin xadka awooda sharcigu siiyey ama in uuna jabinin sharciga islamarkaana muwaadiniinta ku xadgudbin isaga oo awooda dawladu siisay is aan sharci ahayn u adeegsanaya laakiin looga baahan yahay in sida ugu wanaagsan uguna waxtarka badan u shaqeeyo.
- Taageerida ugu saraynta sharciga waxay gacan ka gaysanaysa in uu qofna isu-dayin in uu xuquuq qof kale leeyahay ku xadgudbin laakiin in la isu-fikiro la is-qadariyo lana wada noolaado iyo:
- Ugu saraynta sharciga hadi aan la taageerin muwaadiniintu aysi nabad galyo ah guryahooda uga baxaan ayna si nabad galyo ah ugu soo noqon karayn ka sokow, waxaa dhici karta qof kasta in uu isu-dayo in uu xuquuqdooda ku xadgudbo islamarkaana kula kaco boob, dagaal, dil –iwm.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-koox-koox)***

- sheekada"Mashquulkii mudane cumar" ee ku qoran in ay akhriyaan kana wada hadlaan islamarkaana u sheeg inay ka shaeeyaan saddexda su'aalood ee layliska 5aad ku hoos qoran. Labo-labo ama koox-koox way u wada shaqayn karaan.
- Ardeydu marka ay akhriyayaan kana wada hadlayaan adiga oo dhax wareegaya dabagal ku samee. Hadi ay su'aalaha fahmi kari waayaan faah-faahin ka sii.

Tusaale ahaan su'aasha 1aad-iyada oo lagu maamuusayo horrumarka xaqa shaqada ee dugsiga wareega koobaad islamarkaana isbar-bardhigaya wax qabadka labo dugsi si tusaale sida dugsigiina ka wanaagsan ama ka liita.

Su'aasha saddexaad–Axmed shaqada uu qabto waa saxbaad leedihiin? Raali galinta uu mar dambe ka bixinayay ma waa saxbaad odhanaysiin? Ka wada hadla.

- Wada hadalka marka ay dhammeeyaan jawaabaha ay dhawr kooxood soo diyaariyeen ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan.
- Ugu dambayna jawaabaha ardey kasta kaga jawaabay su'aasha adiga oo ka dhaq-dhaqaaqya u soo gabagabee sedan hoos ku xusan:
    - ❖ Su'aasha 1aad marka laga reebo waxaa laga yaaba dugsigeena ugu asluub

wanaagsan, allaabi nagama lunto, ardey wax xada naguma jiro–iwm jawaabo ay ka mid yihiin ayaa laga yaaba in ay ku siiyaan. Xiligan oo kale adiga oo ardeyda u hambalyaynaya waad fiicantihiin, sida ku wada, dugsigeenu in uu noqdo dugsi fiican oo sida sii wado dhammaantiin waa in aad noqotiin daacad, dad asluub wanaagsan nidaamka iyo kala dambayntana illaaliya ayaa la idiinka baahan yahay ku dheh. Waxaa lagayaaba dugsiga kalina waa sida keena oo kale uun. Hadi soo dhigaan jawaab ah dugsigaasi wuxuu leeyahay dhibaatooyin asluub xumo ah si dhibaatooyinka asluub xumada ah loo saxo loona toosiyo ama hagaajiyo in ay arrinta maamulka dugsiga u bandhigaan u sheeg.

- ❖ Dugsigiisu sharci ma laha? Mise sharciga lama daryeelo ama lama ixtiraamo iyaga oo leh in ay weydiiyaan ardeyda dugsiga ha noqoto dayrka dugsiga ama fasalka dhaxdooda dhaqanka ay u leeyihiin xiliga ay haystaan in ay tusaan, nidaamka looga baahan yahay in ay ku socdaan buuga ama sharci muujinaya in uu jiro way hubbaan weeyaan macnuhu hasa yeeshee, marka qaynuunada la jabiyo asluubta/anshaxa ama nidaamkana la xummeeyo tallaabooyinka lagu saxayo maadaama uu dugsigu qaadanaynin waxay ka dhigan tahay iyada oo dambiilayaasha la sii baadinayo.
- ❖ Axmed jawaabta uu bixiyey iyada oo laga dhaqaaqayo tallaabooyinka allaabada carruurta lagu xadayo laguna qarsanayo in ay wax xun tahay iyada oo uu aqoonsan yahay ayuu haddana la fuliyay. Isaga oo cidina la talinin ayuu runta sheegay. Raali galintu ka bixiyey. Sidaa daradeed, maadaama si deg-deg ah uu khalad kiisi uga soo noqday in uu ilmo wanaagsan yahay ayaan fahmayna. Sidaa daraadeed carruurta cumar in ay wax badan in looga baahan yahay, in sharciyada dugsiga si fiican u bartaan islamarkaana sida ugu haboon u ixtiraamaan in looga baahan yahay, khalad ama si lama filaan ah hadi ay fal-dambiyeed u sammeeyaan in ay lagamamaar-maan tahay in ay dambigooda qirtaan raali galina ka bixiyaan kana digtonaadaan in ay mar kale dambigan u sammaynin si degan ama ixtiraam leh ugu sheeg.

**Macnaha yihiin Muwaadiniintu sharciga Hortiisa in ay siman**

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Marka la leeyahay muwaadiniintu sharciga hortiisa weysiman yihiin maxay ka dhigan tahay?

Si ay uga jawaabaan su'aashan sii fursad labo ka mid ah ardeyda fasalka. Hadi ay fahmi kari waayaan nuxurka caharka ama su'aasha faah-faahinta cinwaanka hoosteeda ku qoran in ay akhriyaan islamarkaana isu-dayaan in ay su'aasha ka jawaabaan ku dhiiri gali.

***Faah-faahin***

- Ugu dambaynta "macnaha in muwaadiniintu sharciga hortiisa ay siman yihiin" ardeyda fasalka ee da'doodu yar tahay ama aan fahmi karaynin si fudud oo ay fahmi karaan ugu sharax adiga oo waliba tusaalooyin adeegsanaya.

**Macnaha in Muwaadiniintu sharciga hortiisa siman yihiin**

Dadka oo oo dhani sharciga hortiisa way siman yihiin marka la leehahay iyada oo aan loo fiirinin caynta (lab iyo dhidig), midab (madaw, caddaan, casaan), hanti (maal-qabeen iyo miskiin), qof awood leh iyo qof aan awood lahayn),–iwm dhammaan sharciga hortiisa way siman yihiin weeyaan macnuhu.

Muwaadiniinta sharciga hortiisa in ay sinaadaan macnaheedu waxaa weeye iyada oo

dadka loo kala saarin maal-qabeen iyo miskiin, qof waxbartay iyo qof aan wax baran, beeralay iyo ganacsato, iyaga oo aan la kala qaad-qaadin in il kali ama isu-mid ah lagu wada fiiriyo.

Tusaale, hal qof aad maal-qabeen u ah iyo qof kale oo miskiin ah hadi sammeeyaan fal-dambiyee isu-mid ah labadaba la dacweynaya, waa la ciqaabaya. Maadaama uu hal qof maal qabeen yahay in la dacweeyo lana ciqaabo kama baxsan karayo.

Dugsiga dhaxdiisa hal ardey oo uu bare dhalay iyo ardey uu qof beera qodato ahi dhalay hadi dambi isu-mid ah ay sammeeyaan islamarkaana lagu helo labadaba iyaga oo xeerka dugsiga lagu qaadayo waxaa sugaya tallaabo isu mid ah oo dhaqan celin loogu sammaynayo. Looma baahna ama maaha arrin la aqbali karo in ardeyga baruhu dhalay ganaaxa laga fudaydiyo ardeyga abihi beeralayda yahayna si adag loo ciqaabo. Dadka dhammaantood sharcigu in uu si siman u fiiriyo mooye maha wax shakhsi kali ah leeyahay.

***Hawsha la fulinayo (shaqo guri-xook-koox)***

- Su'aalaha layliska 6aadku hoos qoran hada ka horba laga soo wada hadlay islamarkaana laga jawaabay. Maadaama loogu talagalay in lagu xoojiyo casharkan la soo bandhigay ardeydu in buugtooda ay si wanaagsan ugu rogtaan su'aalaha ka shaqeeyaan u sheeg, ugu dambayna buugtooda u sax.

## 2.3. ANSHAXA (ETHICS) (1-XIISAD)

Qalabka loogu talagalay in waxbarashada laga tix-raaco.

- Sawir muujinaya ardeyda oo cashar darsiyeysa, hawl gurina fulinaya, booster.

**Anshaxu waa Maxay?**

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Ma garanaysiin mar aad qoysaskiinu idiin mahadnaqeen ama canaanteen?
- Marka aad qabataan ayey idiin mahadnaqaan?
- Labadan su'aaloo dee korka ku xusan ardey ha kaaga jawaabaan. Ma laga yaaba "mar ay idin cannaanteen oo aad garanaysaan?" erayga su'aashan ku jira ee cannaan ardeyda da'dan ah maadaama laga yaabo in uu ku adkaado ma ku xanaaqan ayaa lagu badali kara ama wey ku bedalaan karaan. Marka aad maxay sammaysan ayey idinku xanaaqaan? Midka leh ugu biiri/kordhi.
- Sabbuurada dusheeda ugu jeex jaantuus labo qaybood ama khaanadood leh. Khaanada koobbaad ha ku qoraan jawaabaha ku saabsan dhacdooyinka loogu mahadnaqay khaanada labbaadna ha ku qoraan jawaabaha ku saabsan arrimaha ay sammeeyeen ee lagu cannaantay oo faah-faahsan.
- Waxyaabaha/dhacdooyinka kala duwan ee ardeyda kala duwan labbada khaanadood ay ku faah-faahiyeen hal-hal iyaga oo u soo qaadanaya inay xafidaan islamarkaana arrimaha loogu mahadnaqay ee ardeyda kala duwani soo liis garaysay waxyaabaha ay isaga midka yihiin inta ay dhan yihiin si ay u ogaadaan ha is-bar-bar dhigaan. Dhinaca kalena arrimaha lagu cannaantay ee ardeyda kala duwan soo jeedisayna kuwa ay isaga midka yihiin inta ay dhan yihiin si ay u ogaadaan ha is-bar-bar dhigaan. Dhinaca kalena arrimaha lagu cannaantay ee ardeyda kala duwan soo jeedisayna kuwa ay isaga midka yihiin si ay u ogaadaan ha isbar-bar dhigaan.
- Dhacdooyinka loogu mahadnaqay cinwaanka leh hoostiisa waxyaabaha wanaagsan ee lagu faah-faahiyey in ay tusaale u yihiin anshaxa wanaagsan cinwaanka leh dhacdooyinka lagu cannaantay hoostiisa waxyaabaha lagu faah-faahiyeyna in ay yihiin waxyaabaha tusaalaha u ah anshax xummada si kooban ugu faah-faahi.

- Sawirka 2.3. Ardey dhawr ah sii fursad ay aad ugu kuur galaan kadibna waxyaabaha ay ka fahmeen ama waxyaabaha uu muujinayo sawirku in ay sheegaan.
- Marka kadib waxyaabihi loogu talagalay in uu sawirku muujiyo waxaa ay yihiin adiga oo soo koobaya faah-faahinta soo socota u soo bandhig.

Qoyska wanaagsan gaar ahaana Hooyada iyo Aabuhu waxay dadaal badan ku bixiyaan sidii ay carruurtooda anshax wanaagsan ugu bar-baarin lahaayeen darajo sarena ay u gaadhsiin lahaayeen.

Had iyo jeer waxay xil weyn iska saaraan sidi ay carruurtooda u bari lahaayeen una ogaysiin lahaayeen waxyaabaha lagu qeexo ama lagu garto waxaa ay yihiin. Astaamaha lagu garto anshaxa wanaagsan marka ay carruurtoodu gartaan/ogaadaan xili kasta waxyaabaha ama hawlaha ay fulinayaan iyo hab-dhaqanka ama dabeecada ay muujinayaan in ay noqdaan kuwo waafaqsan anshaxa wanaagsan in ay arkaan ayey jecelyihiin.

***Hawsha la Fulinayo (shaqo fasal-kali-kali)***

- Sawirka 2.3 kadib astaamaha anshaxa wanaagsan ee sawirka ku xiga oo ah kuwa ku saabsan heer qoys ahaan waxyaabaha wanaagsan ee nalooga baahan yahay in aynu la nimaadno inay akhriyaan u sheeg. Shakhsi–shakhsi marka ay u akhriyaan kadib ku dhiiri gali in ardey walba in uu rabitaankiisa ku sheego arrimaha la xidhiidha anshaxa wanaagsan ee la liisgareeyey kuwa uu ku dhaqmo iyo arrimaha kale ee uuna ku dhaqmin.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn adiga oo ku salaynaya qodobada 1-3 la liisgareeyey u faah-faahi fikradaha kadibna u sheeg in dhammaantood ay sida ugu habboon u dhaqan galiyaan in looga baahan yahay. Tusaale weedha “Hooyada iyo Aabaha oo la ixtiraamo”, hoosteeda. Awooda dqoyska adiga oo tixgalinaya ama ku salaynaya baahida ama waxaa aad rabtid fin aad si cad u qeexdid fikradaha leh si ay aad ugu fahmi karaan waxyaabahaan hoosta ku qeexan si wanaagsan ugu faah-faahi ama ugu sharax.

Qoysaskoodu am Hooyada iyo Aabayaashood inti awoodooda ah kolba wixii ay carruurtooda ku taageeri karaan oo kali ah in ay weydiistaan in looga baahan yahay u sheeg. Dadka oo dhan waxaa loo baahan yahay in uu ku noolaado maadaama ay tahay kolba awooda uu leeyahay iyo dakhliga soo gala kolba inta uu dhan yahay waxkasta oo ay arkaan islamarkaana ay jeclaadaan in loo gado hadi ay waalidiintooda weydiistaan dhibaatana u gaystaan in ayna habboonayn in aad fahamsiiso ayaa waxbadan.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-kali-kali)***

- Layliska 7aad iyaga oo kali-kali ah buugooda ha kaga shaqeeyaan kadibna u shax.
- Ardeyda sida wanaagsan uga shaqaysay labo mid ah jawaabahooda in ay fasalka u akhriyaan ka codso.

***Gabagabaynta***

Ugu dambayn sidan soo socota ugu soo gabagabe.

Anshaxu (ethics) waa maxay? Erayga anshax (Ethics) goob kasta iyo xili walba waxaan ku tilmaamna dhaqanada wanaagsan iyo ficilada ama waxqabadyada qoysaskeena, dugsiyadeena, xaafadaha aynu ku noolnahay iyo waliba dalkeena iyo bulshadeenu ay rabbaan islamarkaana u bogaan ee aynu sammayno.

- Marxaaladan hab dhaqanada iyo waxqabyada wanaagsan ee ay qoysasku carruurtooda ka rabbaan in ay tusaan ama muujiyaan kuna farxaan kuwa ugu waa weyn waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Hooyada iyo Aabahood in ay ixtiraamaan islamarkaana ka amar qaataan.
- Dadka ka waa weyn oo ay qadariyaan una adeegaan.
- Xubnaha qoyska ka tirsan ee guriga ku nool oo si jacayl, nabad galyo iyo waliba isu-fikirid ama is-xasuusasho ku dheehan tahay loola noolaado.
- In nadaafada gaar ahaaneed la illaaliyo, gacmaha iyo lugaha oo maalin walba si wanaagsan loo dhaqo, xubnaha ama waaxyaha jidhka oo dhan iyo timaha oo nadaafadooda laga shaqeeyo, dharka oo nadaafadiisa la dhawro–iwm waxay ka mid yihiin anshaxa wanaagsan.

## 2.4. AWOODA (1-XIISAD)

Qalabka tix-raac ahaan loo Adeegsadoyo.

- Sawiro kala duwan oo lagu muujinayo illaha ama meelaha awooda laga hello ama ay ka timmaado.

**Macnaha Awood xileedka (1-xiisad)**

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Dugsigiina qofka awooda ugu saraysa leh waayo?
  - Ardeydu jaantuuska boga 22aad yaala ha firiyaan kadibna dugsigooda qofka awooda ugu saraysa leh qofka uu yahay ha sheegaan.
  - Iyada oo waxaa aynu kor ku soo sheegnay ka dhaqaaqaya awoodu waxaa ay tahay macnaheeda waxaa ay ka garanayaan fursad ay ku sheegaan sii.

***Faah-faahin***

- Marka xigana faah-faahin kooban ka sii macnaha awooda.

**Macnaha Awooda**

Awooda macnaheedu waxaa weeyaan hal qof mas'uuliyada la saaray si uu sida ugu habboon ugaga soo baxo ama shaqada loo xil saaray si uu uga soo baxo ama u gudan karo awood sharcigu u fasaxay oo uu ogolaanaysa in uu yeesho ama yeelato awood uu ku gaadho go'aan uu ku shaqeeyo, ku shaqaysiiyo islamarkaana ku socodsiiyo amarada uu bixiyo. Tusaale maamulaha dugsigan si uu u yeesho nidaam baris-barasho oo wanaagan islamarkaana ardeydu si fiican wax ugu barato shaqo aad u tiro badan una ballaadhan ayuu fuliya. Barayaashu in ay si wanaagsan isu-soo diyaariyaan, si fiican wax u dhigaan iyo hawlo kale oo badan in ay qabtaan ayuu amra. Sharciga dugsigu u yaala ardeyda iyo barayaasha ixtiraami waaya wuxuu ka qaada tallaabooyin uu ku saxayo. Hadi ay saxmi waayaan waaxyaha ka sareeyo inta uu ogaysiiyo ayuu dugsiga ka erya. Waxqabadyadan ama hawlahan aynu korka ku soo tilmaamnay ee maamulaha dugsigu fuliyo waxaa loogu yeedhi kara eray kali ah oo la yidhaahdo awood. Amarsiin, hawlgalin, dabagal, toosin ama sixid, eryid waa astaamaha ama waxyaabaha awooda lagu qeexo.

**Macnaha iyo Faa'iidada Xaddaynta Awooda**

Cinwaankan hoostiisa su'aasha baraarujinta ee lagu soo bandhigay adiga oo qadar isbedel ah ku sammaynaya soo bandhig ardeyda.

Marka ugu horraysa xaddaynta awoodu waxaa ay tahay inta ay ka yaqaaniin in ay ka sheegaan ku dhiirigalin. Hadi ay awoodi waayaan in ay wax ka sheegaan isu-day in aad siiso tilmaamo. Tusaale isu-day in aad u qeexdo xadka loo yeelay awooda hor joogaha fasalka la siiyey. Macnaha xaddaynta awoodu waxaa ay tahay marka ay fahmaan kadib dhawr ka mid ah ardeyda sii fursad ay ku qeexaan faa'iidada ay leedahay xaddaynta awoodu.

Horjoogaha fasalku awooda ugu muhiimsan ee uu leeyahay waxaa weeye in uu sugo asluubta iyo nidaamka fasalka. Awooda uu u leeyahay

sugida nidaamka ama anshaxa fasalka waxaa weeye xiliga barashada casharadu socdaan in ayna ardeyda fasalku buuq iyo rabshad fasalka ka dhax abbuurin iyo in uu dabagalo ama la socdo xaalada guud ee fasalka. Ardey diida ee rabshada joojin waaya inta uu magacyadooda qorto in uu maamulaha fasalka siiyo weeyaan. Awooda horjoogaha ama kaaba galaaska si uu mas'uuliyadiisa uga soo baxo waa mid sidan oo kale loo go'aamiyey oo la siiyey.

Awoodan horjoogaha fasalka la siiyey hadi uu dhaafo oo ardeyda uu garaaco, jidh dilo, caayo waxaa la odhanaya awoodiibu si aan habboonayn u isticmaalay waana la weydiin lana ganaaxi maadaama uu xadki awoodu lahayd ka baxay.

***Gabagabayn***

- Si kooban ugu soo gunaanad macnaha iyo faa'iidada xaddayfnta awoodu leedahay.

***Faa'iidada iyo Macnaha Xaddaynta Awooda***

Macnaha xaddaynta awoodu waxaa weeye si aad mas'uuliyadaada uga soo baxdo sida ugu habboona aad shaqadaada ugudatid awood la aminsan yahay in aad ku fushan karto go'aanada aad ku shaqaynaysid oo lagu siiyo weeyaan.

Mas'uuliyiinta awoodooda aan la xaddaynin sida ay rabbaan ayey awoodooda danahooda ugu fushan karaan. Qof kastana waxkasta oo uu qabanayo hadi sida dantiisu ku jirto u fuliyo dhibaato aad u daran ayaa muwaadiniinta la soo gudboonaanaysa. Si aan habboonayn in xadgudub ku soo gaadho ayaa dhici karta mas'uuliyiinta awooda leh in ay kula dagaalamaan, ku caayaan, jidh dil ku gaystaan ayaa dhici karta.

***Hawsha la fulinayo(shaqo fasal-kali-kali)***

Ardeydu afarta su'aalood ee layliska 8aad ku hoos qoran buugooda ha kaga shaqeeyaan.Ardeyda sida ugu wanaagsan uga shaqaysay ardeyda fasalka ha u akhriyaan.

**Xasuus gaar ahaaneed**

Layliska fasalka lagu fulinayo xiliga loo qoondeeyey haddii uu ku filnaan waayo shaqo guri way ka dhigan karaan.

## 2.5. SIRTA (I-XIISAD)

Qalabka tix-raaca Waxbarashada:

- Sawir-boostar–iwm oo muujinaya dad wada hadlaya.

### 2.5.1. Sirta gaarka ah (shakhsiga)

***Hordhaca***

- Sirta gaarka ama shakhsi ahaaneed waa sir noocee ah?
  - ❖ Su'aasha korka ku xusan ee laga dhaqaaqayo sii fursad uu qofba mar kaga jawaabo. Su'aasha iyaga oo ku bilaabaya sirtu waa maxay sirta gaarka ah waa sir noocee ah su'aasha leh ayey ku xijisiin karaan.

Hawsha la qabanayo (shaqo fasal-koox-koox)

- ❖ "Sirta oo la bixiyo" cinwaanka leh hoostiisa qoraalka ku xusan inta ay akhriyaan labada su'aalood layliska 9aad dhaxdiisa ku xusan ha ka wada hadlaan. Layliskan dhaxdiisa sirta qof gaar u leeyahay ma habboon tahay in ay dad kali ogaadaan mise waa arrin qofka leh oo kali uu haysto ay tahay? Su'aasha leh way ku darsan karaan. Inta ay ku jiraan wada hadalka dhax wareeg, dhegayso islamarkaana dhiiri gali.

Jawaabaha faah-faahin dheeri ah sida hoos ku xusan oo kale ugu soo bandhig.

1. Iyada oo qoraalka lagu salaynayo Ato Caddir siraha u gaarka ah maadaama uu bixiyo goobta uu ku noolyahay qof la isku-tilmaamu noqday. Xaaskiisuna qof aan la amini Karin in ay tahay maadaama ogaaday gurigoodu amaan ma hello.

2. Laakiin ato Caddir xaaskiisa imtixaanka laga qaadayo ee ku saabsan in ay tahay qof sir qarin karta ama illaalin karto ku tidhi ku teenbay ahayd ee ma ahayn wax run ah. Hasa yeeshee, Ato Caddir sirtiisa in ay qarisay ahayd.
3. Sirta gaarka ku ah waa arrin adigu in aad haysato ama illaalshato ay tahay. Taariikhdan waxaan ka baranaynaa qof kasta sida ugu habboon ama faa'iido ugu hello sirtiisa in uu qof usheego looma baahna.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn faah-faahin kooban oo ku saabsan macnaha sirta u soo bandhig.

**Sirtu waa maxay?**

Sir macnaheedu waxaa weeyaan waa xog, fikrad ama arrin dadka ay khusayso maahina cidaha kale laga illaaliyo in ay ogaadaan islamarkaana la qariyo.

Xog ama arrin hadi la yidhaahdo waa sir qof, dhawr ama arrinta cid ayna khusaynin ama leh hadi ayna ahayn dad kale in ay ogaadaan ma habboona. Tani macnaheedu waxaa weeye in dadka kale laga qariyo oo la kaydiyo ayaa loo baahan yahay.

Warbixin, fikrad ama wax kale waxay sir noqota ama loogu baahda in sir ahaan loo illaalshado marka la aminsan yahay hadi cid kali sirta ogaato in shakhsi, mushtamac, bulsho ama dal ay waxyeelo u horseedayso.

Tusaale ixtiraan loogu talagalay in ardey lagu imtixraamo illaa iyo xiliga imtixaanka ay ardeydu qaadanayso laga gaadhayo wuxuu noqonaya sir. Xida imtixaanka garanaysa ama og waxaa weeyaan baraha iyo gabadha xog-haynta ah ee daabacday oo laga yaabo in ay wax ka ogaato oo kali ah. Labada qof wixii ka baxsan hadi ay yihiin ardey barayaasha kale iyo shaqaalaha xafiiska waa sir. Illaa laga gaadho xiligi loogu talagalay in imtixaanka la maro hadi uu sir noqon kari wayo imtixaan ma noqon karo.

Hadii la bixiyo imtixaanka ka hor inta aan la gaadhin xiliga la marayo ardeygi soo xafiday iyo kii aan soo xafidin, xariifka iyo ka liita–iwm dhammaantood natiijo isu-mid ah ayey keenayaan weeyaan macnaheedu. Tanina waxay meesha ka saaraysa qiimihi imtixaanka lagu miisaamayey.

Si kastaba ha ahaate, shay hadi lagu tilmaamo sir waxaa lagama maar-maan ah in si habboon sirta loo illaaliyo ama qariyo loona kaydiyo. In la yeesho kartida sirta lagu qariyo ama xajiyo wax ay ka mid tahay calaamadaha aminimada lagu garto.

Sirta gaarka ah waxaa weeye sirta qofka leh mooyaane ay ceeb tahay ama ay mamnuuc tahay in cid kale ogaato Tusaale:

- E-mail (i-mayl) qof gaar ah loo soo diray.
- Tirada ama lambarada boorsooyinka lagu xidho.
- Buuga baanka ama lambarka akawntiga.
- Lambarka bangiga lacagta lagaga qaato oo shakhsi leeyahay.

Sirta ku gaarka ah oo la qarsaon waayo waxaa laga yaaba in ay dhibaatooyin halis ah ka soo gaadhaan.

***Hawsha la fulinayo (shaqo guri oo kali-kali)***

- Layliska 10aad koox-koox inta ay uga wada hadlaan ha ka shaqeeyaan.

## 2.6. MUSUQ-MAASUQ(I-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarasho ee la tix-raacayo

- Boostarada iyo sawirada kala duwan ee loogu talagalay in lagu muujiyo musuq-maasuqa.

### 2.6.1. Musuq-maasuqu waa maxay?(xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Ma aminsan tihiin in ay jirto bulsho ama umad musuq-maasuqu uuna waxyeelo gaadhsiinayn?
- Musuq-maasuqa si loo tir-tiro kaalinta barayaasha iyo ardeydu maxay in ay noqoto ayaa loo baahan yahay.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-kali-kali)***

- Boga 24aad qoraalka sharaxaya macnaha musuq-maasuqa kali-kali inta ay u akhristaan layliska 11aad ha ka shaqeeyaan.
    1. Idinka oo sheekada aad akhrisateen ku salaynaya macnaha musuq-masuqu waxaa uu yahay odhahyadina ku qeexa.
    2. Falalka ama dhacdooyinka buuga dhaxdiisa lagu tilmaamay ee ku saabsan musuq-maasuqa kuwo ka baxsan oo ugu yaraan afar ah sheega.
    3. Sheega ugu yaraan labo mid ah falalka musuq-maasuqa ah ee aad leedihiin ardeyda waa loo gaysan karaa.

Su'aalahan inta ay ka shaqaynayaan dhax wareeg islamarkaana dhiiri gali, faah-faahinta ama tilmaamaha caawimaad u baahan u soo bandhig. Shaqada si loo soo gabagabeeyo u sax buugtooda.

***Faah-faahin***

Musuq-maasuqu waa maxay?

Erayga musuq-maasuq wuxuu tilmaamaya in shaqo xun oo aan sax ahayn oo la qabto, waxaan habboonayn oo la fuliyo–iwm.Wuxuu si gaar ah eraygu ugu saabsan yahay marka awooda mas'uuliyadeed ee nalasiiyey sidi loogu talagalay aynu u isticmaali weyno islamarkaana u adeegsano in aan danaheena gaar ahaaneed ku fushano ama dad kale ku waxyeelayno.

Tusaale baraha waxay mas'uuliyadi ka saran tahay in uu ardeyda dhammaantood si isu-mid ah ama siman u wada fiiriyo islamarkaana wax u baro. Laakiin hadu baruhu ardeyda qaraabadiisa ah ee dugsiga wax ka barata uu kuwa kale si ka duwan ama ka wanaagsan ula dhaqmo sida dhibco ardeygu uuna helin ama xaq u lahayn siiyo –iwm waxay ka dhigan tahay musuq-maasuq uu ku kacay.

Baraha maamulaha ka ah hal fasal hadi uu waalidiinta ardey fasalkiisa wax ka barta lacag ama allaabo kale inta uu ka qaato shahaado uuna mutaysanin u soo saaro waxaan odhanayna barahaasi wuxuu sammeeyey musuq-maasuq.

Marka aynu soo koobno erayga musuq-maasuq waxaa weeye si aad u heshid faa'iido ku gaar ah ama qof kale faa'iido uuna xaq u lahayn u hello in aad guno siiso ama ka qaadato qof kale, qaraabadaada oo aad u xagalisid ama garab siisid, hantida dawlada iyo ta bulshada oo aad si gaar ah ugu danaysatid–iwm eray aynu ku qeexno weeyaan.

### 2.6.2. Tallaabooyinka Musuq-maasuqa ah ee Dugsiga Dhaxdiisa iyo Goobaha ama Guryaha la galo laga Fuliyo(1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Goobaha aad ku nooshihiin tallaabooyin musuq-maasuq ah oo laga fuliyo ma jiraan? Hadi ay jiraanse maxay yihiin?

Si ay su'aashan uga jawaabaan sii ardeyda fursad. Hadi ardeydu ka jawaabi kari waayaan su'aasha tilmaamo ama tusaale u fudaydiya in ay jawaabta hallaan u sheeg.

Tusaale: Qof xaafadiina ama agagaarkiina kashaqeeya oo lacag haye ahaan loo shaqaalaysiiyey hadi uu is-yidhaahdo la ima ogaanayo ama la ima fahmayo islamarkaana lacag dhan 15 kun oo bir (shan iyo toban kun oo birr) inta uu qaatay abihi makiinada hadhuudhka ama raashinka lagu ridqo ugu gada ma musuq-maasuqbu sammeeyey?

Tusaalahan iyo kuwa kale oo la mid ah inta aad siiso goobaha ama xaafadaha ay ku nool yihiin hadiay ka dhaceen tallaabooyin musuq-maasuq ah ku dhiiri gali in ay sheegaan.

***Hawsha la fulinayo (shaqo fasal-koox-koox)***

- Sheekada cinwaankeedu yahayTirtirada musuq-maasuq ee ku qoran buuga ardeyga

inta ay akhriyaan layliska 12aad laba-labo ama kooxo tiradeedu aad u kooban tahay ha kaga wada hadlaan si ay su'aalaha si wanaagsan ugu fahmaan luqad ama weedho fudud oo ay fahmi karaan in aad ugu sharaxdo ayaa lugugula talinaya bare.

1. Si faah-faahsan u liis gareeya baraha magaceeda la yidhaahdo Faadumo tallaabooyinka musuq-maasuqa ah ee aad ku aragteen.
2. Macalimadani dhibaatooyinkan anshax xumada ah in ay iska dayso islamarkaana noqoto bare anshax wanaagsan maxaa lagamamaar-maan ah in ay sammayso ayaad leedihiin?
3. Macalimadani dhibaatooyinkan anshax xumada hadi iska sixi weydo kuwo wanaagsana ku bedeli weydo ma u malaynaysiin in ay ardeyda dhibaatooyinkaasi saammeeyaan ama maxaad u malaynaysiin in ay noqdan dhibaatooyinka ay ardeyda ku keeni karto?

Inta ay ardeydu wada hadalka ku jirto dhiiri gali adiga oo dhax wareegaya. Wada hadalka marka ay dhammeeyaan kooxo dhawr ah jawaabahooda ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan ugu dambayn jawaabaha ardeydu bixisay wax ka dhiman hadi ay jiraan adiga oo u buuxinaya u soo gunaanad. Jawaabaha su'aalaha qodobadan soo socda in ay ku jiraan xaqiiji. Hadi ayna ku jirin markaad soo gabagabaynaysid ugu dar.

**Su'aasha 1aad**

Macalimada dhibaatooyinka anshax xumada ah ama tallaabooyinka musuq-maasuqa ah ee lagu arkay waxaa ka mid ah:

- Habsan ama saacada shaqada oo ay dib uga dhacdo xiligi xiisada ama iyada oo aan gambaleelka xiisad walba dhamaadkeeda la garaaco oo aan la garaacin oo ay fasalka ka baxdo.
- Qorshaha tilmaan-barista iyada oo aan si wanaagsan u soo diyaarsanin oo ay shaqada soo gasho iyo iyada oo aan si wanaagsan ardeyda wax u barin.
- Warqada imtixaanka ay ardeydu ku martay oo ayna tusin maadaama oo ayna imtixaanka sixin.
- Si ayna ardeydu dhibacaha uga shikiyin ardeyda oo dhan waxay u qorta dhibco ka badan 80. Ardeyga wax akhriya iyo ka aan waxba xafidin, ardeyga wanaagsan iyo ka liitaba dhibco isu-mid ah ayey siisa.

**Su'aasha 2aad**

Macalimadu si uga tanaansusho dhammaan dhibaatooyinka Anshax xumada ah ee ay ku jirto tallooyinkan soo socda waa in la siiyo:

- Xiliga loo qoondeeyey xiisada iyada oo aan khasaarin in looga baahan yahay in ay sida ugu habboon u isticmaasho.
- In looga baahan yahay in ay casharada si wanaagsan u soo diyaarsato sida ugu wanaagsana casharka ugu dhigto ardeyda.
- Warqadaha imtixaanka in ay sida ugu habboon u saxdo xiliga ku habboon ardeyda ay tusto in looga baahan yahay.

**Su'aasha 3aad**

Anshax xumada ah hadi ayna ka bixin ama ayna joojiniin islamarkaana isa-sixin ardeyda dhibaatooyin aad u daran ayaa la soo gudboonaanaya.

- Waxbarashadi loogu talagalay in ay bartaan ayaa ku adkaanaysa in ay hellaan.
- Aqoonti loogu talagalay in ay hellaan maadaama ayna helaynin waxbarashada ardeyda ayaa dib u hadhaysa ama ardeyda kale ayey dib uga dhacayaan.

- Dhibaatada ugu darani waxaa weeye waxbarashada macalimadu bixinayso in ay ardeydu nacdo ayaa laga yaaba si tallaabo tallaabo ahna in ay dugsiga uga tegaan ayaa dhici karta.

*Faah-faahin*

- Adiga oo arrimaha korka aynu ku soo sheegnay la xidhiidhinaya sii ardeyda fursad ay kaga waramaan tallaabooyinka musuq-maasuqa ah ee dugsiga iyo goobaha ay ku nool yihiin laga fuliyo waxyeelooyinka ay keenaan. Ardey dhawr ah fursad marka aad siiso kadib boga 25aad (buuga amxaariga ah) "Dhibaatooyinka musuq-maasuqu keeno" cinwaanka leh hoostiisa qodobada lagu faah-faahiyey adiga oo tusaale ahaan u soo qaadanaya u sharax.
- Ugu dambayna layliska 13aad adiga oo soo gunaanadka u adeegsanaya (su'aal ahaan) islamarkaana hubinaya illaa iyo inta uu fahamkoodu le'egyahay ardeyda aan gacmaha taagina dhiiri galinaya ha ka jawaabaan.

*Gabagabada Cutubka*

- Bare! Qaybtan gabagabada marka aad soo gaadhid adiga oo ardeyda mudnaanta siinaya weydii in ay qeexaan waxyaabihi ay cutubkan ka barteen.
- Ardey dhawr ah fursad marka aad siisid kadib u soo gudnaanad.
- Ugu dambayna su'aalaha cutubka lagu soo gabagabeeyey ha ka shaqeeyaan.

*Su'aalaha gabagabada Cutubka*

I. Weedhahan soo socda tii sax ah ku qor 'Run' tii khalad ah na ku qor 'Been'.

II. Xarafka "B" hoostiisa waxyaabaha ku qoran eek u habboon "T" hoosteeda waxyaabaha ku xusan isu-aadi 1.w 2.u 3l 4n 5 m.

III. Su'aalahan soo socda jawaabaha ku habboon goobo galiya:

IV. Su'aalahan soo socda jawaabo gaagaaban ka bixiya.

1. Su'aashan in ay ardeydu jawaabo isu-mid ah ka bixiyaan way karaan ayaa la rejaynaya.

B. Wakhtiga xiisada oo la khasaariyo ama waxyaabo kale lagu lumiyo.

- Fasalka oo xiligi xiisadu in ay bilaabanto loogu talagalay oo laga dib dhaco.
- Xiligi xiisada ama wakhti loogu talagalay in hawlaha baris-barashada lagu fuliyo oo waxyaabo kale lagu lumiyo.
- Wakhtigi xiisada oo aan dhamaan ama aan gaadhin oo fasalka laga baxo hoydo.

T. Ardeyda oo si siman ama isu-mid ah aan loola dhaqmin.

- Hab-dhaqanada ardeyda la tusayo oo aan isu-mid ahayn. Ion qaar la tuso dareen walaalnimo ama qoysnimo oo jacayl ku salaysan, qaar kalena la tuso dareen maxaa iga galay ah iyo qadarin la'aan–iwm.
- Ardeyda oo habka ugu saxsan aan loo qiimaynin.
- Imtixaanka oo aan la sixiin iyo natiijada imtixaanka oo wakhtigi ku habboona aan ardeyda la tusin.
- Ardey dhacay oo la dalacsiiyo iyo natiijo ama dhibco uuna helin oo la siiyo.
- Sababo kala duwan iyada oo lagu salaynayo in qabiil–qabiil iyo–iwm kaalinta 1aad, 2aad ama 3aad la siiyo dhibco ayna helina loogu daro.

2. Sababaha xeerka ama nidaama dugsiga lagamamaar-maanka ka dhigay aadbay u badan yihiin. Ardeydu sababo kala duwan in ay sheegaan way karaan. Si kastaba ha ahaatee qodoban soo socda ayaa ka dhimana ha ka soo saaraan:

B. In sida ugu wanaagsan loo fuliyo hawlaha baris-barashada ayuu naga caawinaya.

Waxaa lagu qeexay dastuurka. Waxay xaq u leeyihiin xorna u yihiin in ay is-maamulaan, isticmaalaan luqadooda, kor u qaadaan ama kobciyaan dhaqankooda. Waxay xaq u leeyihiin fursado waxbarasho iyo kuwo shaqo in ay hellaan si la siman qoomiyadaha kale ee dalka ku nool:

- Is-maamul gaar ah bay leeyihiin marka la leeyahay waxaa loo jeeda waxay doortaan mas'uuliyiinta maamulka u qabanaya, waxay isu-maamulaan Dastuur ay iyagu dajisteen, go'aanada ay aminsan yihiin in ay waxtar u leeyihiin ayey soo gudbiyaan.
- Luqadooda ayey ku adeegtaan marka aynu leenahay in ay helleen awood ay ku bartaan luqadooda hooyo. Meelo kala duwan oo ay luqadooda (tusale maxkamada) ku isticmaalaan isuna garsooraan–iwm weeyaan macnuhu.
- Waxay xaq u leeyihiin in ay kobciyaan dhaqankooda iyo in ay diintooda ku socdaan islamarkaana ay dhaqan galiyaan marka la leeyahay waxaa weeye qoomiyad kasta wax ay xaq u leedahay in ay dhaqankeeda aminta lagana horjoogsan karin una madaxbannaan yihiin in ay kobciyaan dhaqan kood. Sido kale xoriyada buuxda ayuu leeyahay in uu diintiisa ugu.

T. In ardeyda iyo barayaashu ixtiraam aan wakhtiga xiisada si wanaagsana hawlaha baris-barashada u fuliyaan ayuu Anshaxa wanaagsani sabab u noqonaya.

J. Fasalka dibadiisa goobaha ciyaaraha ee dugsiga dhexdiisa anshaxa wanaagsan ee laga rabo in ay muujiyaan maadaama u taabanayo islamarkaana ardeyda looga baahan yahay in ay arrinta qadariyaan waxaa imanaya asluub wacan.

X. Barayaasha iyo dhammaan shaqaalaha dugsiga waxyaabaha looga baahan yahay in ay sammeeyaan si ay hawlaha baris-barasho ee dugsiga mid midho dhal ah uga dhigi lahaayeen iyo waliba dabeecadaha looga baahan yahay nooca ay yihiin maadaama uu tusayo ama tilmaamay wuxuu kaalin muhiim ah ka qaadanaya in dugsigu ama noqdo meel aqoon wanaagsan laga hello.

| Wakhtiga | Hawlaha Baraha | Hawlaha Ardeyda |
|---|---|---|
| 10′ | ***Hordhaca***<br>Si aad casharka u bilawdo su'aalaha hordhac ahaanta loo soo bandhigay in ay ka shaqeeyaan u sheeg.<br>• Dastuurka wax la yidhaahdo hada ka hor ma maqasheen?<br>• Dastuurku muxuu faa'iido leeyahay? | • Laba-labo ama koox dhawr qof ka kooban su'aalaha ha ka wada hadlaan.<br>• Dulucda natiijada ka soo baxda wada hadalka oo ay qoraal ku diyaariyaan iyo.<br>• In ay ardeyda fasalka u soo bandhigaan. |
| 15′ | ***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox***<br>• Sharaxaada ku saabsan macnaha Dastuurka ee buuga ku xusan oo ay akhriyaan.<br>• Layliska 1aad oo ay ka shaqeeyaan iyaga oo ah kooxo yar-yar.<br>***Faah-faahinta***<br>• In faah-faahin kooban laga siiyo macnaha dastuurka.<br>***Hawsha (shaqo-fasal oo koox-koox ah)***<br>• In la su'aalo sababta dastuurka loogu baahday.<br>• Buuga faah-faahinta ku qoran ee ku sabsan sababaha dastuurka loogu baahday oo ay akhriyaan.<br>• In la weydiiyo inay sheegaan aqoontii horay ay u lahaayeen iyo tan ay akhriska ku helleen waxyaabaha ay isaga mid yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin. | • Faah-faahinta oo ay kali kali u akhriyaan.<br>• Layliska 1aad oo ay wada hadal kaga shaqeeyaan.<br>• Faah-faahinta in ay dhagaystaan waxyaabaha ay fahmi waayaana weydiiyaan.<br>• Su'aasha oo laga jawaabo.<br>• Sharaxaada oo la akhriyo.<br>• Su'aasha oo laga jawaabo. |
| 10′ | ***Soo gunaanadka***<br>• Faah-faahin kooban oo laga siiyo baahida ama sababaha loogu baahday dastuurka casharka xiisadahana si kooban loo soo gunaanado ardeydana la weydiiyo waxaa ay casharka ka fahmeen iyaga oo soo koobaya. | • Faah-faahinta oo la dhegaysto.<br>• Gabagabada oo la dhegaysto islamarkaana nuxurka casharka xiisada si kooban ay u sheegaan. |

# CUTUBKA 3: SINAANTA

## (10-Xiisadood)

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Ardeydu marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib waxay awoodi doonaan in ay:

- Gartaan macnaha sinaanta.
- Fahmaan dhammaan qoomiyadaha dalka Itoobiya ku nool xuquuqaha ugu ay leeyihiin.
- Fahmaan xuquuqaha ugu muhiimsan ee sinaanshaha iyo kuwa ku saabsan si siman uga wada faa'iidaysiga ee ay leeyihiin muwaadiniinta qaramada qoomiyadaha iyo bulshooyinka.
- Gartaan macnaha laxaad la'aantu waxaa ay tahay.

| No. | Qodabka casharka | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Qalabyo kale oo muhiimah |
|---|---|---|---|
| 1. | Macnaha sinaanta | Marka ay dhammeeyaan barashada casharka kadib ardaydu waxay awoodi doonnaan in ay:<br>• Qeexaan macnaha sinaanta<br>• Liis gareeyaan waxyaabaha muujinaya sinaanshaha qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya. | • Jaantuusyo, filino fiidiyooyo ah iyo boostaro muujinaya qaramda, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya. |
| 2. | Xuquuqda sinaanta ee dugsiga | • Faah-faahiyaan macnaha si siman uga faa'iidaysiga xuquuqda la xidhiidha waxa uu yahay. | • Saw/iro tilmaamaya ama muujinaya sinnaanta. |
| 3. | Sinaanta caynta | • Qeexaan macnaha sinaanta caynta<br>• Liis gareeyaan waxyaabaha muujinaya sinnaanta gabdhaha iyo wiilasha dugsiyadooda<br>• Sharaxaan faa'iidada ay leedahay in la sugo xuquuqda sinnaantashaha ee raga iyo dumarka dugsiyadooda. | • Sawiro muujinaya wiilal iyo gabdho fasal kali ah waxa ku wada baranaya. |
| 4. | Sinnaanta dhaqanka | • Qeexaan macnaha sinnaanshaha dhaqanka<br>• Sharaxaan muhiimada ayleedahay sinnaanshaha dhaqamadu. | • Sawiro kala duwan oo muujinaya qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya. |
| 5. | Laxaad la'aanta | • Qeexaan macnaha laxaad la'aantu waxa ay tahay<br>• Liisgareeyaan taageerooyinka dadka laxaadka aan lahayn hadii la siiyo ku dhiirigalinaysa inay horumarka dalka si firfircoon uga qayb qaataan. | • Sawiro muujinaya dadka laxaadka aan qabin oo hawlo kala duwan qabanaya. |

## 3.1. MACNAHA SINNAANTA (I-XIISAD)

Qalabka Tix-raaca

- Sawiro iyo Boostaro muujinaya xubno qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya oo dhan ka kooban

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Marka ugu horreeya ee aad maqashiin erayga sinnaan fikradaha ama waxyaabaha maskaxdiina ku soo dhacaya maxay yihiin.
- Dhawr ka mid ah ardeyda fasalka sii fursad ay kaga jawaabaan su'aasha bilawga ee korka ku xusan. Marka ay ardeydu ku sheegayaan macnaha sinnaanta tusaalooyin in ay ku xoojiyaan ku dhiiri gali.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- buuga ardeyga qoraalka ku saabsan sinnaanta ee ku yaala qof-qof inta ay u akhriyaan layliska 1aad ha ka shaqeeyaan.
- Layliska marka ay ka shaqayn nayaan adiga oo dhax wareegaya dhiiri galin u sammee.

***Faah-faahin***

- Ugu dambaynta sida soo socota u fahamsiin macnaha sinnaanta adiga oo tusaalooyinka hoos ku xusan adeegsanaya.

**Macnaha Sinnaanta**

Erayga sinnaan marka nidaamka diimuqraadiga ah lagu dhaqmayo waa eray aynu u adeegsano in aynu ku tilmaamno dadka aqoon iyo takhasus isu-darajo ah ama isu-heer ah ka tirsan oo dhani in ay leeyihiin (hal nooc)_ xuquuq ama faa'iido ah isu-mid ah.

Tusaale Bararaha magaciisu yahay geedi iyo macalimada xaali hadi waxbarashada ay dhammeeyaan xili isu-mid ah heerka waxbarashadooduna isu-mid yahay (dhiiri dhiblooma ama sertifikeet) islamarkaana goob isu-mid ah ay kawada shaqeeyaan mushaarada ku habboon in ay qaataana in ay isu-mid noqoto ayaa loo baahan yahay. Waxaa waliba inta dheer hadi dabeecada iyo Anshaxa shaqadoodu isu-mid yahay mushaarkoodu waa in uu isu-mid noqdo.

Guud ahaan, erayga sinnaantu nidaamka dimuqraadiga ah dhaxdiisa muwaadiniinta ku nool ama ku dhaqanka iyada oo aan loo kala qaadin qabiil, diin , luqad iyo waxyaabo kale oo lagu kala qaybinayo xuquuq ay xaq u leeyihiin in ay hellaan ayaa lagu tilmaama.

Tusaale Guud ahaan baraha fasalka dhaxdiisa wax ku baraya hadi ay jirto meelo uuna fahmin ardeygu wuxuu xaq u leeyahay in barahiisa weydiiyo, xuquuqdani waa mid ardeyda oo dhani iyaga oo aan la kala qaad-qaadin ay si isu-mid ah uga wada faa'iidaysan karaan weeyaan. Gabadha ardeyada ah oo kali ah in ay su'aalo badan weydiiso baraha ama iyada la weydiiyo islamarkaana ay ka jawaabto waa khalad. Dhinaca kale wiilka ardeyga ah oo kali ah in su'aalo badan la weydiiyo ama lagu qahso in uu ka jawaabo caddaalad ma'aha.

Ardey kasta oo ka mid ah ardeyda fasalka wax ka barata in hor joogaha fasalka loo doorto ardeyda fasalka oo dhan xuquuq isu-mid ah ama siman ayey leeyihiin.Wiil, iyo gabadh, muslin ama kiristaan, Amxaar, Oromo, Tikre, soomaali ha noqdo kana soo jeeda dhammaan qoomiyadaha dalka ku nool oo dhan iyada oon aan la kala qaad-qaadin dhammaantood waxay xaq u leeyihiin in loo doorto ama uu/ay doorato hor joogaha fasalka.

## 3.2. XUQUUQAHA SINNAANTA EE QARAMADA, QOOMIYADAHA IYO BULSHOOYINKA (I-XISAD)

Qalabka la tix-raacayo

- Boostaro iyo sawiro muujinaya qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya.
- Go'aamada Dastuurka dawlada ku xusan.

*Hordhaca*

***Sawirka 3.1 iyo Su'aalaha hordhaca***

- Sawirka korka ka muuqda maxaad ka fahmaysaan?
- Xubnaha qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya ee agagaaradiina ku nool magacyadooda liis gareeya.

Ardeydu sawirka 3.1 koox-koox ha uga wada hadlaan islamarkaana laba su'aalood ee hordhaca ah ha ka shaqeeyaan. Su'aasha ugu horaysa in ay Afka kaga jawaabaan way karaan. Su'aasha labaad laakiin kali-kali. Waa in ay buugtooda ugu qoraan. Buugtana u sax.

***Faah-faahin***

- Adiga oo adeegsanaya tusaalooyinka qodobada buuga ku qoran ee ku saabsan xuquuqaha sinnaanta ee qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta u sharax.

Itoobiya waa dal qaramo, qoomiyado iyo shucuub ka badan 80 ku wada nool yihiin. Mid kasta oo ka mid ah qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya waxay leedahay luqad, diin iyo dhaqano kale oo kala duwan oo u gaar ah. Qoomiyad walba xuquuqda sinnaanta ee ay leedahay dhaqmo ama ugu socdo. Ma jirto cid ka hor istaagaysa in uu sideeda ugu dhaqmo xiliga iyo goor kasta oo uu doono.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Labada su'aalood ee layliskan hoostiisa ku qoran ha ka wada hadlaan iyaga oo koox-koox xubnaheedu kooban yihiin ama badan yihiin. Adiga oo dhax wareegaya dhiiri gali taageerooyina sii.

**Xaqa loo Leeyahay in Cid Walba Yeelato Maamul u Gaar**

*Hordhaca*

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

Su'aashan laga dhaqaaqayo ee qodobkan lagu soo bandhigay wixii ay horray u soo barteen iyaga oo xasuusanaya dhawr ardey ah sii fursad ay kaga jawaabaan.

**Xaqa aad u leedahay in aad luuqadaada isticmaasho**

*Hordhaca*

***Su'aalaha laga Dhaqaaqayo***

- Liis gareeya luqadaha kala duwan ee deegaanadiina ama agagaaradiina lagaga hadlo kuwa aad taqaanin.
- Agagaaradiina luqada xafiisyada lagaga shaqeeyo maxay tahay?

Labadan su'aalood ee hordhac ahaanta loo soo dhigay ardey dhawr ah ha ka jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Su'aalahan hordhaca ah ee korka ku xusan kadib faah-faahinta ku xigta inta ay akhriyaan layliska 4aad labada su'aalood ee kooxo tiro yar ha kaga wada hadlaan.Inta ay wada hadalka ku jireen dhax wareeg, dhiiri gali islamarkaana taageerooyinka lagama-maarmaanka ah sii.
- Jawaabta su'aasha 1aad maadaama ay sheekada ku jirto dhibaato ma laha.
- Su'aasha labaad adiga oo tilmaam ama tusaale ka siinaya ku dhiri gali in ay ka jawaabaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn qodobadan soo socda adiga oo su'aasha ku daraya uga jawaab una soo gunaanad.
- Fikrada ku saabsan baahida aynu u qabno in aan luqadeena ku adeegano si dhibaato aan lahayn in loo qeexo loona sharaxo ayey awood noo siinaysa.
- Luqada hooyo in wax lagu barto ama la barto waxay gacan ka gaysanaysa in si sahlan waxbarashada aynu u fahamno aqoonteenana aynu u kobcino.
- Guud ahaan luqadaada hooyo oo aad isticmaasho (ku haddal, qoraal, barasho,

ku shaqaynta–iwm) waxay gacan ka gaysanaysa in luqadu kobacdo.

**Xuquuqda Sinnaanta ee Helida Fursad Waxbarasho**

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Helitaanka fursad waxbarasho oo siman ama isu-mid ah maxay faa'iido leedahay?
- Su'aashan ardeydu jawaab afka ah ha ka bixiyaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Faah-faahinta su'aasha cinwaankan ee ku xigta inta ay akhriyaan labbada su'aalood ee laylis 5aad ka mid ah labo-labo ha uga wada hadlaan. Wada hadalka marka ay dhammeeyaan dhawr lammaane si fursad ay jawaabahooda ardeyda fasalka ugu soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

Ugu dambayn adiga oo su'aalaha ku salaynaya si kooban ugu faah-faahi.

**Su'aasha 1[aad]**

Xuquuq fursado waxbarasho oo siman lagu hello way jirta waxaa la odhan karaa marka iyada oo aan look ala fiirin cayn (Rag iyo Dumar), da'da (qof yar iyo qof weyn), deegaan deegaan (kilil-kilil), dadka magaalada ku nool iyo kuwa miyiga (miyi iyo magaalo), qoomiyadaha kala duwan ee dalka ku nooli hellaan fursado waxbarasho oo siman.

**Su'aasha 2[aad]**

Marka muwaadiniinta dalka la siiyo fursado waxbarasho oo siman kaalin muhiim ah ka qaadataan dadaalada lagu horrumarinayo dalka. Marka hore waxay yeeshaan dareen daljacayl oo aad u saareeya, waxaa aad u kordhaya dadka aqoon yahanada ah ee dalka u dhashay waxna u bartay taas oo suurta gal ka dhigaysay in la hello dad aqoon leh oo horrumarinta dalka qayb muhiim ah ka qaadan karaa.

**Xuquuqda in si siman fursado shaqo loo hello**

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Xuquuqda la xidhiidha in fursado shqo oo siman la hello macnaheedu waa maxay?

Su'aashan hordhaca looga dhigay cinwaankan ama qodobkan ardey dhawr ah sii fursad ay kaga jawaabaan. Su'aashan waxaa loogu talagalay in niyada ardeyda lagu soo jeediyo waxbarashada.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Iyada oo halki laga sii wado sharaxaad ku xigta su'aasha qodobka casharkan inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 6aad ka tirsan laba-labo ha uga wada hadlaan. Marka wada hadalka ay dhammeeyaan dhawr lammaane sii fursad ay jawaabahooda ardeyda fasalka ugu sheegaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn macnaha xuquuqda la xidhiidhia in fursado shaqo oo siman la hello iyo in xuquuqda la daryeelo ama la tix-galiyo faa'iidada ay leedahay u faah-faahi adiga oo soo koobaya.

**Macnaha Xuquqda hellida Fursado shaqo oo Siman**

Muwaadiniintu iyaga oo cayn, qabiil (beel), diin –iwm look ala qaad-qaadin waxay xaq u leeyihiin in ay shaqo hellaan. Marka sedan la leeyahay wiilka iyo gabadha hel aqoon iyo karti isu mid ah, mulin iyo kiristaan, Axmaar ama Oroomo, Tikray ha noqdo ama beeni shaanguul Gumus ha noqdo, iyo–iwm hadi ay damcaan in shaqo isu-mid ah lagu qoro xuquuq siman ama isu-mid ah bayleeyihiin in ay shaqada iyada ah hellaan weeyaan macnuhu. Kani wuu u qalma kaasina uma qalmo lama odhan karo.

## 3.3. XUQUUQDA SINNAANTA DUGSIYADA (1-XIISAD)

Marka loo fiiriyo nidaamka waxbarasho mawduuca waxaa look ala qoondeeyey laba

(2) waxbarashadana 2aadna 2 looqoondeeyey. Casharka 2aad maadaama uu aad u ballaadhan yahay casharka 3aadna kooban yahay waxaa habboon in hal xiisad casharka 2aad loo qoondeeyo casharka 3aadna 1 xiisad loo qoondeeyo.

Qalabka waxbarasho ee la tixraacayo

- Boostaro, sawiro muujinaya qaramada qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya.
- Buuga dastuurku ku dhaabacan yahay.

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Xuquuqda ardeydu dugsiga dhaxdiisa ku leedahay oo la liis gareeyo.
  - ❖ Su'aasha qodobkan hordhaca looga tusaale iyaga oo adeegasanaya xuquuqaha ay dugsiga dhaxdiisa ku leeyihiin waxaa ay yihiin ha liis gareeyaan. Waxyaabaha ay liis gareeyeen sabuurada dusheeda ugu qor. Waxyaabaha ay liis gareeyeen kuwa ka duwan ku aad sabuurada ku qortay ha sheegaan. Gabagabada casharka iyagu in ay is-bar-bar dhigaan islamarkaana fahmaan ha isu-dayaan.
  - ❖ Kooxo yar-yar ama ka kooban xubno badan inta ay isu-qaybiyaan dugsigooda xuquuqsinnaansho in ay jirto iyo in ayna jirin ha ka wada hadlaan. Xuquuq sinnaasho dugsiga way jiraan ama wuu leeyahay hadi ay yidhaahdaan ha soo bandhigaan xogbixin ku saabsan waxyaabaha lagu garto ama lagu tilmaamo ama qeexo xuquuqaha sinnaanta ee dugsiga ka jira iyo mustaqbalka dambe waxyaabaha habboon ama loo baahan yahay in la sammeeyo si daryeelida ama tix-galinta xuquuqaha sinnaanta ee dugsiga aad loo ga dhaqan galiyo wixii ay fikrad ah ee ay ka bixinayaan. Kooxuhu marka ay wada hadlka ku jiraan adiga oo dhax wareegaya in aad dhegaysato taageero ama tilmaamo ka sii si aad u qiimayso heerka fahamkoodu gaadhsiisan yahay. Marka ay dhammeeyaan jawabahooda ardeyda fasalka koox walba ha u soo ban dhigto ardeyduna wixii talooyin ah ee ay ka qabaan ha ka dhiibtaan kadibna xuquuqda sinnaanta ee dugsiga macnaheeda iyo faa'iidada ay leedahay fahamsi.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Dugsiga wareega koobaad ee Boora" qodobka leh hoostiisa sheedada ku qoran inta ay akhristaan saddexda su'aalood ee layliska 7aadka mid ah shakhsi-shakhsi ha uga jawaabaan.Isla su'aalahan maadaama ay dhici karto in ay fahmi Kari waayaan waxaa uu yahay macnaha" Golaha ardeydu" u sheeg.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn adiga oo su'aalaha ku salaynaya faah-faahin kooban ka sii xuquuqda sinnaanta ee dugsiga.

## 3.4. SINANATA JINISIGA (2-XIISADOOD)

- Ugu dambayn adiga oo su'aalaha ku salaynaya faahfaahin kooban ka sii xuquuqda sinnaanta ee dugsiga.

**Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo**

- Boostaro, sawiro–iwm muujinaya wiilal iyo gabdho ardey ah oo hal fasal wax ku baranaya oo ¾ ah.

**Sinnaanshaha Gabdhaha iyo wilaasha ee Dhammaan Waaxyaha kala duwan ee Shaqada (wasaaradaha)**

***Hordhaca***

***Sawirka 3.3 iyo Su'aalaha Hordhaca***

- Sinnaanta gabdhaha iyo wiilasha macnaheedu waa maxay?

- Iyada oo sawirka lagu salaynayo gabdhuhu xili kasta iyo goob kasta oo shaqo laga fuliyo in ay raga la sinnaadaan way karaan fikrada leh ma taageersan tihiin?
- Sawirka cinwaanka hoos yaala ha fiirsadaan su'aasha hordhaca ee korka ku xusan jawaabteedana ha kayb qaataan.
- Iyaga oo kooxo xubno badan ka kooban isu qaybinaya una wada shaqaynaya Raga iyo Dumarka shaqooyin kala duwan oo ay qabtaan kuwa way jiraan ay leeyihiin faraqa u dhexeeya ha ka wada hadlaan islamarkaana ha liis gareeyaan.
- Si ay sida ugu wanaagsan ugaga shaqeeyaan sida so socota su'aalaha ugu soo dhig.
- Shaqo ragu qaban karo laakiin gabdhuhu ayna qaban karayn ma jiraan? Liis gareeya.
- Shaqo dumarku qaban karo laakiin ragu uuna qaban karayn ma jirta? Liis gareeya
- Guryahooda dhaxdooda Hooyooyinkood iyo Aabayaashood kuwa shaqada ugu badan qabta waa kuwee? sabab?
- Guryahooda dhaxdooda Hooyooyinkood, walaalahood iyo gabdhaha walaalahood ah kuwa shaqada ugu badan qabta waa kuwee?
- Adiga oo wada hadalkooda la soconaya abbuurka dabeeciga ah oo ay ku kala duwan yihiin marka laga reebo dumarka iyo raga wax ay ku kala duwan yihiin oo kale ma jiro ama in ayna jirin si taxadar leh adiga oo u fahamsiinaya wada hadalka u hogaami.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn sinnaanta dumarka iyo Rage ee dhammaan waaxyaha ama qaybaha kala duwan ee shaqooyinku macnaheedu waxaa uu yahay si kooban ugu faah-faahi layliska 9aad ha ka jawaabaan iyaga erayadooda isticmaalaya.

**Sinnaanta Dumarka iyo Rage ee Dhammaan Waaxyaha ama Qaybaha kala duwan ee Shaqooyinka**

Sinnaanta Raga iyo Dumarka oo dhinac kasta leh marka la leeyahay tani ama taa iyada oo aan la odhan guriga, dibada, waxbarashada hadi ay tahay iyo dunida shaqo haddi ay tahayba Dumarka iyo Ragu wax ay ku kala duwan yihiin ma jiro. Sida daraadeed wax walba way u siman yihiin weeyaan macnuhu. Tusaale Aqoonta iyo kartida way ka siman yihiin.

Guud ahaan Dumarka iyo Ragu shaqa kasta iyo mas'uuliyada kasta in ay aqbalaan islamarkaana fuliyaan way ka siman yihiin.

**Xuquuqaha Sinnaanta ee Ardeyda Raga iyo Dumarka ah ee dugsiga**

***Hordhaca***

***Sawirka 3.4 iyo su'aalaha Hordhaca ah***

- Sawirka maxaad ka fahanteen?
- Xuquuqda sinnaanta Raga iyo Dumarka ardeyda ah ee dugsiga in la tix-galiyo ama la daryeelo iyo in kale maxaa lagu garanaya?

⇨ Sawirka 3.4 inta ay fiirsadaan su'aalaha hordhaca ah ee ku xiga in ay ka jawaabaan ku dhiiri gali.

Sawirka maxaad ka fahmaysaan? Su'aasha ah jawaabta ay u baahan tahay si ay ugaga jawaabaan in ay ku adkaato ayaa suurto gal ah.Hasa ahaatee, inti awoodaada ah ku dhiiri gali in ay faah-faahiyaan.

- Raga iyo Dumarku wax kasta way u siman yihiin marka fasalka dhaxdiisa ay fadhiyaan ee ay wax baranayaan.
- Tirada gabdhaha dugsiga wax ka barta inay ka badan tahay tirada wiilasha si ay u hubin karaan u sammee.

***Faah-faahin***

- Adiga oo sii wada xuquuqda sinnaanta raga iyo dumarka dugsiga wax ka barta in ay lagama-maarmaan tahay iyo

waxyaabaha la adeegsan karo si loo sugo xuquuqda sinnaanta u faah-faahi adiga oo tusaale adeegsanaya

**Waxyaabaha lagu Xaqijiyo in Xuquuqda Sinnaanta ardeyda Raga iyo Dumarka ee dugsiga la sugay ama la Daryeelay**

Xuquuqda sinnaanta raga iyo dumarka ardeyda ah ee dugsiga waa la sugay ama in la sugay iyo in kale waxaa lagu xaqiijin karaa arrimahan soo socda:

- Horjoogaha fasalka (Kaaba galaaska) in loo doorto ama uu doorto (ka qayb qaato doorashada) marka ay si siman uga qayb qaataan.
- Ururada dugsiga dhaxdiisa laga dhiso sida kuwa dhaqanka, kuwa caafimaad, ciyaaraha isboortiga–iwm in si isu mid ah rabitaanka ama sida uu rabo qof walba uga qayb qaato.
- Goobaha ciyaaraha ee dugsiga nooca ciyaarta uu rabo/rabto islamarkaana doorto/doorato si siman uga qayb gallaan.
- Fasalka dhaxdiisa wax ayna fahmin haddii uu jiro in ay barahooda weydiiyaan iyo marka barahoodu su'aal u soo bandhigo in ay si siman jawaab bixinta uga qayb qaataan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ugu dambayn iyaga oo koox-koox ah layliska 10aad ha ka wada hadlaan. Adiga oo dhax wareegaya dhiiri galin iyo taageerooyinka sii. Marka ay dhamme-eyaan kooxaha aad isleedahay si wanaagsan uga shaqeeyeen natiijada wada hadalkooda ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan

***Gabagabada***

- Ugu dambayn maadaama ay dhici karto in ay faah-faahin dheeri ah kaaga baahdaan marka ay ka shaqaynayaan su'aasha 2aad iyo 3aad ee layliska 10aad qodobadan asaasiga ah ee soo socda in ay ku dareen si taxadar le hula soco.

**Su'aasha 2^aad^**

Tirada ardeyda gabdhaha ah in ay bataan ama aad u yaraadaan waxaa sabab u noqon kara kolba xaalada dhabta ah ee deegaanada ka jira oo ay ku kala duwanaadaan. Tusaale sababta keentay in tirada ardeyda gabdhaha ah goobaha kala duwan maadaama ay ka jirto aragtida ah "gabadhi waxbarasho uma baahna" inta ay nin horray u guursato ayey nolosheeda ha maamusho–iwm gabadhu hadi dugsiga ay gasho xata mudo yar kadib waxbarashada way joojinaysa ama way ka tegaysa dugsiga. Gabdhaha ardeyda ah ka sokow wiilku maadaama waalidiintu rabaan in ay uga shaqeeyaan beeraha, caawiyaan qoyska, xoolaha ay jiraan–iwm dugsiga uma dirayaan.

**Su'aasha 3^aad^**

Tirada ardeyda gabdhaha iyo wiilasha ah in ay iswaafaqsanaadaan ama is-le'ekaadaan waalidiinta waa in lagu baraarujiyo in ay carruurtooda oo dhan wiil iyo gabadh iyaga oo aan u kala qaadin in waxbaraan islamarkaana looga baahan yahay in ay dugsiyada keenaan carruurtooda. Si arrintan loogu guulaysto waa in waalidiinta lagu wacyi galiyo faa'iidada waxbarashadu leedahay waxaa kale oo loo baahan yahay in dugsiyada iyo waalidiinta ardeyda xidiidh wanaagsan loo yeelo ama loo abuuro.Xiliyo kooban in waalidiinta lagu macsuumo in ay dugsiyada buuqdaan in loo qabto shirar tallooyin la isu-weydaarsanayo si firfircoona looga qayb galiyo gudiyo kala duwana la dhiso waalidiintuna xubno ka noqdaan.

## 3.5. SINNAANTA DHAQANADA (2-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarasho ee tix-raaca

- Gabdho iyo wiilal ardey ah oo hal fasal wax ku wada baranaya ¾ boostaro, sawiro –iwm muujinaya.

**Macnaha Sinnaanta Dhaqanada**

***Hordhaca***

***Sawirka 3.5 iyo Su'aalaha hordhaca***

- Ardeyeey sawirka korka idiinka muuqda maxaad ka fahamteen?

⇨ Sawirka 3.5 marka ay fiirsadaan si fursad ay ku sheegaan waxyaabaha ay ka fahmeen sawirka si ay ugu fududaato in ay su'aasha ka jawaabaan su'aalahan soo socda in ay gacan ka siiyaan ayaa laga yaaba.

- Dadka aad sawirka korkiisa idiinka muuqda deegaanaday ka soo jeedaan baad u malaynaysaan?
- Sawirka labbaad bulshooyinka ka muuqda waa bulshooyin deegaanaday ku nool yihiin baad u malaynaysaan?
- Waxyaabaha dhaqanadu lagu garto ama muujiyo maxay kala yihiin?

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn Adiga oo ku salaynaya jawaabaha su'aalaha hordhaca macnaha dhaqanka iyo sinnaantu waxaa uu yahay u faah-faahi.

**Macnaha Sinnaanta Dhaqanada**

Sawirka ugu horreeya dadka ka muuqda waxay ka soo jeedaan bulshooyinka koonfureed. Dadka sawirka labbaad ka muuqdana waxay ka soo jeedaan bulshooyinka dega Harar. Waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin ee aynu markaaba arkayno waa labiska dharka. Goobaha kala duwan dadka ku kala nool in ay labisyo kala duwan yeeshaan ayaa dhici karta.

Sida daraadeed labiska dharku wuxuu ka mid yahay waxyaabaha dhaqanka lagu garto ama lagu muujiyo ayaan odhan karma. Waxyaabaha kale ee dhaqanka lagu muujiyo waxaa ka mid ah luqada, Diinta, murugada iyo farxada siyaabaha loo muujiyo–iwm iyada oo arrimahan aynu ka dhaqaaqayno erayga dhaqan macnhihiisa waxaa lagu sheegi karaa eray koobaya qaab nololeedka adamaha guud ahaanteeda ficilada ama falalka la xidhiidha.

Dalkeena Itoobiya maadaama qaramo, qoomiyado iyo shucuub aad utiro badan ku nool yihiin wuxuu nasiib u yeeshay in uu noqdo dal dhaqano aad u tiro badan leh. Bulshooyinka dalka ku nool maadaama ay siman yihiin dhaqanadooda oo dhana way siman yihiin.Midna midka kale kama fiicna ama kama liito. Sinnaanshahoodana waxaa lagu qeexay Dastuurka dalka u yaala.

Mid ka mid ah waxyaabaha nidaamka diimuqraadigaah lagu muujiyo waxaa weeye tix-galinta sinnaanta dhaqanka. Dhammaan qaramada, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya dhaqanadooda, luqadahooda iyo taariikhahooda in ay kobciyaan islamarkaana isticmaalaan xuquuq siman bay u leeyihiin. Hase yeeshee qoomiyaduhu midba midka kale dhaqankiisa, luqadiisa iyo taariikhdiisa in uu garto, islamarkaana ix tiraamo ayaa looga baahan yahay. Waxaa lagama maarmaan ah in ay abuuraan islamarkaana yeeshaan xidhiidh wanaagan oo ku salaysan sinnaan iyo isu-tanaasul. Sida daraadeed baahida keentay in dhaqanka la kobciyo lana illaaliyo waxaa weeye in aynu jiilka soo kacaya u gudbino luqadaheena, taariikhaheena iyo faa'iidooyinka qaab-nololeedkeenu leeyahay

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Layliska 12aad iyo 13aad maadaama uu fudaydinayo in la ogaado waxyaabihi hada ka hor ay barteen waxaa ay ka fahmeen iyo waliba in la sii xoojiyo buugtooda ha kaga shqeeyaan, buugtana waa in aad u saxdo.

**Muhiimada ay Leedahay in Dhaqanka la kobciyo**

***Hordhaca***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Dhaqankaaga oo aad horrumarisa ama kobciso maxaa faa'iido laga hela?

⇨ Su'aasha hor dhaca ee korka ku xusan ardeydu laba-labo ha uga wada hadlaan jawaabahoodana ardeyda fasalka ha u soo jeediyaan.

***Faah-faahin***

- Dhaqanka oo la kobciyo faa'iidada ay leedahay si kooban ugu qeex kadibna usoo gunaanada

**Muhiimada ay Leedahay in Dhaqanka la kobciyo**

Horay waxaan u soo aragnay erayga dhaqan in uu koobayo dhamaan hab ama qaab nololeedka qofka adamaha aha guud ahaanti ficilada ama dhaq-dhaqaaqa la xidhiidha. Dhaqanka in la kaydiyo, kobciyo iyo in la daryeelo waxaa looga jeeda dhaq-dhaqaaqyada hab, qaab ama xaalad nolooleedka waxyaabaha ku aadan oo ay ka mid yihiin luqada, diinta, hababka loo labisto, xaalada shaqo, siyaabaha loo cunteeyo iyo waxyaabaha la midka ah oo la horrumariyo ama la kobciyo weeyaan macnuhu.

Laakiin Aadumuhu hadi uu kori waayo in uu dhaqankiisa daryeelo horrumariyo lana kaydiyo luqada iyo waxyaabaha kale ee faa'iidada leh waxyaabaha lagu muujiyo waxaa ay yihiin waa la illoobaya islamarkaana way lumayaan. Guud ahaan bulsho dhaqankeeda oo ay daryeesho waxaa uu kor u qaadaya waxaa ay tahay horrumarinta dalkana kalin muhiim ah ay uu ka qaadanaya.

Dalkeena Itoobiya dhaqano aad u tirabadan oo faa'iidooyin loo bogay leh ayuu gaar u leeyahay. Hase-ahaatee dhaqanadan wanaagsan dhaxdooa waxaa ku jira ama ka mid ah dhaqano aan tiro yarayn oo waxyeelo la caaddaystay oo aad u daran leh.

Fal-dhaqameedyada waxyeelada halista ah leh waxaa ka mid ah kuwa garaadka ama maskaxda iyo xubnaha ama laxaadka Adamaha saamayn aad u halis ah ku reeba ama u gaysta. Fal-dhaqameedyadan waxyeelada badan bulshooyinka Itoobiya gaar ahaana dumarka iyo carruurta yar-yar noloshooda dhibaatooyinka khatar badan leh in ay u gaystaan waan wada ogsoonahay.

Guud ahaan Dalkeena dhacdooyinka ama fal-dhaqameedyada dumarka iyo carruurta saammayn aad u xun ama hali su ah u gaysta kuwa ugu waa weyn waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Gudniinka gabdhaha yar-yar
- Jarida jiqlaha ama hilib daqlaha
- Guurka deg-dega ah(gabadh da'di guurka aan gaadhin oo la guursado)
- Af duubka
- Boogta oo dab lagu gubo.

Dhacdooyinka ama fal Dhaqameedyada Dhibaatooyinka Caafimaad ee ay Sababaan.

Gudniinta Gabdhaha yar-yar.

- Xiliga dhalmada oo uu dhimasho badan sabab u noqdo iyo foosha oo hooyooyika ku adkaata islamarkaana aad ugu rafaadaan. Dhiig bax iyo dhaawac ama boogo halis ah oo hooyadu yeelato.
- Cudurka HIV/AIDS-ka iyo xanuuno kale oo kala duwanbu u horseeda.

  Afduubka iyo Guurka deg-dega ah

- Gabadha oo da'di guurka aan gaadhin marka la guursato waxay halis u noqonaysa in uu ku dhaco xannuunka loo yaqaano.
- Xannuuno kala duwan ayaa ku dhaca.
- Uurka aan la rabin xiliga dhalmada ayuu dhibaato keenaa.
- Nolol aan jacayl lahayn oo bilaa ujeedo ah ayey maamusha.
- Waxay u horseedaan in ay waxbarashada joojiso islamarkaana qof cawaan ah noqoto (qof waxna qorin waxna akhriyin) jarida hilib daqlaha (cagaagida) iyo

- Naaska oo baraara iyo liqida (cuntada ,biyaha –iwm) oo la kari waayo ayey horseedaan.
- Madax xannuun, cunaha oo cidhif illaa iyo cidhif baraara iyo in ay – ku dhacdo hadi uu ku sii biirana dhimasho ayaa ku timmaada.
- Xannuunada xumada leh ayuu horseeda.
- Qalabka lagu jarayo maadaama ayna nadiif ahayn cudurka HIV/AIDS-ka ayay u horseedaan.
- Wuxuu sababa in ------

*Qodobadan korka lagu soo sheegay layliska 13aad markaad saxaysid Gabagabaynta casharka u isticmaal.*

***Hawsha (shaqo-guri-koox-koox)***

- Su'aasha ku saabsan shaqo kooxeedka (shaqo-kooxeedka su'aasha leh) iyaga iskood koox-koox isu-dooranaya (7-10 kooxood) ha ka shaqeeyaan iyaga ku soconaya ama ku salaynaya amarka ama tilmaanta la siiyey. In sida ay rabbaan isu-doortaan maadaama ay xog ururinta faa'iido u leedahay ardey deegaano isu mid ah ama meelo isu dhaw ku nool hadi ay jeclaadaan in ay wada shaqeeyaan in ikhtiyaarka kooxeedyada maalinta ay soo dhibayaan isla go'aamiya.1 todobaad wuu ku filan yahay. Kooxuhu marka ay soo gudbiyaan shaqdooda u sax kadibna kooxaha sida ugu wanaagsan uga soo shaqeeyey ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan. Kooxo si wanaagsan aan uga shaqaynin hadi ay jiraan kuwa sida wanaagsan u shaqeeyey si ay faham ku filan uga hellaan taageero ku filan si.

## 3.6. NAAFADA (2-XIISADOO)

Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo

- Boostaro, sawiro kala duwan oo muujinaya dad laxaad l'a ooshaqooyink kala duwan qabanaya ama ka shaaynaya.

**Macnaha naafada**

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Macnaha naafadu waa maxay?
- Liis gareeya xaaladaha laxaad la'aanta keeni kara. Tani ka sokow" Dadka laxaadka la'le shaqooyinka ayna qaban karin laakiin idinku aad qaban kartiin liis gareeya" su'aasha leh adii aad u soo dhigto fir-fircoon in ay uga qayb qaataan ayaa u fududaanaysa.

⇨ Su'aalaha hordhaca ah ee korka ku xusan koox-koox ha uga wada hadlaan.

⇨ Adiga oo dhax wareegaya dabagal ku sammee wada hadalka. Taageero hadi ay u baahdaan sii. Tusaalooyin hadi aad siisid waad caawin karta.

***Tusaale***

Fasalka dhaxdiisa marka aad wax ku baranaysiin idinku hawlaha aad qaban kartiin laakiin dadka indhaha l'a ayna qaban karin waa maxay? Su'aasha ah adiga oo u akhriyaya in ay si wanaagsan uga wada hadlaana ku dhiiri galinaya sedan soo socota in ay ardeydu su'aasha uga jawabaato way karaan:

Dadka Indhaha l'a warqad (buugtooda)wax kuma qori karayaan, mana akhrisan karaan laakiin anagu qoraalka iyo akhriskaba waan karayna in ay idin yidhaahdaan ayaa dhici karta. Iyada oo halkan laga dhaqaaqayo dadka Idhaha l'a ama aan waxba arki karin biray (brail reading) qalabka la yidhaahdo oo wax ay ku qori karaan hadi la siiyo kuwa kale sidooda in ay wax u qoraan una akhristaan way karayaan. In si ballaadhan looga wada hadlo arrintan ugu dambayna in kasta oo dadka aan wax arki karin shaqooyin dhawr ah ayna qaban karin Indhaha la'aanta awgeed hadi

qalab kaalinta Indhaha buuxin karaa la siiyo taageero ku habboona la siiyo sida dadka indhaha leh ama arragoodu saxda yahay oo kale shaqo kasta in ay qaban karayaan ayaan garanayna fikrada leh ugu soo gunaanad

***Hawsha (shaqo fasal koox-koox)***

- Adiga oo halka ka sii wada qoraalka ku xiga su'aalaha inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 14aad ku hoos qoran ha ka wada hadlaan. Adiga oo dhax wareegaya wada hadalka dabagal ku sammee. Dhawr kooxood sii fursad ay jawaabahooda fasalka ugu soo jeediyaan.

**Taageerooyinka dadka Laxaadka l'a ay u baahan yihiin**

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Dadka laxaadka l'a ee agagaaradiina laga hello taageerooyin nooca ah ayey hellaan ama la siiya? play field of the school.

***Faah-faahin***

- Taageerooyinka dadka laxaadka aan qabin ay u baahan yihiin maadaama qodobki hada ka hor ay kaga soo wada hadleen bare adigu si toos ah ugu soo koob sharaxzad.

Dadka laxadka l'a taageerooyinka soo socda ayey u baahan yihiin.

- Jacayl iyo daryeel ama xannanao.
- Iyada oo loo fiirinayo laxaadka ayna qabin shaqada ay u baahan yihiin si ay ugashaqeeyaan qalab u fudaydinaya oo la siiyo.

***Tusaale***

- Dadka aan tallaabsan karin ama laan gadhaha ah kolba waxyeelada ay qabaan nooca ay tahay iyo baaxada ay leedahay iyada oo loo firinayo qalab ay ku socdaan sida kiranji, baaskiilka saddexda shaag leh–iwm sidii ay u hyeli lahaayeen in laga taageero.
- Dadka indhaha an qabin iyada oo loofiirinayo kolba waxyeelada ay qabaan nooca iyo baaxadeeda qalab u fudaydiyo akhriska iyo barashada sida muraayada indha sarcaadka, raadhiyo, birayal–iwm in la siiyo.
- Dadka dhegaha l'a ama aan wax ka maqlin kolba waxyeelada ay qabaan nooca ay taay iyo baaxada ay leedahay iyada oo loo fiirinayo qalab ay wax ku dhegaysan karaan ee dhegaha la dul saaro, luqada midaarka–iwm barayaal khibrad u leh sida loogu dhigo in ay hellaan ayey u baahan yihiin.
- Dadka hadalka dhibaato (speech riblem) ka haysato in luqada midaaraynta ee ay wax ku fahmi karaan lagu tababaro, hadi ay wax maqli karaana in cod iyo qoraal wax lagu baro ayaa lagama maar-maan ah.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Labada su'aalood ee layliska 15aad hoostiisa ku xusan ha ka wada hadlaan. Adiga oo dabagalaya waxyaabaha ay ardeyda laxadka aan qabin u qaban karaan in ay qeexaan islamarkaana dhaqan galiyaan ku dar-dar gali.

## 3.7. MACNAHA XUQUUQDA SINNAANTA DIINTA

Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo

- Boostaro, sawiro–iwm muujinaya calaamadaha lagu garto ama ugaarka ah diimaha kala duwan.
- Buuga Dastuurka ku daabacan yahay.

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Sinnaanta Diimuhu macnaheedu waa maxay?

⇨ Su'aasha korka ku xusan ee hordhaca maadaama loogu talagalay in niyada ardeyda lagu soo jiito u soo bandhig ardey dhawr ahna sii fursad ay kaga jawaabaan

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Su'aasha hordhaca kadib sheekada ku qoran inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 16aad ku hoos qoran ha ka wada hadlaan.Wada hadalka labo-labo ama kooxo kooban way kaga wada hadli karaan. Dabagal wada hadalka kooxo dhawr ah ama lammaane dhawr natiijada wada hadalka fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faahi-faahin***

- Ugu dambayn faah-faahin kooban ka sii. Waxaa ay tahay xuquuqda sinnaanta ee Diimaha

***Xuquuqda Sinnaanta Diimaha***

Macnaha Diin ama Diin macnaheedu waxaa weeye Aminitaan la amino in uu jiro hal illaah oo abuuray dhammaan waxaa nafta leh iyo waxyaabaha kale ee ma noolaha ah iyo dumda ay ku sugan yihiin cutubta 1aad mid ka mid ah xuquuqaha ee lagu tilmaamay waa xor u noqoshada ama u madaxbannaanta diimaha.Madax bannaanida diintu waxaa weeye xaqa uu qof kasta u leeyahay in uu raaco diinta uu rabo.Dalkeena waxaa ka jira Diimo kala duwan.Diimahan waxaa ka mid ah Diinta islaamka, kiristiyaanka–iwm waxaa kale oo jira muwaadiniin kala duwan oo aan aminsanayn lehna waxyaabo kale oo ay aminsan yihiin. Qof kasta oo diin leh wuxuu xaq u leeyahay in uu raaco diin kasta oo uu doorto. Sida daraadeed lama odhan karo diinba ka saraysa ama ka hooseysa diin kale. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu raaco diin kasta oo uu rabo marka la leeyahay weaxaa loo jeeda qofka kale diinta uu aminsan yahay iyo isagu diinta uu raacsan yahay in ay simanyihiin in uu amino in looga baahan yahay iyo in ayna habboonayn ama macquul ahayn in uu yidhaahdo aniga diintaydu waa sax diimaha dadka kalena waa khalad, tayadu wey fiican tahay kuwa dadka kalena way xunyihiin, diintayda saraysa kuwa kalina way hooseeyaan ama liitaan in uu fahmo in looga baahan yahay si nabad galyo loogu wadanoolaado in ay lagamamaarmaan tahay in la ogaado ayaa looga baahan yahay.

***Gabagabada Cutubka***

⇨ Marka gunnaadka aad soo gaadho marka hore ardeyda sii fursad ay si kooban ugu qeexaan waxyaabihi ay cutubka ku soo barteen.

⇨ Dhawr ardey ah marka aad fursad siisid kadib adigu si kooban ugu soo gunnaanad.

⇨ Ugu dambayna ku dhiiri gali in ay ka shaqeeyaa su'aalahan cutubka lagu soo xidhay.

**I. Weedhahan Soo Socda Ta Saxda Ah Ku Qorn 'Run Ta Khaladka Ahna Ku Qor Been**

1. Been 2. Run 3. Been 4. Run 5. Been

**II. Isku aadi B iyo T**

1. X 2. T 3. KH 4. B 5. J

**III. Su'aalahan soo socda jawaabaha saxda ah u dooro**

1. X 2. J 3. X 4. T *5 X*

**Muunada Qorshaha Waxbarashada**

**MACNAHA SINNAANTA**

# CUTUBKA 4: CADAALADA

## *(9-Xiisadood)*

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:-

- Fahmaan macnaha cadfdaalada.
- Gartyaan xaaladaha ama dhacdooyinka jabin kara ama caddaalad daro keeni kara.
- Fahmaan macnaha arrimaha caddaalad darada ah iyo waxyaabaha lagu garto.
- Ogaadaan macnaha macadyada bulshada iyo faa'iidooyinka ay leeyihiin.
- Fahmaan jiritaanka nidaam caddaladeed ee deegaanadooda kaalinta uu ka qaato sugida nabad galyada.
- Fahmaan macnaha Gibirku ama cashuurtu waxaa uu yahay.

| No. | Cinwaanka casharka | Ujeeddooyinka oo faah-faahsan | Khayraadka kale ee waxtarka leh |
|---|---|---|---|
| 1. | Caddaalad | Marka ay dhammeeyaan barashada qaybta ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:<br>• Qeexaan macnaha caddaalada.<br>• Faah-faahiyaan muhiimada ay caddaaladu leedahay.<br>• La yeeshaan saaxiibadood xidhiidh caddaalad ah. | • Waxyaabo miisaan u eg iyo nidaamyo kale oo caddaalad ah boostaro muujinaya |
| 2. | Xaaladaha jabiya nidamka caddaalada ah | • Liis gareeyaan siyaabaha ama waddooyinka caddaalada loogu xad gudbi karo.<br>• Liis gareeyaan xaaladaha lagu garan karo nidaamyada caddaalad darada ah ee dugsiyada.<br>• Liis gareeyaan falalka caddaalad darada ah ee heer xaafadeed ka dhaca ama laga fuliyo | • Sawir muujinaya ama tilmaamaya falal ama xaalado caddaalad daro ka muuqato |
| 3. | Xarumaha ama macadyada Arrimaha bulshada | • Liis gareeyaan macadyada bulshadu waxaay yihiin.<br>• Qeexaan siyaabaha macadyada bulshadu caddaalad ku noqon karaan. | • Tawiiro iyo boostaro muujinaya macadyada bulshada. |
| 4. | Cashuur | • Qeexaan macnaha cashuurta.<br>• Sharaxaan faa'iidada cashuurta | • Sawir muujinaya muwaadiniinta oo cashuur bixinaya. |

## 4.1. CADDAALADA (2-XIISADOOD)

Qalabka waxbarashada laga tix-raacayo

- Miisaan moodheel ah (tusaale ahaan loo adeegsanayo).
- Boostaro, swiro–iwm muujinaya nidaam caddaaladeed

### 4.1.1. Macnaha Caddaalada (1-xiisadood)

***Hordhaca***

***Sawirka 4.1. Iyo Su'aalaha Hordhaca ee hordhaca casharka.***

- Miisaanka dhiman ayuu qeexaya/ tilmaamaya?
- Miisaanka isu–dheeli tirani ayuu tilmaamaya?
- Miisaanadan maxad ka fahmaysiin? Miisaankeed dooranaysiin? Sababta?

⇨ Ardeydu sawirka 4.1. Inta ay fiirsadaan su'aalaha hordhaca ee kor ku xusan afka ha kaga jawaabaan

***Faah-faahin***

- Adiga oo halka ka siiwada macnaha caddaalada si kooban ugu faah-faahi adiga oo tusaale ku xoojinaya

**Macnaha Caddaalada**

Erayga caddaalad waa eray anynu u adeegsano in aynu ku tilmaamno in la bixiyo adeeg sax ah, dhinacna aan u xaglinaynin ama in la gadho go'aan garsoor ah oo dhinac uiilasho iyo caddaalad daro ka maydhan ama nadiifka oo aan cidna ku xadgudbayn. Tusaale dugsigeena caddaadba ka jirta hadi aynu nidhaahno dhaqdhaqaaqyada hawleed ama shaqo ee dugsiga dhaxdiisa ka socda ama ka jira waa kuwa caddaalad ah oo ka hufan caddaalad daro iyo dhinac u xaglin iyo wax is-daba marin ayaa la odhan kara.

Barayaashu ardeydooda si caddaalad iyo sinnaan ku dheehan tahay ayey ula dhaqmaan dhamaantood–iwm ayey ka dhigan tahay. Barayaasha, shaqaalaha iyo ardeyda leh kartiyo isu-mid ah mahadnaq iyo abaal gudyo ama abaal-marino isu-mid ah ayaa la siiya. Ardeyda la timmaada fal dambiyeedyo isu-mid ah tallaabooyin qanaax ah oo isu-mid ah ayaa la siiya. Arrimahan noocan oo kale ah waxay muujinayaan in ay caddaaladi jirto.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Labada su'aalood ee layliska 1aad hoostiisa ku xusan koox-koox ama laba-labo ha uga wada hadlaan. Kooxaha jawaabahoodu sax yihiin ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan.

***Gabagabada***

Ugu dambayn adiga oo xoojinaya jawaabaha ardeyda u soo gunnaanad casharka

1. Maamulka qoyska caddaaladnimadiisa dhacdooyina aad u tiro badan oo lagu garto ama lagu qeexo ayaa jira:
   - Dhammaan xubnaha qoyska ka tirsan mid yar mid weyn, wiil, gabadh, ilmaha qaraabadayda ilmahayga iyada oo aan loo kala qaad-qaadin in si siman ama isu-mid ah loola dhaqmo weeyaan, iyada oo xubin kasta oo ka tirsan qoyska awoodiisa loo fiirinayo in shaada guriga si caddaalad ah loogu qaybiyo ayaa lagama maar-maan ah. Waxaa kale oo waliba loo baahan yahay in xubnaha qoyska dhammaantood la siiyo fursado isu-mid ah ama siman sida waxbarasho cunto, seexad, dhar ama labis iyo qalab waxbarasho–iwm.
2. Jiritaanka caddaalada ee dugsiga dhaxdisa dhacdooyin tiro badan oo lagu xaqiijin karo ayaa jira. Waxaana ka mid ah kuwa ugu waa weyn kuwan soo socda:
   - Dhammaan ardeyda dugsiga wiil gabadh, ilmaha qoys maal qabeenka, ka qoyska saboolka ah ka soo jeeda, ilmaha qoys

beeralay ah ka dhashay ka qoys ganacsato ah ka dhashay, ardeyga wanaagsan ka liita–iyada oo aan loo kala qaadin in si siman ama caddaalad ah loola dhaqmo.

- Dhammaan ardeyda dugsiga wax ka barata xuquuqda ay leeyihiin in si siman ama isu-mid ah loogu tix-galiyo si simana loogu dhiiri galiyo in ay waajibaadkooda uga soo baxaan.

**Muhiimada ay Caddaaladu Leedahay (1-xiisad)**

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Idinka arragtidiina arrimaha aad isu-leedihiin caddaaladbay u baahan yihiin liis gareeya.
- Dadka ama adamuhu in uu caddaalada u baahan yahay ma aminsan tihiin? Sababaha aad cuskanaysin liis gareeyaan.

⇨ Su'aalaha hordhaca ee korka ku xusan ardeydu koox-koox inta ay uga wada hadlaan jawaabta ha sheegaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Mudane axmedl"cinwaanka leh iyaga oo koox-koox ah inta ay akhriyaan haka ka shaqeeyaan layliska 2aad. Marka ay dhammeeyaana fasalka ha u soo bandhigaan qoys leh maamul caddaalad ku dhisan faa'iidada uu leeyahay si kooban ugu sharax uguna soo gunnaanad.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Faah-faahinta ku qoran casharka ku saabsan muhiimada caddaaladu leedahay ha akhriyaan labada su'aalood ee layliska 3aad hoostiisa ku xusan koox-koox ha uga wada hadlaan. Si ay si fir-fircooni ugaga qayb qaataan wada hadalka dhiiri gali adiga oo dhax wareegaya. Marka ay dhammeeyaan natiijada wada hadalkooda fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Labada su'aalood ee layliska 3aad adiga oo ku salaynaya muhiimada caddaaladu leedahay si kooban ugu faah-faahin una soo gunnaanad.

**Muhiimada Caddaaladu Leedahay**

Caddaaladu waa aalad aad lagama-maarmaan u ah oo loo adeegsado in lagaga hortago in ay callool xumo iyo cadaawad ka dhalato dadka dhaxdiisa kaalin aad muhiim u ahna ka qaadato sugida nolol nabad galyo iyo amni ku dheehan yahay. Caddaaladu waxay suura galisa in qofna si aan habboonayn ama xaq daro ah waxyeelo aan loogu gaysan islamarkaana qof walba si habboon xuquuqdiisa loogu tix-galiyo. Qoys ahaana marka ay caddaaladi ka jirto qoyska dhaxdiisa ka sokow kaalinta ay ka qaadato in xubnaha qoysku horrumarka dalka iyo bulshada si hawl karnimo leh ugu hawl-gali karaan. Xaafadaha iyo goobaha lagu noolyahay marka nidaam caddaalad ah uu ka jiro waxay dar-dargalisa in bulshada degan si nabad galyo iyo is-jacayl ku dheehan yahay ku wada noolaadaan islamarkaana saamayn weyn ku yeeshaan dadaalada lagu horrumarinayo goobaha ama xaafadaha kala duwan. Nidaam caddaalada ah marka uu dugsiga ka jiro bulshada dugsiga sida ardeyda, barayaasha iyo shaqaalaha kale ee dugsigu in si ay is-jacayl, nabad galyo, is-taageersi iyo isu-tanaasul ku dheehan yahay shaqadooda u wada qabsadaan waxaa suura gal noqonaysa in si sahlan loogu guulaysto hanashada ujeeddooyinka la hiigsanayo.

Waxaa jira arrimo badan oo caddaalad ku salaysan oo ay ardeydu ka fulin karaan qoysaskooda, xaafadahooda iyo dugsiyadooda dhaxdooda.Hawlahaas oo waafaqsan ama u dhigma awooda ay leeyihiin:

***Tusaale***

- Qoyska dhaxdiisa Aabo iyo Hooyo iyo waliba xubnaha kale ee qoysku ka kooban yahay in si siman loola dhaqmo ama loo caddaala falo.

- Dhammaantoodba in tix-galin iyo jacayl loo muujiyo.
- Qof kasta oo xubin ka ah qoyska marka falal caddaalad daro ah loo gaysto oo aan la dhaafin iyada oo la aminsan yahay. Hasa yeeshe waxaa loo baahan yahay in caddaalad darada si fool-ka fool ah loo sheego Lana saxo.
- Cidna falal caddaalad daro ah ama xad gudub ah in aan loo gaysanin.
- Hadi xata cid xad gudub loo gaysto in la caddeeyo in ayna habboonayn Lana aqbalin–iwm.
- Xaafadaha dhaxdooda dadka muwaadininta ah ee ka shaqeeya oo tix-galin la siiyo.
- Is-fahmi waaga ama khilaafyada sida lama filaanka ah saaxiibadood u soo dhax gasha iyada oo qofna aan la takoorin ama loo xaglinin, qofka khaldan waad khaldan tahay la yidhaahdo islamarkaana uu amino ama aqbalo khaladkiisa raali galina ka bixiyo.

## 4.2. HABSAMO U SOCOD NIDAMYADA GARSOORKA LOO BIXIYO IYO XARUMAHA CADDAALADA AH EE AGAGAARKA LAGA HELLO (2-XIISADOOD)

***Qalabka Waxbarashada ee la tix-raacayo***

- Xaafada, xarumaha booliska, maxkamadaha boostaro, sawir–iwm muujinaya.

### 4.2.1. Geedi socodka Arrimaha Garsoorka heer Bulsho(1-xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Fasalka dhaxdiisa hadi ay xadgudub idinka soo gaadho ayaad cabashadiina ugudbinaysiin?
- Agagaaradiina arrimo is-maan dhaaf ah marka ay dadka ka dhax abbuurmaan cid leh mas'uuliyada lagu tirtirayo khilaafyada ma jiraan? Siday is-maan dhaafyada u xaliyaan?

⇨ Labada su'aalood ee hordhaca ah ee korka ku xusan ardeydu jawaabo Afka ah ha ka bixiyaan. Su'aalaa kale ee soo socdana ha ka jawaabaan:

- Fasalka dhaxdiisa Adiga iyo ardey saaxiibka ah hadi aad is-caydaan ama dagaalantaan ayaad u sheegaysiin?
- Fasalka dhaxdiisa horjoogaha fasalka iyo ardey kale hadi ay is-caayaan ama dagaalamaan ayaa loo sheegaya ama lagu dacwoonaya?
- Fasalka dhaxdiisa barahiinu hadi uu xadgudub idiin ku gaysto ayaad u sheegaysin? Sabab?
- Xaafadaha aad ku nooshihiin dhaxdooda hadi ay dad isu-diriraan cid dagaalka qaboojisa ma jirta? Siday dagaalka u qaboojinayaan?

***Faah-faahin***

Ugu dambayn nidaamka fulinta arrimaha garsoorka gaar ahaana kuwa la xidhiidha bulshada rayadka ah qodobada asaasiga ah ee ka mid noqonaya faah-faahin kooban uga bixi.

***Geedi socodka Arrimaha Garsoorka bulshada Rayadka ah.***

In la fuliyo arrimaha garsoorka ah ee bulshada rayadka ku saabsan waxaa asaas u ah in marka hore mar xaladahan soo socda laga soo gudbo:

- Marka ugu horreeya in la helo isha ama waxaa asaas u ah dhibaatada.

⇨ Sababaha si loo garto warbixinta gacanta ka gaysanaysa oo habab kala duwan dad kala duwan lagaga soo ururiyo.

⇨ Warbixinada la soo ururiyey in ay sax yihiin si loo xaqiijiyo oo dadaal loo galo.

- Dadka dhibaatada qaba in la soo dhaweeyo kolba qofna lala sheekaysto sababaha ay iyagu soo jeedinayaana la dhegaysto.
- Sababaha ay iyagu soo jeediyeen in la bar-bar dhigo warbixinadi la soo ururiyey.
- Ugu dambayn qof walba halka uu caddaalad darada ka tabanayo ama dhibaatada uu sheekanayo in xal dhal loo helo kadibna heshiis laga dhaliyo cida khilaafku u dhexeeyo.

### 4.2.2. Waaxyaha Caddaalada (1-xiisad)

***Hordhaca***

***Sawirka 4.2.4.3,4.5 iyo su'aalaha hordhaca***

- Qoyska, dugsiga, goobaha lagu noolyahay iyo fasalada dhaxdooda waaxyaha caddaalada ama wax xaliya sheega.
- Guriyihiina, dugsiyadiina iyo fasalada aad wax ku baratiin dhexdooda siyaabaha wax loo xaliyo ama geedi socodka nidaamyada garsoorka mas'uuliyad noocee ah ayaad ku leedihiin? Ama mas'uuliyada aad ku leedihiin waxaa ay tahay miyaad garanaysaan?

⇨ Su'aalaha hordhaca ee korka ku xusan jawaabo Afka ah ha ka bixiyaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ardeyda afar koxoood uqaybi.Waaxyabaha caddaalada ee 1-4 la liis gareeyay 4 warqadood oo kala duwan inta aad ku qortid bakhtiyanasiib u diyaari. Koox walba warad ha doorato ama ha qaadato kadibna waaxda caddaaladeed ee ku soo hagaagta hawlaha ay qabato ha ka wada hadasho jawaabahoodana ha diyaarsato la soco wada hadalka. Marka wada hadalku dhammaadana koox walba mar jawaabahooda ha soo bandhigto.

1. Odayaasha, Aabayaasha Diinta, shakhsiyaad ka caanka ah
2. Xaafada
3. Booliska
4. Maxkamada

B. Waaxyaha caddaalada ee Dhaqanka.

- Iyaga oo ku salaynaya sheekada ku saabsan waaxyaha caddaalada ee dhaqanka ee buuga ku xusan si kooban ugu faah-faah (qoraalka buuga ku yaala ku filan).

T. Waaxyaha caddaalada ee casriga ah.

- Sawirka 4.3; 4.4 iyo 4.5 inta ay fiiriyaan su'aasha halka ugu dambaysa lagu xusay ha ka shaqeeyaan.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu faah-faahi macnaha iyo muhiimada ay leeyihiin waaxyaha caddaalada ee casriga ah.

***Hawsha***

- Iyaga oo koox-koox tiro yar u wada shaq aynaya ha ka wada hadlaan islamarkaana shaqeeyaan layliska 4aad jawaabahooda fasalka ha u soo ban dhigaan.

***Gabagabada***

- Si kooban ugu soo gunnaanad macnaha iyo muhiimada ay leeyihiin waaxyaha caddaalada ha casriga ah.

## 4.3. DHACDOOYINKA AMA XAALADAHA CADDAALADA KU XADGUDBI KARA AMA CADDAALAD XUMO KEENI KARA

Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo:

- Sawiro muujinaya caddaalad daro

### 4.3.1. Sharciga oo loo hogaasami waayo hordhaca

***Su'aalaha laga hordhaca***

- Dugsigiina cida u qaabilsan illaalinta sharcigu waa ayo?

- Cid sharciga illaalisa hadi ay jirto maxay noqonaysa? Tallaabooyin noocee ah hadi ay qaadaan ayaa habboonbaad leedihiin?

⇨ Labada su'aalood ee hordhaca ah ee korka ku xusan Afka ha kaga jawaabaan ardeydu.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koo)***

- Tuulooyinka kaaha qaybta koobaad" cinwaanka leh hoostiisa ee ku saabsan taariikhda dhulka ha akhriyaan kadibna labbada su'aalood ee layliska 5aad koox-koox ha uga hadlaan. Natiijada wada hadakana fasalka ha u soo dhigaan.

***Hawsha (shaqo guri kali-kali)***

- Faah-faahinta layliska 5aad kadibna casharka ku xigta kali-kali ha u akhriyaan islamarkana layliska 6aadna buugooda ha kaga shaqeeyaan.Marka ay buugta keenana u sax. Ardeyda sida wanaagsan uga shaqaynaysayna ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan jawaabahooda u mahadnaq kadibna ardeyda fasalku ha u salabeeyaan.

***Faah-faahin***

- Dhibaatadu ugu muhiimsan ee ka dhalata u hogaansanan la'aanta sharciga iyo marka sharciga loo hogaansamin waayo cida ugu muhiimsan ee la rabo in ay xaliso in ay yihiin inta aad tustid iyagana in looga baahan yahay in ay sharciga u hogaansamaan adiga oo u sheegaya u soo gunnaanad.

**Falal caddaalad daro ah oo la fuliyo**

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

Meelahan soo socda xadgudubyada dhici kara liis gareeya:

B. Fasalada wax lagu barto dhaxdooda

T. Dugsiyada dhaxdooda

J. Agagaarada xaafadaha

- Dadku falalaka caddaalad darada ah maxay u fuliyaan? waxyaabaha aad aminsantihiin in ay sabab u yihiin sheega.

⇨ Ardeyda sii wakhti ay kaga wada hadlaan su'aalaha hordhaca kagana jawaabaan kooxo dhawr ah jawaabahooda fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn adiga oo tusaalooyin ku xoojinaya si kooban ugu faah-faahi macnaha iyo waxyeelada caddaalad-daradu leedahay.Falalka caddaalad darada ah oo la fuliyo in ay tahay wado ku xadgudbaysa caddaalada in ay tahay fahamsii. Ugu dambayn ardeyda in laga sugayo in ay ka foggaadaan falalka caddaalad-darada ah in ay aminaan ku dhiiri gali kadibna u soo gunnaanad.

**Macnaha Caddaalad Darada iyo Waxyeelada ay Sabbaan**

Caddaalad-daro macnaheedu waxaa weeye xadgudub, in qof loo xagliyo amah anti, xuquuq ama allaab uu qof leeyahay si aan caddalaad ahayn cid kale oo aan xaq u lahayn la siiyo iyada oo xoog ama awood la adeegsanayo. Xadgudub waa fal dambiyeed lidi ku ah mas'uuliyada maxkamada islamarkaana yaraysanaya ama qudhsanaya jiritaanka maxkamadaha sharciga.Waa tallaabooyin xadgudub loogu gaysto cid iyada oo cid kalana loogu faa'iidaynayo, tallaabooyin aan run ahayn ama runi ka maqan tahay iyo go'aan xukumaya ama xukun lagu riday qof ama koox oo aan sharciga ku salaysnayn laakiin si mad-madaw iyo xaq daro loogu fuliyo cid kale. Waa go'aan qof xaqa uu leeyahay lagaga qaado oo qof kale oo aan xaq u lahayn loogu wareeejiyo. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in qofka xaqlaha marka wax loo xukumayo wax dheeri ah oo ka badan wixi iuu xaqa u lahaa in la siiyo. Arrimahan inta badan waxaa sabab u ah qabyaalad, saaxiibitinimo ama danaysi waxyaabo la xidhiidha.

Qolada, beesha, caynta, midabka, diinta –iwm iyada oo lagu salaynayo in adadka lagu kala qaybiyo dhaxdoodana khilaaf lagaga dhax abuuro sida in qof la soo dhawaysto qof kalana la iska foggeeyo, qof qaraabo ahaan loo soo dhawaysto qof kalena lala dagaalamo, qof in loo faa'iideeyo qof kalana la waxyeeleeyo, in qof la ixtiraamo qof kalana la bahdilo ama sharafta laga qaado–iwm waa xaalado caddaalad daro keeni kara.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ugu dambayn labada su'aalood ee layliska 7aad hoostiiska ku xusan koox-koox ha uga wada hadlaan. Adiga oo dhax wareegayana dhiiri gali wixii taageero ah ee ay u baahan yihiina sii ugu dambayna waxaa ay isla gartaana ardeyda ha u soo bandhigaan.

Inta kadib maadaama labada su'aalood ka caawinayaan in ay dulucda fahmaan islamarkaana looga baahan yahay in ay ardeydu si fir-fircoon uga qayb qaataan ku dadaal in aad dhaxal siiso qodobadan muhiimka ah ee soo socda.

1. Xadgudubyada caddaalad darada ah si loo tirtiro idinka maxaa la idinka sugaya su'aasha ah marka la rabo in laga jawaabo qodobadan soo socda waa in mudnaan la siiyo:
   - Marka hore falalka caddaalad darada ah in ay wax xun yihiin in aynu amino islamarkaana aqbalno ayaa loo baahan yahay.
   - Marka aynu amino islamarkaana aqbalno inaguna waa in aynu iska illaalino in aan si xaq daro ah faa'iido ugu helno.
   - Wado aan caddaalad ahayn hadi xataa aynu faa'iido ku helno in ay raali ka ahayn ama doonayn oo aynu si cad u sheegno, si aynu ficil ugu muujiyana in aynu marna qablaynin oo aynu si cad ugu soo hor jeesano.
   - Hadi aynu aragno ama la kulano cida ay khusayso in aynu u sheegno in aan daaha uga qaadno ayaa loo baahan yahay.
2. Falalka caddaalad darada ah ee dugsiyada laga fuliyo si loo tirtiro maxaa loo baahan yahay in la sammeeyo su'aasha ah si jawaab lagama maar-maan in mudnaan la siiyo:
   - Waxyaabaha aynu korka ama qodobka 8aad ku soo sheegnay iyaga oo sidooda loo qaadanayo. Barayaasha dugsiga iyo guud ahaan shaqaalaha si ay isbedel wanaagsan ula yimmaadaan waxaa habboon in waxyeelada iyo xummaanta falalka caddaalad darada ah ay keenaan si faah-faahsan loogu sharaxo.
   - Fal kasta oo xadgudub ah ama caddaalad daro ah oo qof loo gaysto in la qaado tallaabooyin lagu saxayo oo ku habboon ama u dhigma xadgudubka ayaa lagama maarmaan ah.

Dhibaatooyinka ka Dhasha falalka Caddaalad darada ah.

***Hordhaca***

***Sawirada 4.6, 4.7, iyo 4.8***

- Sawirada korka ku xusan maxaad ka fahmaysaan? Falal nocoee ah ayaa lagu fulinaya? Falalkan si ayna di8b ugu dhicin muwaadiniinta maxaa laga suga in ay sammeeyaan?

⇨ Su'aalaha hordhaca ee korka ku xusan ardeydu jawaabo Afka ah ha kaga jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Tuulooyinka kaaha qaybta labaad" qodobka leh hoostiisa taariikhda ku xusan inta ay akhriyaan kadibna labada su'aalood ee layliska 11aad hoostiisa ku qoran koox-koox ha uga wada hadlaan. Adiga oo wada hadalka dabagalaya kooxo dhawr ah natiijada wada hadalkooda ha so bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Falalka caddaalad darada ah dhibaatooyinka ka dhasha si kooban adiga oo ugu faah-faahinaya u soo gunnaanad casharka.
- Faladka Caddaalad darada ah Waxyeelooyinka ay Keenaan
- Fulinta falal caddaalad daro ah waa arrin aad u fool xun. Caddaalad daradu ama xadugudbku wuxuu lidi ku yahay jacaylka, midnimada, nabbad galyada iyo in laga heshiiyo waxyaabaha la isu-maan dhaafsan yahay ama lagu kala arragti duwan yahay. Dadka wuxuu ka dhx abbuura is-nacayb, callool xumo, dood ama is-jikaarid, iyo kala teg.
- Falalka caddaaald darada ah nabad galyada iyo horrumarka oo ay caqbad ku yihin ka sokow waxay asaas u noqdaan dhibaatooyin bulsho oo aad u waxyeelo badan.
- Dareenka dad badan ayey waxyeelo u gaystaan. In qofka niyad jab iyo dhibaatooyin dheeri ah ku dhacaan ayay hor seedaan. Falalka caddaalad darada ah waxay kaalin muhiim ah ka qaataan sabboolnimada iyo dib u dhacnimada dalka. Sida daraadeed, falalka caddaalada darada ah dhinac kasta oo laga fiiriyo waa falal aad u xun oo waxyeelo badan dadka u horseeda.

***Hawsha (shaqo guri –kali-kali)***

- Layliska 9aad shakhsi-shakhsi buugooda ha kaga soo shaqeeyaan. Marka ay soo dhiibaana waa in loo saxo.

## 4.4. MACADYADA (XARUMAHA) URURADA BULSHADA (I-XIISAD)

Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo:

- Boostaro, sawiro–iwm muujinaya macadyada bulshada.

**Macnaha Ururada (mcadyada)bulshada**

***Hordhaca***

***Sawirka 4.9 iyo su'aalaha hordhaca ah.***

- Sawirka 4.9 inta ay ka wada hadlaan ha sheegaan waxaa uu yahay. Sawirka hoostiisa jaantuuska lagu soo bandhigay hordhac ahaan ha u adeegsadaan hana buuxiyaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Jaantuuska kadib sharaxaada ku qoran ha akhriyaan kadibna layliska 10aad qof-qof buugtooda ha kaga shaqeeyaan waana in loo saxo.

***Faah-faahin***

- Adiga oo u qeexaya macnaha ururada ama macadyada iyo adeegyada ay bixiyaan u soo gunnaanad casharka.

**Caddaaladnimad AdeegyadaUrurada/ macadyada) bulshadu bixiyaan**

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Bixinta adeeg bulsho oo caddaalad ah macnaheedu waa maxay?
- Caddaaladnimada adeegyada macadyada bulshada maxaa lagu caddaynaya?

⇨ Su'aalaha hordhaca ee korka ku xusan jawaabo Afka ah ha ka bixiyaan.

***Faah-faahin***

- Faah-faahin gaaban uga bixi waxaa uu yahay macnaha caddaaladnimada adeegyada macadyada bulshadu bixiyaan waxyaabaha lagu garto.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Labbada su'aalood ee ka tirsan layliska 11aad kooxo xubno kooban ay ka mid yihiin ha kaga wada hadlaan. Adiga oo wada hadalka dabagalaya taageerooyinka ay u baahan yihiin sii kooxhaa si wanaagsan uga shaqeeyey fasalka ha u soo bandhigaan. Kadibna u soo gunnaanad.

## 4.5. CASHUUR (2-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarashada ee la Tix-raacayo:

- Booster, sawir–iwm muujinaya muwaadiniin cashuur bixinaysa.

**Macnaha iyo Faa'iidada Cashuurta**

***Hordhaca***

***Sawirka 4.10 iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawirka 4.10 dhaxdiisa waxaa ku muuqda waa maxay?
- Erayga cashuur hada ka hor ma maqasheen?

⇨ Sawirka 4.10 inta ay u fiirsadaan su'aalaha korka ku xusan jawaabo afka ah ka ha ka bixiyaan.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Su'aasha kadiija 1aad iyo 2aad qodobka leh hoostiisa su'aasha kadiija iyo Aabaheeda jawaabteeda inta ay akhristaan su'aalaha layliska 12aad iyo 13aad hoostooda ku xusan qof-qof buugtooda ha kaga shaqeeyaanb kadibna ha loo saxo. Shakhsiyaadka si wanaagsan uga shaqeeyey fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Macnaha cashuurta, faa'iidada iyo cashuurta oo la bixin waayo dhibaatoo-yinka ka dhalan kara si kooban ugu sharax kadibna u soo gunnaanad.

**Macnaha iyo Faa'iidada Cashuurta**

Cashuur macnaheedu waxaa weeye in qof kasta dakhliga soo gala uu wax yar ka jiro kuna caawiyo ama siiyo dawlada. Dawladuna cashuurta ay soo ururiso waxay ku bixisa adeegyada bulshada ee asaasiga ah in ay ku balaadhiso uguna adeegto. Tusaale, wajooyin, biyo, laydh, tilifoon–iwm ayaa bulshada loogu sammeeya. Dugsi waxbarasho goobo caafimaad, xafiisyo boolis in lagu furo iyo in adeegyo muhiim ah loogu fuliyo bulshada iyo in barnaamijyo horrumarineed lagu balladhiyo. Dhammaan adeegyadan aynu soo sheegnay iyo kuwa kale oo aad u tiro badanba lacagaha lagu fuliyo waa lacagaha cashuurta ah ee dawladu muwaadiniinta dalka ka soo ururiso .

Sida habboon cashuurta hadi loo bixin waayo adeegyada korka ku xusan oo dhan lama heli karayo. Hadi dugsi la dhisi kari waayo waxbarasho lama heli karayo. Hadi la awoodi waayo in goobaha caafimaadka la ballaadhiyo in adeeg caafimaad la helo ma suurto galayso. Daryeel ama adeeg caafimaad hadi la heli kari waayo waxaa badanaya faldhambiyeedyada iyo tallaabooyinka sharci darada ah. Bulshadu iyada oo aan nabadgalyo haysanin nabadgalyo ma dhisi karto.Boobka, dagaalada, iscabudhinta–iwm ayaa badanaya sidaa daradeed, cashuurtu horrumarinta dalka, caafimaadka iyo nabadgalyada kaalin muhiim ah ayey ka qaadata.

***Gabagabada Cutubka***

- Bare! Gabagabada cutubka marka aad soo gaadho si ardeyda fursad ay kaga faaloodaan waxyaabihi ugu muhiimsana ee ay ku soo barteen.
- Dhawr ardey ah marka aad fursad siiso kadib adigu u soo koob qodobadi ugu muhiimsana cutubka.
- Ugu dambayna ku dhiiri galin in ay su'aalahan ka shaqeeyaan.

### SU'AALAHA GUNNAANADKA CUTUBKA

**I. Weedhan soo socda tii sax ah ku qor 'Run' tii khalad ahna ku qor 'Been'**

1. 'Been' 2. Run 3. Been, 4. Run 5. Been

**II. Qaybta "B" iyo qaybta "T" sida ay isugu habboonyihiin isugu Aadi.**

1. X 2. T 3. B 4. KH 5. J

**III. Ka Dooro**

1. J 2. B 3. J 4. T 5. B

**IV. Su'aalahan soo socda jawaabta saxda u dooro.**

1. Xaafada; xarunta booliska, iyo maxkamada.

2. Dugsiga 3. Cashuur.

# CUTUBKA 5: WADANIYADA

## (9-Xiisadood)

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:-

- Sharaxaan macnaha dal-jacaylku waxaa uu yahay.
- Gartaan xidhiidhka ay leeyihiin dal-jacaylka iyo muwaadinimada.
- Tilmaamaan ficilada ama arrimaha waxyeeleeya dareenka dal-jacaylka.

| No. | Casharka | Ujeeddooyinka oo faah-faahsan | Qalab/Allaa bo kale oo muhiim ah |
|---|---|---|---|
| 1. | Dal-jacayl | Barashada cutub ka kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay: | • Sawiro muujinaya muwaadinin hawlo kala duwan fulinaya. |
| 2. | Tallaabooyinka wax u dhima jacaylka dalka | • Faah-faahiyaan tallaabooyinka ama dhacdooyinka wax u dhima dal-jacaylka. | • Sawiro muujinaya tallaabooyinka wax u dhima daljacaylka. |
| 3. | Macnaha qalabka ama allaabada si waddaag loo wada istimaalo | • Qeexaan macnaha allaabada sida wadaaga ama wada jir ah loogu wada adeegto.<br>• Liis gareeyaan allabada sida wada jirka looga adeegsado guryaha iyo heer dugsi.<br>• Sharaxaan sida loo daryeelayo allaabada sida wada jirka ah loogu wada adeegto | • Sawiro muujinaya allaabada kala duwan ee dugsiyada dhaxdeeda lagaga shaqeeyo sida miisas,sabuurado,buug-iwm |
| 4. | Sabboolnimada iyo dib u dhacnimada oo laga saaro ama laga baxo. | • Liis gareeyaan waxyaabaha lagu garto sabboolnimada iyo dib u dhacnimada.<br>• Soocaan waxyaabaha ama hababka sabboolnimada iyo dib u dhacnimada lagaga baxo | • Taswiiro muujinaya dad iyo qoysas----<br>• Taswiro muujinaya muwaadiniin waxbaranaya, shaqaynayo cilmi-baadhisna sammaynaya |
| 5. | Muwaadinimo | • Qeexaan macnaha muwaadinimadu waxaa uu yahay. | |
| 6. | Calanka qaranka ujeedada | • Calanka qaranka | • Calanka qoomiyadaha ama bulshooyinka Itoobiya.<br>Khariidada dalka |

## 5.1. DAL-JACAYLKA (JACAYLKA DALKA) (2-XIISADOOD)

***Qalabka Tix-raaca***

- Booster, taswiir–iwm muujinayay muwaadinin hawlo kala duwan fulinaysa.

### 5.1.1. Macanaha Dareenka Dal-Jacaylka (1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Sawirka 5.1 iyo su'aalaha Hordhaca***

- Qeexa fariinta dal jacaylka ku saabsan ee sawirku gudbinayo.
- Odhaahyada agagaaradiina lagaga hadlo sida gabayada, mah-maahyada, heesaha, masalooyinka–iwm ee dal-jacaylka ku saabsan waxaa aad ka taqaaniin saaxiibadiina fasalka isweydaarsada.

⇨ Sawirka 5.1 inta ay fiirsadaan su'aalaha korka ku xusan jawaabo afka ah ha ka bixiyaan.

***Faah-faahin***

- Faah-faahin kooban oo ku saabsan dal-jacaylku waxaa uu yahay u soo bandhig ardeyda.

***Macnaha Dareenka Dal-Jacaylka***

Dal-jacaylku waxaa weeye dareen jacayl iyo lahaansho ku dheehan yahay oo muwaadiniintu u qabaan dalkooda hooyo ee ay dhasheen waajibaadka dalkeena inaga saran oo aynu si mas'uulnimo u aqbalno ugana soo baxno weeyaan.

Dal jacaylka waxaa kale oo ka mid ah in wakhtiga, aqoonta, hantida –iwm kolba inta ay awoodu ku samaxdo loo huro si ficil ahna loogu fuliyo wax kasta oo muwaadiniinta iyo dalka horrumarintiisa waxtar u leh.

Dareenka daljacaylku horrumarka dalka iyo nabadgalyada si loo sugo wuxuu gaadhaa heer nafta dhanba loo huro.

Dal-jacaylka macnihiisu waxaa kale oo ka mid ah in jacayl run ah oo qalbiga ka soo asaasmay islamarkaana aan la badali karayn uu noqdo si dhab ahna ama ficil ahna bulshada dalka ku nool loo tuso.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Odhaahyada bulshada kadib sharaxaada ku xigta labo-labo ha u akhriyaan labada su'aalood ee layliska 1aad hoostiisa kuxusana ha ka shaqeeyaan.

### 5.1.2. Astaamaha Lagu Garto Dal-Jacaylka

***Hordhaca***

***Sawirka 5.2 iyo Su'aalaha Hordhaca***

- Qofkani Dareen Jacaylbu leeyahay marka aynu odhan karno waa marka uu maxay sammeeyo ama waa marka uu dabeecad noocee ah yeesho?

⇨ Ardeydu labo-labo ama koox-koox su'aalaha hordhaca ha uga wada hadlaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Xaafada Aabo Cali iyo carruurta agagaarka ku nool" qodobada leh hoostiisa taariikhda ku qoran kooxo dhawr qof ka kooban ama lammaane lammaane ha kaga wada hadlaan saddexda su'aalood ee layliska 2aad ka mid ahna ha ka wada shaqeeyaan. U kuurgal wada hadalka, ugu dambayna koox walba natiijada wada hadalka ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn astaamaha dal-jacaylka lagu garto si kooban ugu qeex kadibna u soo gunnaanad.

**Dabeecadaha lagu garto Dal Jacaylka**

Dabeecadaha daljacaylka lagu garto aad bu u tiro badan yihiin. Kuwa ugu muhiimsana waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

⇨ In dalka sida Hooyada iyo Aabbaha oo kale laga soo qaado islamarkaana sida Hooyo iyo Aabo loo xanaaneeyo loo xannaaneeyo dalka.

- Goobaha aynu ku noolnahay iyo dalkeena in aan si wanaagsan u barano kadibna hantida khayraadka dabeeciga ah iyo taariikhihiisa ma guuraanka ah in aynu u bogno islamarkaana xannaanayno.
- Dadka sida dariskeena, saaxiibadeena, qaraabadeena—iwm kolba inta ay awoodeenu noo saamaxdo in aynu caawino.
- Guryaheena, xaafadaheena, dugsiyadeena –iwm oo aynu daryeelno nadaafadoodana illaalino.
- IIn dalka hanti loo abbuuro guryaheena xaafadaheena, dugsiyadeena–iwm allaabada laga hello ee dadka ka dhaxaysa ama si gaar ahba loo leeyahay oo la daryeelo si taxadar leh islamarkaana nadiif ahna loo hayo.
- lInaga oo anshaxeena wanaajinayna xaafadaheena hadi ay tahay iyo dugsiyadeena dhaxdoodaba dhibaatooyinka anshax xumada la xidhiidha hadi ay jiraan kolba inta ay awoodeenu noo samaxdo in ayna iska illaalino islamarkaana isa-saxno wax kasta oo deganaanshaha (Aniga) iyo nabad galyada dalka iyo dadka waxyeelo u gaysanayaba in lala dagaalamo.
- Beesha, luqada iyo Diinta inaga oo aan isu-kala qaybin ama carqalad isaga dhigin in aynu is-jacayl, is-ixtiraam, isu-tanaasul iyo midnimo isu-muujinaya in aynu dalkeena horrumarino islamarkaana ku dadaalayna sidi aynu barwaaqo ugaadhsiin lahayn in aynu si wada jir ah u shaqayno ayaa lagama maar-maan ah.

Guud ahaan jacaylka loo qabo siyaabo kala duwanba loo qeexa. Is-xilqaan, daraasado cilmi-baadhi ah oo la fuliyo Goobaha Dagaalka, barnaamijyada horrumarinta, maal-galinta, –iwm ayaa lagu qeexaa. Waxyaabaha aynu soo sheegnay waxaa ka wada muhiimsan saddexdan soo socota.

Goobaha lagu noolyahay iyo taariikhda bulshooyinka ee saxda ah oo la garto; waxyaabaha xun-xun ee amaanka iyo nabad galyada bulshada dhaawacaya oo lala dagaalama lagana hor tego iyo hantida dawlada iyo bulshada oo burburinta iyo waxyeelada laga illaaliyo weeyaan.

1. *Dalka, Goobaha lagu Noolyahay iyo Taariikhda saxda ah ee Bulshooyinka oo la garto*

Dal waxaa la yidhaahda dhul cayiman oo caalami ahaan, jograafi ahaan xudduud sharci ah leh oo dad ama bulsho muwaadin ah dalka ama dhulka ku noolyihiin. Bulshada hal dal oo muwaadinimo ku middoobay laakiin Beel, Diin, Dhaqan, Luqad—iwm ku kala duwanaan kara ku noolyihiin ayaa jiri kara. Dal macnahiisu waa bulsho.Jacaylka aynu dalkeena Itoobiya u qabno ma'aha oo kali ah mid buuraheeda iyo wabiyadeedu sabab u yihiin laakiin waxaa kale oo sabab u ah waa maadaama oo mudnaanta koobaad jacaylka bulshooyinkeeda aynu u qabno uu asaas u yahay.

Ruh ahaan Dabeecada Dalka iyo Dhulka oo la jeclaado waa lagama maar-maan islamarkaana la xannaaneeyo sababta oo ah waxaa ku nool bulshada.Siyaabaha ama sababaha loo jeclaanayo kuwa ugu muhiimsan mid kamid ah taariikhda dhabta ah ee dalka iyo bulshada oo la ogaado weeyaan.

Marka aan is-nidhaahno waxaan leenahay dareen Dal jacayl waxaa weeyaan marka taariikhda dhabta ah ee bulshooyinka dalkeena ku nool la

garto islamarkaana bulsho walba dhaqankeeda, luqadeeda iyo Diinteeda ama waxyaabaha ay aminsan tahay aynu fahamno. Hadi aynu garanaynin taariikhda Dalkeena iyo bulshooyinka ku nool waxay ka dhigan tahay in aynu waxba ka aqoonin dalkeena. Waxaaba dhici karta in fahamka ama arragtida aynu dalkeena ka haysano uu noqdo mid khaldan. Dareen dal jacayl oo ku salaysan faham khaldan wuxuu sabab u noqda in aynu yeelano arragti khalda. Sida daraadeed qof aan taariikhda dalkiisa garanayn in jacaylka dalkiisa uu u hayo wax macno ah Dabeecada ama astaanta koobbad ee dareenka dal jacaylka lagu garto waa marka la garto taariikhda dhabta ah ee Dalka iyo bulshada.

2. *Tallaabooyinka ama Arrimaha Carqaladayn kara amniga iyo nabad galyada Bulshada oo la iska Illaaliyo.*

Danaha guud ee hal dal waxaa weeye in muwaadiniinta oo dhan si siman faa'iidada iyo nabad galyadooda u illaalshadaan. Muwaadiniin nolol wadaaga ama isku meel ku wada nool danaha ka dhexeeya waa in si wada jir ah ay u wada illaalshadaan. Si ka mid ah siyaabaha la iskaga illaaliyo waxaa weeye hadi qof ka mid ah xuquuqdiisa la taabto loo arko sidii dad dhammaantood xuquuqdooda lagu xad gudbay oo kale. Arrinta ama sida labbaad ee dareenka dal jacaylka lagu garto in si midnimo ku dheehan tahay loo wada noolaado islamarkaana qof ka tirsan ama ku dhax nool marka xadgudub loo gaysto laga soo qaado ama loo macneeyo in xuquuqda dadka goobta ku wada nool oo dhan lagu xadgudbay oo kale. Kadibna sida wada jir ah looga horjeesto sida ugu dhaqsaha badana loo saxo ayaa na looga baahan yahay.

3. Hantida Dawlada iyo Bulshada oo la Illaaliyo
   Hantida Dawlada iyo Bulshada ma'aha hanti uu qof kali ah leeyahay. Laakiin waxaa weeye hanti muwaadiniinta dalka ku nool oo dhan ay leeyihin. Sababta oo ah hantida Dawlada iyo tan bulshadu waa lacagta muwaadiniinta oo dhan. Adeegyada hantidan lagu maalgaliyana cid aka faa'iidaysanaysa waa bulshada rayadka ah. Sidaa daradeed qof kasta oo muwaadin ah waxaa looga baahan yahay in uu garto hantida dawlada iyo bulshadu in ay tahay mid isaga iyo muwaadiniinta dalka u dhaxayso oo ay wada leeyihiin tahay islamarkaana hantidaas la daryeelo. Waa in lagu dadaalo in hantidan laga illaaliyo in si aan habboon looga faa'iidaysto, la khasaariyo islamarkaana la lumiyo. Waxaa waliba lagama maaar-maan in laga illaaliyo in cid kale ayna isu-dayin in ay hantida dawlada iyo dadka burburiyaan qof walbaana iska illaaliyo in uu hantida dad weynaha si gar ahaaneed ugu faa'iidaysatid.

## 5.2. ARRIMAHA WAX U DHIMI KARA DAREENKA DAL JACAYLKA (2-XIISADOOD)

***Qalabka tix-raaca***

- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya tallaabooyinka dareenka dal-jacaylka wax u dhima waxyaabaha lagu garto.

***Hordhaca***

***Hadalo tusaale ahaaneed oo su'aasha hordhaca***

⇨ Hadi guriga Aabaha la boobayo la boob.

⇨ Laluushka iyo tuugu ma jecla albaabka

⇨ Cid wax i yeeli karta ma jirto

⇨ Anigu hadaan dhinto caws yuun bixin

Odhaahyada korka ku xusan fariinta ay gudbinayaan qeex.

Odhaahyada aynu soo sheegnay fariinta ay gudbinayaan ardeydu koox-koox ha uga wada hadlaan kadibna ha soo bandhigaan. Adiga oo dabagalaya wada hadalka taageerada lagama maar-maanka ah sii. Natiijada wada hadalkoodana

fasalka ha u soo jeediyaan. Jawaabaha u baahan dib u hagaajin inta aad dib u hagaajiso odhaahyada korka lagu soo bandhigay waxyeelada dareenka dal jacaylka ay u gaysan karaan u sharax.

*Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)*

- Sheekada Faarax “laaqe” hoostiisa taariikhda ku qoran koox-koox ha u akhriyaan layliska 3aad iyaga oo ka wada hadlaya ha ka shaqeeyaan. Marka ay dhammeeyaan iyaga oo su’aasha mid-mid u soo qaadaya ha sharaxaan.
- Kadib tallaabooyinka dareenka dal jacaylka waxyeelo u gaysta adiga oo mid-mid u liis garaynaya u sharax.

***Tallaabooyinka Waxyeelada u gaysta Dareenka Dal Jacaylka***

Guno iyo qabyaalad lagu shaqeeyo (musuq-maasuq) in gunno iyo qabyaalad lagu shaqeeyo waa mid ka mid ah waxyaabaha wax u dhima dareenka Dal jacaylka waxaa weeyaan Gunnaanad iyo qabyaalad oo lagu shaqeeyo. Qof garsoore ah inta uu sharciga iyo nidaamka tooska ama xaqa ah ka leexdo in isaga o qof u xaglinaya in uu qof kale go’aan uuna mutaysanin ama aan caddaalad ahayd ka rido; Qof mas’uul ah inta uu qaynuunka ka tallaabsado (ku xadgudbo) isaga qof kale in uu caawiyo raba go’aan aan sax ahayn marka uu rabo in uu go’aamiyo ama uu ku rido marka la leeyahay lacag ama waxyaabo kale oo si qarsoodi ah loo siiyo ayaa gunno la yidhaahda. Shaqada Guno lagu qabtay sharciga ay jabinayso ka sokow bulshaday gaf ku tahay. Illaa iyo inta gunno lagu shaqaynayo waxaa meesha ka baxaysa ama adkaanaysa in xuquuqda sharciga ah ee bulshadu xaq u leedahay in ay ka faa’iidaysato iyo noloshoda cid dammaanad qaada ay weydo. Maadaama xuquuqda sharciga ah ee bulshada la carqaladaynayo dareenka jacayl ee Dalka loo qabo ayaa meesha ka baxaysa. Sababta oo ah daku in uu xuquuqaha bulshadiisa daryeelo maadaama oo la filayo weeyaan.

***Dadka oo dareenka ama dhaqanka is-taageersigu dhaxdooda ka baxo***

Dadka hadu isu-tanaasul islamarkaana istaageero horrumar middaysan ayaa la gaadhaya. Dadka dhaxdooda marka uu jiro dhaqan isu-taanasul iyo is-gaageersi ku salaysan Dalku barwaaqo gaadhaya. Marka is-taageersi iyo is-faham uu jiro waxaa si sahlan u muuqanaya dareenka Dal-jacaylka. Dhaqankan is-fahamku marka uu jiro maadaama qof dhibaatooyin qaba uuna jirayn dalka dhaxdiisa tuug, boob, tuugsi ma jirayaan. Sido kale bulshadu nabadgalyo iyo jacaylbay ku noolaanaysa, ka soo jorjeedka marka aynu ka fiirino is-taageersi iyo is-faham dhaqan ku salaysan hadi uuna jirin waxaa aad u sii kordhaya dadka dhibaataysan. Dadka talaabaysan marka ay sii kordhaan waxaa aad u sii baahaya tuugsiga, tuugada, boobka–iwm, kadibna bulshadu cabsi iyo kalsooni daro ayaa la soo gudboonaysa. Qofku hadii si nabad galyo ah in uu ku noolaado hadi ay ku adkaato waxaa ka lumaya dareenka Dal-jacaylka.

***Dareenka maxaa iga galay oo sii Ballaadha***

Arrin kasta oo Dalka iyo bulshadiisa la xidhiidha halki looga baahna in ay si firfircoon uga qayb qaataan hadi dareenka maxaa iga galay uu sii faafo lagama fikiri karo nabadgalyo, horrumar, barwaaqo in la gaadho. Nabadgalyo, horrumar iyo barwaaqo hadi la hannan kari waayana waxaa dhiman dareenka daljacaylka.

***Qodobka Cad-caddaashaha iyo Mas’uul ka Noqoshada oo la Jabiyo***

Cad-caddaanshaha iyo mas’uul ka noqoshadu waa qodobo ama qaynuuno ka mid ah kuwa nidaamka diimuqraadiga ah ku shaqeeyo. Cad-caddaansho qodobka ah waa qodob qof kasta gaar ahaan qof mas’uuliyad haya shaqada uu hayo looma baahna in ay dadka kale ka qarsoonaato. Wixii ka baxsan waxyaabo qadar ah oo sir ahaan loo qarninayo qofka ma’suulka ah in uu si sax ah u shaqaynayo

iyo in kale waxaa la ogaan karaa oo kali ah marka qodobka cad-caddaanshaha si habboon loo dhaqan galiyo. Qodobka cad-caddaanshuhu marka si wanaagsan loo dhaqan galiyo waa in warbixin dhab ah xili ay munaasibka tahay si cad bulshada doola socodsiiyo.

Erayga ka mas'uul noqosha ama dammaanad qaadiduna wuxuu ku saabsan yahay in qof kasta shaqadiisa si habboon hadi uu u qaban waayo ama mas'uuliyada la saaray si fiican uga soo bixi waayo in la weydiiyo sababta uu mas'uuliyadiisa uga soo bixi waayay lagala xiisaabtamo kadibna tallaaboyin u dhigma khaladka oo lagu saxayo laga qaado Mas'uuliyad qaadida marka la dhaqan galiyo waxay dardar galinaysa in dadku shaqooyinkooda ay ixtiraamaan sida ugu habboona ay u gutaan. Qodobka mas'uuliyad qaadida hadi la dhaqan galin waayo dhibaatooyin farabadan ayaa abbuurmaya. Waxaa imaanaysa in shaqada si habboon loo gudan waayo islamarkaana qof walba sida uu rabo iska yeelo. Hadi aynu soo koobno qodobka cad-caddaanshaha iyo mas'uuliyad qaadida hadi lagu xadgudbo dhibaatooyin badanba bulshada soo gaadhaysa. Kadibna waxaa hoos ku dhacaya dareenka daljacaylka.

Dano gaar ah si loo fashado in tallaabooyin sharci-daro ah laqaado si ay dano gaar ahaaneed u furshadaan hadi dadku tallaabooyin sharci daro ah ay fuliyaan dalku wuxuu noqonaya mid aan lahayn wax nidaam ah. Nidaam xumadu marka ay sii faaftana waxaa si badanaya faldambiyeedyada. waxaa adkaanaysa in dadku si nabad galyo leh ku noolaadaan. Qofkuna si nabad galyo ah hadi uu dalka ugu noolaan waayo niyad jab ayaa ku dhacaya kadibna mayeelanayo dareen dal jacayl ah.

***Tallaabooyinka xun-xun ee Fasalada Dhaxdooda la guliyo***

Ficilida fasalada dhaxdooda laga fuliyo waxaan u kala qaybin karma labo qaybood. Tallaabooyin ardeydu kacdo iyo kuwo barayaasha kacaan:

Ficilada ardeydu ku kacdo waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- In fasalka dhaxdiisa rabshada, buuq iyo nidaam baris-barasho oo aan habayaraatee jirin.
- In qalabka baris-barasho ee fasalka sida kuraasida, miisaska, sabbuurada–iwm six un loogu takri falo ama loo daryeeli waayo islamarkaana ay dayacmaan lana jajabiyo, la uskageeyo–iwm.
- In saaxiibada fasalka dhaxdooda isjacayl iyo nabad galyo laga waayo islamarkaana qofba qof, kooxba koox rabshad, dagaal, cay–iwm kula kacdo.

***Tallaabooyinka xun-xun ee barayaashu fuliyaan waxaa ka mid ah kuwan soo socda***

- Wakhtiga xiisada oo waxyaabo aan habboonayn uu ku lumiyo iyo casharada oo uuna siwanagsan ugu dhigin ardeyda.
- Tallaabooyin ardeyda lagu kala qaybinayo, qaar xuquuqdooda lagu xadgudbo halka qaar kalana Amaan, dhibco iyo karti ayna lahayn la siiyo iyada oo qaraabo, kala jeclaysi lagu salaynayo.
- Fasalka oo aan si wanaagsan oo ku habboon baris-barashada laga dhigin. Tusaale, nadaafada fasalka oo xun, ardeyda oo aan la habbayn islamarkaana la isaga amuso–iwm.

## 5.3. MACNAHA AGABYADA SI WADAAG AH LOOGU WADA ADEEGTYO (2-XIISADOOD)

***Qalabka tixraaca***

- Boostaro, sawiro–iwm muujinaya allaabo qoysku si wadaag ah ugu wada adeegto.
- Booster, sawir–iwm muujinaya allaabada dugsiga dhaxdiisa barayaasha, ardeyda iyo shaqaalaha dugsigu si wada jir ugu wada faa'iidaystaan.

### 5.3.1. Qalabka Guriga Dhaxdiisa Laga Hello Ee La Wada Isticmaalo

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Liis gareeya allaabada guryihiina iyo agagaaradiina laga hello ee si wada jir ah loogu wada adeegto.

⇨ Ardeydu iyaga oo koox-koox u shaqaynaya su'aasha ha ka wada hadlaan hana ka shaqeeyaan.

***Faah-faahin***

- U sharax macnaha allaabada si wadaag ah loogu wada adeegto.

Allaabada si guud loogu wada adeegto waxaa weeyaan qalabka ama Allaabada qof kali ah uuna isticmaalin laakiin dadka agagaarka ku wada nool ay wada isticmaalaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

***Su'aasha laga Dhaqaaqayo***

- Ardeydu iyaga oo sidoodi hore koox-koox ugu wada shaqaynaya allaabada guriga dhaxdiisa laga hello ee sida guud loogu adeegto waxaa ay yihiin iyo siyaabaha loo daryeelayo ha ka wada hadlaan jawaabahoodana fasalka ha u soo bandhigaan.

### 5.3.2. Allaabta Dugsiga Dhaxiisa Laga Hello Ee Sida Guud Loogu Wada Adeegto (1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Liis gareeya qalabka dugsiga dhaxdiisa laga hello si guud loo wada isticmaalo.
- Liis gareeya qalabka laga hello guryihiina iyo agagaaradiina ee si guud loo wada isticmaalo.

***Faah-faahin***

- Adiga oo xoojinaya jawaabaha ardeyda allaabada si guud loogu wada adeegto waxaa ay yihiin u liis garee.

Allaabada dugsiga laga hello ee sida guud loogu wada adeegto.,

Qalabka dugsiga laga hello ee sida guud loogu wada isticmaalo waa allaabada dugsigu leeyahay ee ardeyda, barayaasha iyo shaqaalaha hada jooga iyo kuwa mustaqbalka joogj doona ay wada isticmaali doonaan weeyaan. Tusaale fasalada dhaxdooda allaabada laga hello sida kuraasida, miisaska, sabbuuradaha, qalabka waxbarashada ee ardeyda sida buugta, jaantuusyada darbiyada korkooda la sudhay, sawirada–iwm allaabta dayrku dugsiga dhaxdiisa laga hello ee kala duwan, qasabadaha biyaha, goobaha iyo qalabka ciyaaraha, suuliyaasha–iwm.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ardeydu iyaga oo koox u wada shaqaynaya layliska 4aad allaabada dugsiga laga hello siyaabaha loo daryeeli karo ha ka wada hadlaan. Adiga oo u kuurgalaya wada hadalka taageerada ay u baahan yihiin sii kooxaha sida waaagsan uga shaqeeyey ardeyda fasalka ha u soo badhigaan.

***Gabagabada***

- Adiga oo sii xoojinaya jawaabaha ardeyda dugsiga iyo guriga allaabada laga hello ee sida guud loo wada isticmaalo sida loo daryeeli karo si kooban ugu sharax kadibna u soo gunnaanad.

Siyaabo loo Daryeeli kara Allaabada sida guud loo wada Isticmaalo.

Guud ahaan allaabada sida guud loogu wada adeegto iyaga oo aan xumaanin islamarkaana aan uskagaysanin in aynu ku adeegano waxaa loo baahan yahay in si taxadar loo daryeelo loona hayo:

*Tusaale*

- Kuraasida iyo miisaska in la jajabiyo ama la xado, la jiid-jiido oo laga digtoonaado.
- Fasalada waxbarashada gidaarada in la uskageeyo, wax lagu qor-qora muuqaal koodana la xumeeyo in laga digtoonaando.
- Kuraasta iyo miisaska in laga bood-boodo, la duljoogsado ma dabboona.
- Fasalada nadaafadooda in la illaaliyo ayaa loo baahan yahay.
- Dugsiga, dhaxdiisa allaabada isboortiga iyo ciyaaraha kala duwan in sida loogu talagalay si ka duwan loo isticmaalo islamarkaana la uskageeyo, la jajabiyo lana xummeeyo looma baahna.
- Qasabadaha biyaha in si habboon loo furo loona xidho ayaa loo baahanyahay.
- Suuliyada in si habboon loo isticmaalo nadaafadooda lala illaaliyo ayaa loo baahan yahay.

*Hawsha (shaqo guri-koox-koox)*

- Ardeydu iyaga oo sida ay rabbaan kooxo u xulanaya saddexda su'aalood ee layliska 5aad in ayka shaqeeyaan soona dhiibaan oo loo sheego kadibna loo saxo. Kooxaha sida wanaagsan ugu shaqeeyeyna fasalka ha u soo bandhigaan.

## 5.4. SABBOOLNIMADA IYO DIB U DHACNIMADA OO LAGA BAXO (2-XIISADOOD)

*Qalabka tix-raaca*

- Sawiro, boostaro–iwm muujinayay dad gaajo iyo nafaqo daro ka muuqato.

### 5.4.1. Sabboolnimada iyo Dib u dhacnimada Waxyaabaha lagu Garto (1-Xiisad)

*Hordhaca*

*Gabayada bulshada iyo su'aasha hordhaca*

Ilmow cunto! Cunto! Hooyo cunt ku siisa ma jirto ma jirto!

Abaartiba korodhay wax la cuno oo laga dhergo ma jirto!

- Gabaygu halisnimada abaarta sida uu u qeexayo ka wada hadla.
- Inta waxaa dheer dalkeena Itoobiya saboolnimada iyo dib u dhacnimada dalalka ku caan baxay mid ka mid ah weeyaan fikrada leh ma taageersan tihiin? Jawaabtiinu ma taageersanin hadi uu yahay sharaxa sababtu waxaa ay tahay.

*Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)*

- Ardeydu koox-koox inta ay isu qaybiyaan qodobada layliska 6aad ee soo socda ha ka wada hadlaan:

1. Qoysasku carruurtooda in ay si fiican u cuntaysiiyaan, u labisaan, qalabka waxbarasho ee ay u baahan yihiin in ay gadaan, marka ay xannuunsadaan oo ay daweeyaan lacag ku filan oo dakhli ah in ay leeyihiin iyo in ayna lahayn qofba mar in uu kooxdiisa uga waramo oo lagu dhiiri galiyo. Kadib xubnaha kooxaha kuwa leh wax ku filan oo ay isu maamulaan iyo kuwa aan lahayn ha duwaangaliyaan.
2. kiliniga ama xarunta caafimaad dugisga,–iwm in ay xaafadahooda jiraan iyo in ayna jirin iyada oo xubnaha kooxaha la weydiinayo. Koox walba ha liis garayso xarumaha ama macadyadan bulsho inta ka jirta xaafadaha iyo inta aan ka jirin.

- Natiijada ka soo baxda wada hadalka koox walba marka ha soo bandhigaan.
- Marka koox.
- walba ay soo bandhigaan islamarkaana dhammaystiraan Qoysku carruurtiisu cuntada ay u baahan yihiin ama ay rabbaan in ay siiyaan, dharka ay u baahan yihiin in ay u gadaan, qalabka waxbarasho ee ay u baahan yihiin in ay u gaddaan, marka ay xannuunsadaan dakhli ama lacag ay ku daaweeyaan hadi ayna haysan. Bulshadu

xarumo caafimaad hadi ayna xaafadaha dhaxdoosa ka jirin, dugsi iyo waxyaabo kale oo muhiim ah ama macadyo bulsho hadi ayna lahayn iyaanan odhan karayn waxyaabahan waxay astaama ama caddaymo u yihiin sabboolnimada iyo dib u dhacnimo? su'aasha leh inta ay soo jeediyaan wada hadal guud fasalku ha sammeeyo. Marka aad wada haddalka hogaaminaysid ku dadaal in aad ardeyda ku dhiiri galisid in ay aqballaan islamarkaana aminaan sabboolnimada iyo dib u dhacnimada dalkooda.

***Faah-faahin***

- Si koobaan ugu sharax waxyaabaha saboolnimada iyo dib u dhacnimada lagu caddayn karo astaamaha sabboolnimada iyo dib u dhacnimada lagu garto.
- Cuntada ama quutul-daruuriga oo la heli kari waayo.

⇨ Muwaadiniin tiradoodu milyano ka badan tahay oo dulsar ku ah ama ku xidhan caawimaadaha dibadaha laga hello.

⇨ Hababka casriga ah ee wax loo beerto ama beeraha loo fasho oo aan ballaadhanin iyo qalabka casriga ah ee beeraha oo dalkeena aan laga isticmaalin mar ka laga reebo kuwa dibada laga keeno.

- Barnaamijyo horrumarineed oo heer sare ah in la fuliyo oo la awoodi waayen.

⇨ Illaa iyo hada dalkeenu isaga oo dalalka dibada taageerooyinka iyo dayn aan ka helin in ay barnaamijyo horrumarineed oo heer sare ah awood lagu fuliyo la helli kari waayey.

- Warshadaha oo aan shaqayn karayn haddi ayna allaabada caydhiin ka helin aa ka soo gadanin wadanada dibada.

⇨ Warshadaha badankoodu allaabada dayactirka ahna marka lagu daro si ay wax u soo saaraan qalabka ama allaabada caydhiin ee ay u baahan yihiin inteeda waxay kala soo degaan dalalka dibada. Marka ay allaabadaasi ka dhammaato illaa iyo inta ay u imanayso allaabada ay dirteen ama dalbadeen waxaa ku qasban yihiin in ay si xidhnaadaan.

***Hawsha (shaqo guri-koox-koox)***

- Labada su'aalood ee layliska 7aad hoostiisa ku xusan koox-koox guryaha ha kaga soo shaqeeyaan kadibna koox walba mar ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan jawaabahooda.

### 5.4.2. Tallaabooyinka Xalka U Ah In Laga Baxo Sabboolnimada Iyo Dib U Dhacnimada (1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Liis gareeya tallaabooyinka aad is-leedihiin xalbay u noqonayaan tir-tirida sabboolnimada iyo dib u dhacnimada.

Iyaga oo koox-koox u wada shaqaynaya ha ka wada hadlaan wax yaabaha lagu tir-tiri karo saboolnimada iyo dib u dhacnimada waxaa ay yihiin iyaga oo ku salaynaya fahamki ay ka helleen astaamaha lagu garto sabboolnimada iyo dib u dhacnimada.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn faah-faahin kooban ka sii waxaa ay yihiin waxyaabaha ugu muhiimsan ee xal u noqon kara tir-tirida saboolnimada iyo dib u dhacnimada.

***Waxyaabaha xal u noqon kara tirtirida saboolnimada iyo dib u dhacnimada***

1. Nidaam siyaasadeed oo gacan ka gaysan kara tirtirida saboonimada iyo dib u dhacnimada iyo istraatijiyado ku habboon oo la dajiyo.
2. In dadaal dheeri ah loo galo sidii sabboolnimada iyo dib u dhacnimada la tirtiro.

3. In la sugo barnaamijyo horrumarineed oo deg-deg ah.
4. In si is-xilqaan iyo hawl karnimo ku dheehan tahay loo shaqeeyo adiga oo kolba shaqada aad haysato mudnaanta siinaya in aad adaal u gasho sidii aad isu-filaansho u gaadhi lahayd.

*Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)*

Iyaga oo kali-jkali ah layslika 8aad buugooda ha kaga shaqeeyaan kadibna u sax.

### 5.4.3. Adeega Isx-Xilqaanka Gaarka Ah

*Hordhaca*

*Su'aalaha Hordhaca*

- Adeega is-xilqaanku macnihiisu waa maxay?
- Dadka is-xilqaanka ku shaqeeya shakhsiyaad hadi uu yahay iyo ururada agagaaradiina ka jira hawlaha ay fuliyaan maxay yihiin?

⇨ Su'aalaha Hordhaca ardeydu jawabahooda afka ha ka sheegaan.

*Hawsha (shaqo gur-koox-koox)*

- "Hawlaha is-xilqanka lagu fuliyo" qodobka leh taariikhda ku hoos xusan koox-koox ha u akhriyaan layliska 9aad ha ka soo shaqeeyaan kadibna kooxba mar jawaabahooda fasalka ha u soo jeediyaan.

*Faah-faahin*

- Macnaha is-xilqaanka iyo adeegyada guryaha, fasalka iyo dugsiga dhaxdiisa laga fuliyo faah-faahin kooban uga bixi.

*Macnaha Is-xilqaanka*

Macnaha Is-xilqaanka qoraalka ku saabsan ee buuga ku qoran ayaa ku filan sida daraadeed ha isticmaalaan.

## 5.5. MUWAADINIMO ( I-XIISAD)

*Qalabka Waxbarasho ee la tix-raacayo*

### 5.5.1. Macnaha Muwaadinimada

*Hordhaca*

*Su'aasha hordhaca*

- Erayga muwaadinimo hada ka hor maqasheen? Maxaad u malaynaysiin in uu yahay?

*Hawsha (shaqo-fasal-kali-kali)*

- Ardeydu su'aasha hordhaca ah kali-kali buugtooda ha kaga shaqeeyaan layliska 10aad kadibna u sax jawaabahooda.

*Faah-faahin*

- Macnaha muwaadinimo sharaxaad kooban uga bixi ardeyda.

*Macnaha Muwaadinimada*

Muwaadinimadu waxaa lagu macneeya qofka labadiisa waalid ay dalka u dhasheen ama iyada oo beel iyo diin loo fiirinin aad xubin ka noqotid bulsho hal dal ku wada nool.

Xubin sharci ah marka la leeyahayna sharciga dawlada dalka maamusha ay soo saartay iyo muwaadinimada xuquuqda iyo waajibaadka lagu hello cida leh weeyaan.

Qofka Itoobiya u dhashay waajibaadka muwaadinimo ee laga sugayo in uu guto adbay u badan yihiin. Kuwa ugu waa weyn waxaa kamid ah kuwan soo socda:

- In uu amino ugu saraynta sharciga islamarkaana dhinaciisa kaalin muhiim ah ka qaato dhaqan galintiisa. Ugu saraynta sharciga in uu ix-tiraama dadka kalana ku booriyo in ay ixtiraamaan waa waajibaad qof kasta oo muwaadin ah saran.
- In uu si buuxda isu-hortaago fal ama dhacdo kasta oo caddaalad-daro ah oo

musuq-maasuq iyo anshax xumo ku salaysan oo carqalad saraynta sharciga goob kasata iyo xili kasta oo uu la kulmo.

- Taallaabo kasta oo sabab u noqon karta in si kala duwan xuquuqaha loogu xadgudbo bulshada dhaxdeedana kala qaybsanaan lagaga abuuro in ayna jirin in la amino dhaqan galinteedana si fir-fircoon looga qayb galo.
- In qof kasta leeyahay xuquuq uu diinta uu rabo ku raaci karo iyo Diinta uu raacsan yahayna in uu ku faraxsan yahay amino islamarkaana uu aqbalo laakiin uuna ku dhaqaaqin wax kasta oo kala qaybin iyo jaahwareer keeni kara.
- Qof kasta oo muwaadin ah kolba inta ay awoodiisu u fasaxdo in uu aqoontiisa, xoogiisa iyo lacagtiisa dalka iyo bulshada hawl faa'iido u leh in uu fuliyo ayaa laga sugaya. Hawlaha heer qaranagoob kasta iyo meel kasta si fir-fircoon uga qayb qaato.
- Qof kasta oomuwaadin ah waxaa laga sugaya in uu noqdo qof hawl karnimo iyo Anshax wanaagsan leh islamarkaana dalkiisa iyo bulshadiisa ugu faa'iideeyo.

## 5.6. CALANKA QARANKA (1-XIISAD)

Qalabka Waxbarasho ee la tix-raacayo:

- Calanka qaranka

### 5.6.1. Macnaha Iyo Muhiimada Calanka Qaranka Iyo Heesaha Bulshada Heer Qaran

***Hordhaca***

***Sawiirka 5.3. Su'aasha hordhaca***

- Taswiirtu fariinta ay gudbinayso waa maxay?

Si aad u hubiso aqoonta ay ardeydu u leedahay macnaha calanka iyo heesta calanka ee heer qaran su'aalahan soo socda u soo bandhig.

- Calanka qaranka iyada oo la leeyahay ma maqasheen? Haseyeeshe waxaa uu yahay miyaad garanaysiin?
- Heesta calanka qaranka ma maqasheen? Iyaduna waxaa ay tahay ma garanaysiin? Iyaduna waxaa ay tahay ma garanaysiin?

Ardeydu sawirka 5.3 ha fiirsadaan kadibna waxaa ay ku saabsan tahay afka ha ka shageen.

***Faah-faahin***

- U faah-faahi macnaha calanka iyo heesta calanka qaranku waxaa ay yihiin.

***Callaanka Qaranka***

Calanku waa astaanta qaranimo ee hal dal leeyahay ama lagu garto. Calanka uu dal leeyahay wuxuu leeyahay midabo kala duwan. Midabyada callaanku leeyahayna waxay leeyihiin macno ama ujeeddooyin kala duwan. Xiliyada dhibaatooyin heer qaran ah ay dhacaan si muwaadininta dareenkooda qaranimo loo kiciyo loogu dhiirigaliyo in ay isu-ujeedo noqdaan faa'iido aad u waxtar badan ayuu calanku leeyahay. Tusaale xuduudka dalka marka lagu soo xadgudbo isu-xidhka muwaadiniinta si loo sugo loona difaaco dalka kaalin aad u weyn ayuu calanku ka ciyaara. Ciyaaraha caalamiga ah ee loo yaqaano oo loombikada iyo kuwa kale oo la mid ah ee sinabadgalyo leh loogu tartamo ciyaar yahanada ku tartamaya iyo bulshada dareenkooda qaranimo si loo kiciyo oo loo adeegsado ka sokow in astaanta dalka ama magaca dalka loo kobciyo ayuu kaalin heer sare ah ka qaata.

Guud ahaan calanka qaranku waxaa loo adeegsada in lagu qeexo qaramada, qoomiyadaha iyo bulshooyinka sinnaantooda iyo in ay simidaysan u wada noolaadaan iyo rejada wanaagsan ee ay qabaan.

Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya qaybtiisa 3 tirsiga koobaad sida uu dhigayo callaanka qaranka itoobiya wuxuu

ka kooban yahay midabka buluuga (midabka cirka) oo uu xaga sare ku leeyahay, dhaxda oo uu midab hurdi ah ku leeyahay iyo dhinaca hoose oo mid casaan ah ku leeyahay iyo waliba badhtanka oo uu xidig ku leeyahay.

***Hawsha (shaqo guri-koox-koox)***

- Ardeydu iyaga oo koox-koox ah layliska 11aad ha ka soo shaqeeyaan kadibna fasalka ha u soo jeediyaan.
- Sharaxaad kooban ka sii macnaha iyo faa'iidada callanka qaranka iyo waliba sida loo daryeelo.

***Gabagabada Cutubka***

- Bare! Marka hore sii ardeyda fursad ay kaga waramaan waxyaabihi ay cutubka ka soo barteen oo kooban.
- Ugu dambayna adigu si kooban ugu soo gunnaanad.

## SU'AALAHA GABAGABADA CUTUBKA

**I. Weedhahan soo socda tii sax ah ku qor Run tii khaldana ku qor Been.**

1. Run 2. Run 3. Been 4. Been
5. Been 6. Run.

**II. Goobaha bannaan ee soo socda erayada ku habboon ku buuxi.**

1. Qaranimo 2. Waxtar 3. Callan.

# CUTUBKA 6: MASUULIYADA

## (12-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubka kadib ardeydu waxay awoodi-doonaan in ay:

- Qeexaan macnaha mas'uuliyada.
- Gartaan noocyada kala duwan ee mas'uuliyada.
- Uga soo baxaan mas'uuliyadahooda si daacadnimo, xaq soornimo–iwm ku dheehan tahay.

| No. | Casharka | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Allaabo kale oo muhiim ah |
|---|---|---|---|
| 1. | Macnaha qaadashada mas'uuliyada waajibaka ah.es | • Qeexaan macnaha mas'uuliyada.<br>• Sharaxaan qaadashada mas'uuliyada waajibka ku ah. | • Boostaro, taswiiro –iwm muujinaya ardey waxbarashadooda la socota ama hawlo kala duwan fulinaysa. |
| 2. | Macnaha ballan qaadka iyo muhiimada uu leeyahay. | • Qeexaan macnaha ballan qaadka.<br>• Sharaxaan in looga baahan yahay in ay fuliyaan ballanti ay u qaadeen qoyska io dugsiga. | • Boostaro, taswiir –iwm muujinaya dad ballanti ay qaadeen gudanaya. |
| 3. | Macnaha aminimada iyo xaq soornimada. | • Sharaxaan macnaha aminimada iyo xaq soornimada.<br>• U hawl gallan hawlaha u dhigma awoodooda iyaga oo muujinaya aminimo iyo xaq soornimada. | • Sawiro muujinaya mwaadiniin hawlo kala duwan fulinaysa si ay uga soo baxaan mas'uuliyadahooda. |
| 4. | Waxtarka ay leedahay mas'uuliyada oo laga soo baxo. | • Qeexaan muhiimada ay leedahay in mas'uuliyadaha heerarka kala duwan leh la guto.<br>• Gutaan mas'uuliyadaha heerarka kala duwan leh ee saaran. | • Sawiro muujinaya muwaadiniinta oo hawlo kala duwan fulinaya si ay uga soo baxaan mas'uuliyadahooda. |
| 5. | Macnaha khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxan dhaqameedka maguuranka ah. | • Qeexaan macnaha khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxan dhaqameedka taariikhiga ah .<br>• Sharaxaan siyaabaha loo daryeeli karo khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxan dhaqameedka taariikhiga ah. | • Boostaro muujinaya khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxanada taariikhiga ah. |
| 6. | Cudurka HIV/AIDS-ka | • Qeexan macnaha cudurka HIV/AIDS-ku wuxuu yahay.<br>• Liis gareeyaan hababka cudurka la isugu. | • Pictorial representation that shows children affected by the disease. |

## 6.1. MACNAHA WAAJIBNIMADA 6.1QAADASHADA (2-XIISADOOD) (AQBALIDA) MAS'UULIYADA

***Qalabka Waxbarasho ee la tixraacayo***

- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya ardey wax baranaysa.
- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya ardeyda oo hawlo kala duwan fulinaysa.

***Hordhaca***

***Sawirka 6.1 iyo Su'aalaha hordhaca***

- Hawlaha ardeyda fulinayso ee sawirka kamuuqda maxay ku saabsan yihiin?

Qodobka hoostiisa sawirka 6.1 ee ku xusan inta ay akhriyaan labada su 'aalood ee ku xidhiidhsan ee hordhaca Afka ha kaga jawaabaan

Macnaha Mas'uuliyada iyo Qaadashada ama aqbalida Mas'uuliyada Waajibka kugu ah.

Erayga mas'uuliyada wuxuu tilmaamaya haw lama arrin in ay u fulino waajibaadka inaga saran iyo dammaanad qaadka aynu dammaanad qaadnay in aynu xilka ina saran sidiisa uga soo baxno. Tusaale hal macalin "aniga mas'uuliyadaydu in aan ardeyda si fiican wax u baro weeyaan" hadi ama marka uu yidhaahdo barahaasi ardeyda in uu si fiican wax u baro ayuu qoysaska, dalka iyo dawladaba u ballaanqaaday. Sida daraadeed, waxaa waajibku ah in uu ardeyda si fiican wax u baro.

Mas'uuliyada oo la qaato ama la aqbalo waxaa weeyaan shaqada oo sida ugu habboon loo qaato wax shuruud ahna aan lagu xidhin islamarkaana si buuxda loola wareego. Waxaa kale oo loo baahan yahay in sida ugu habboon loo fuliyo. Hadi kalese wixii dhib ka yimmaada waxaa lagala xiisaabtama isla shakhsiga la wareegay.

Tusaale, ardeyga loo doortay in uu noqdo horjooge wuxuu qaaday mas'uuliyad ku saabsan in uu inti awoodiisa ah nidaamka fasalka iyo Anshaxaba illaaliyo. Hadi uu sida yeeli waayo wixii dhib ka yimmaada isaga mas'uul ka noqonaya, lagalana xisaabtami doona. Ardeydana waxaa waajib ku ah in ay nidaamka iyo Anshaxa dugsiga iyo fasaladaba illaaliyaan.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Sharaxaada casharka intay dhagaystan 4 su'aalood ee layliska 1aad hoostiisa ku xusan ka shaqeeyaan.

## 6.2. MACNAHA IYO MUHIIMADA BALLANQAADKA (1-XIISAD)

***Qalabka Tix-raaca***

- Taswiiro boostaro–iwm muujinaya dad fulinaya ballan qaad ay sammeeyeen.

***Hordhaca***

***Gabayo iyo su'aalo hordhac ah***

Wixii uu sheegay ka midho dhaliye waa qof dhab ah oo balanka fuliya.

- Idinka oo ku salaynaya odhaahyada korka ku xusan macnaha ballan qaadku waa maxay?
- Ballan qaadka maxaa lagu qeexa?
- Qofka ballanta fuliya maxaa loogu yeedha?

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn si kooban ugu faah-faahi macnaha iyo faa'iidada ballan qaadka kadibna u soo gudnnaanad.

**Macnaha iyo Faa'iidada Ballan Qaadka**

Ballaan qaad waxaa la yidhaahda qof kasta hawsha uu qabanayo, waxaa uu ka shaqaynayo–iwm in uu naftiisa, bulshada, Dalka–iwm u qabanayo waxyaabaha lagu xaqiijinayo ama warbixinta lagu caddaynayo weeyaan. Tusaale, hal ardey hadi uu ballan qaado in uu maanta wixii ka dambeeya barayaashu marka ay wax barayaan si edeb leh ayaa u dhagaysanaya, qorshe aan casharadayda ku xafido ayaan diyaarsanaya kadibna waan

akhrisanaya, ardeyda wanaagsan mid kamid ah ayaan noqonaya–iwm uu naftiisa ugu sheekeeyo naftiisa ayuu ballan la galay baan odhannayna. Hadaladan hadii uu barayaashiisa u sheeko barayaashu ballan galay ayey macno ahaan ka dhigan tahay.

Siballan qaadi loo xaqijiyo shaqo muhiim ah in aan fulinayno marka aynu ku ballano waxaa caddayn u noqonaysa fulinta hawsha aan ku ballannay in aynu qabanayno. Hadi aynu fulin weyno shaqadi aan ku ballanay waxaa na qabanaya ballanti aynu ka soo bixi weeynay. Sida daraadeed in aynu hawshi aan ballan qaadnay fulino iyo in aynu fulinin si loo hubiyo ballan qaad ayaa kaalin muhiim ah ka qaadanaya.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Qoraalka ku xiga ee ku saabsan macnaha ballan qaadka qof-qof ha u akhriyaan kadibna saddexda su'aalood ee layliska 2aad ka tirsan buugtoda ha kaga shaqeeyaan. Ardeyda si wanaagsan uga jawaabtay fasalka ha u sheegaan jawaabahooda.

## 6.3. DAMMAANAD QAADIDA AMINIMADA IYO XAQ SOORNIMADA (1-XIISAD)

***Qalabka la Tix-raaco***

- Ardey qalin qori dhulka ka qaadaya oo baraha u dhiibaya sawir muujinaya.

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Macnaha aminimo iyo xaqsoornimo waa maxay?
- Aminimada iyo xaqsoornimada qoysaskooda iyo dugsiga hawlaha ay ka fuliyaan waxyaabaha lagu caddayn karo inta ardeyda la weydiiyo in ay intii hore in kabadan uga qayb qaqatan ayaad ku dhiiri galin karta.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Qoraalka ku xusan ha akhriyaan saddexda su'aalood ee layliska 3aadka tirsan koox-koox ha uga wada hadlaan. Kooxo dhawr ah jawaabahooda fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Macnaha aminimada iyo xaqsoornimada si kooban ugu sharax adiga oo tusaale isticmaalaya.

***Macnaha Aminimada iyo Xaqsoornimo***

Guryahooda iyo dugsiyadooda hawlaha ay ka fuliyaan iyaga oo9 wax shuruud ah ama cudur daar ah aan sheeganin in ay aqballaan in sida ugu wanaagsan loo dhaqan galiyo astaan ama dabeecad lagu xaqiijiyo weeyaan.

Aminnimo waa astaan lagu qeexo ama lagu hubiyo ballanta naftaada, bulshada ama cid kale aad u qaaday in aad si aan weecweecad lahayn u fulisid. Amarka Aabo iyo Hooyo in si mas'uulnimo ku dheehan tahay loo dhaqan galiyo iyo in dugsiga nidaamkiisa adiga oo ku dhaqmaya barayaasha iyo dadka kaleba in aad ixtiraantid islamarkaana allaabada dugsiga in aad sida ugu habboon u illaalisid xaalad lagu xaqiijinayo weeyaan.

Xaqsoornimada ama daacadnimo waxaa weeyaan in qof runta sheega,iska illaaliya beenta iyo musuq-maasuqa aad noqotid. Arrimahan oo dhan waxay kaalin muhiim ah ka qaadanayaan horrumarinta dalkeena iyo nolosheena. Sida daraadeed qof kasta oo muwaadin ah looga baahan yahay in uu yeesho dabeecadhan aynu korka ku soo sheegnay si horrumar dhinac walba leh loo gaadho.

## 6.4. MACNAHA IYO MUHIIMADA AY LEEDAHAY IN MAS'UULIYADA LOOGA (2-XIISADOOD) BAXO AMA LOO GUTO

***Qalabka la tix-raacayo***

- Boostaro, taswiro–iwm muujinaya ardey waxbarasho ku jirta.

- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya ardey hawlo kala duwan ku hawlan.

***Hordhaca***

***Sawirka 6.2 iyo Su'aalaha Hordhaca***

- Deegaanka hadi aynu daryeeli weyno maxay dhibaato keeni karta?
- Ka qaybgalka lagu xalinayo dhibaatooyinka deegaanka maxaa la yidhaahda?
- Si dhibaatooyinka deegaanadooda xal loogu hello dadka ka qayb qaata maxaa loogu yeedha?

Sawirka 6.2 inta ay fiirsadaan su'aalaha korka ku xusan ee hordhaca Afka ha kaga jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Dugsiga iftin" qodobka leh hoostiisa qoraalka ku xusan ha akhriyaan saddexda su'aalood ee layliska 4aadka tirsan koox-koox ha uga wada hadlaan. Kooxo dhawr ah jawaabahooda fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn macnaha iyo muhiimada ay leedahay gudashada waajibaadka ama mas'uuliyada qosyka, dugsiga bulshada –iwm dhaxdooda u faah-faahi adiga oo mas'uuliyadahooda tusaale ahaan u adeegsanaya.

**Macnaha iyo Muhiimada ay leedahay Guddashada Mas'uuliyadu**

Qof kasta in uu qoyska, bulshada dhammaanteed iyo dalka u shaqeeyo ayaa waajib ku ah. Waajibaadkan oo si buuxda looga soo baxo ayaa mas'uuliyad la yidhaahda. Mas'uuliyada oo laga soo baxo macnaheedu waxaa weeye qof kasta in uu u noolaado kolba awoodiisu sida ay u saamaxdo islamarkaana kolba awoodiisu sida ay tahay in uu qoyska, qaraabada iyo dalkaba gu faa'iideeyo ayey tilmaamaysa.

(B) Mas'uuliyadaha ardeydu qoyska dhaxdiisa ku leedahay iyo muhiimada ay leedahay gudashada mas'uuliyadahan

Mas'uuliyadaha ugu waa weyn ee ardeydu qoyska dhaxdiisa ku leedahay waxaa ka mid ah:

- Kolba inti awoodoodu tahay hawlaha guryaha dhaxdoosa laga fulinayo in ay si firfircoon uga qayb qaataan.
- Allaabada ka dhaxaysa qoyska hadi ay tahay iyo kuwa gaar loo leeyahay hadi ay tahayba in sida ugu habboon ay u illaaliyaan.
- Waxbarashadooda (casharadooda)oo sida ugu habboon u akhristaan.
- Xubnaha qoyska oo si is-jacayl iyo is-ixtiraam ku dheehan tahay si nabad galyo ah loola noolaado.
- Amarka Hooyada iyo Aabaha oo si ixtiraam leh l.oo aqbalo loona fuliyo–iwm.

Hawlahan iyo kuwa kale oo la mid ah oo sida ugu habboon looga soo baxa ayaa aad muhiim u ah sababta oo ah gudashada mas'uuliyadahani waxay kaalin muhiim ah ka qaadanaya horrumarka nolosha qoyska iyo dugsiyada islamarkaana waxaa suurta galaysa in si nabad galyo iyo is-ixtiraam leh u wada noolaadaan.

(T) Mas'uuliyadaha ardeydu dugsiga dhaxdiisa ku leeyihiin iyo muhiimada ay leedahay in ay gutaan mas'uuliyadahan. Mas'uuliyadaha ugu waa weyn ee ardeydu ku leedahay dugsiyada dhaxdoosa waxaa ka mid ah:

- Nidaamka iyo xeerka dugsiga oo ay qadariyaan. In ay ka fogaadaan arrin kasta oo lidi ku noqon kara qaynuunka dugsiga.
- Waxbarashada fasalka dhaxdiisa lagu bixinayo oo ay si wanaagsan u la socdaan islamarkaana fuliyaan hawlaha fasalka dhaxdiisa iyo guryaha loogu diro.
- Barayaashooda, maamulayaasha dugsiyadooda iyo dhammaan shaqaalaha kale oo dhan in ay ixtiraamaan.

- Ururada kala duwan oo ay si firfircoon xubno uga noqdaan, fasaladooda iyo gudaha dugsiyadooda oo nadaafadooda illaaliyaan si fir-fircoona uga qayb qaataan.
- Allaabada fasaladooda iyo dugsiyadooda oo ay sida ugu habboon u daryeelaan–iwm.

(J) Mas'uuliyadaha ardeyda ee la xidhiidha xaafadahooda iyo kuwa kale xidhiidhka ay la leeyihiin iyo muhiimada ay leedahay gudashada mas'uuliyadahan.

Mas'uuliyadahan kuwa ugu waa weyn waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Dadka xaafada dhaxdeeda ku nool dhammaantood oo sida ugu habboon ixtiraam loo siiyo.
- Hawlaha xaafada lagu nadiifinayo oo sida ugu habboon looga qayb qaato.
- Allaabada bulshada xaafada ka dhaxaysa ee lagu adeegto oo sida ugu habboon loo daryeelo loona illaaliyo.
- Dadka isu faca ay yihiin ee xaafada ku nool oo si nabadgalyo iyo is-jacayl ku dheehan yahay loola noolaado.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Sharaxaada ku xigta layliska 4aad inta ay akhriyaan saddexda su'aalood ee layliska 5aad ka tirsan kali-kali buugtooda ha ugaga shaqeeyaan kadibna u sax.

## 6.5. MACNAHA KHAYRAADKA DABEECIGA AH GOOBAHA TAARIIKHIGA AH

***Qalabka Tix-raaca***

- Boostaro muujinaya khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxanada taariikhiga ah.

***Hordhaca***

***Sawirka 6.3, 6.4 iyo Su'aalaha hordhaca ah***

- Biya-shubka Dis-Abay muxuu caan ku yahay ama muxuu ku caan baxay?
- Idinka oo sawirada fiirinaya kuwa khayraadka dabeeciga ah iyo kuwa farshaxanada taariikhiga ah kala saara.

Taswiiraha qodobkan hoostiisa ku xusan (sawirka 6.3 iyo 6.4) inta ay fiirsadaan su'aalaha taswiraha ku xiga ee hordhaca afka ha kaga jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Abaal-marinta Zemzem" qodobka leh hoostiisa waraysiga ku qoran ee ku saabsan Aabaha iyo Ilmihiisa inta ay akhristaan saddexda su'aalood ee layliska 6aadka tirsan koox-koox ha uga wada hadlaan.

***Faah-faahinta***

U sharax in macnaha khayraadka dabeeciga ah iyo farshaxanada taariikhiga ah in la maalgaliyo Lana daryeelo ay tahay mas'uuliyad cid walba saaran lagana sugayo in uu ka soo baxo.

**Macnaha Khyraadka Dabeeciga ah iyo goobaha Taariikhiga**

Khayraadka dabeeciga ah waxaa weeye ama loo yaqaana allaabada Adamuhu uuna sammayn ee illaahay abbuuray islamarkaana si dabeeci ah dadku u hellaan. Tusaale wabiyada, laagaha/Haraha, xayawaanka duurka ku nool, iyo waliba kayaha, buuraha–iwm Allaabada farshaxanka ah ee taariikhiga ah waxaa ka mid ah dhamaan farshaxanada kala duwan ee taariikh ahaan ama asal ahaan adamuhu gacantiisa ku sammeeyo ee jiilba jiilka xiga uu ka dhaxlo ama u gudbiyo, waxyaaabahaasi waxay ku xidhan yihiin kolba ilbaxnimada Adamaha iyo qab nololeedka bulshadu sida uu yahay.

Tusaale. Waxyaabaha gacanta lagu qoray, sawirada ama taswiiraha, waxyaabaha xasuus ahaanta loogu, talagalay iyo dhammaan allaabooyinka kala duwan ee taariikhiga ah sida allaabada geedaha ama dhirta laga qoro sida xeedhada, dhiisha, geebka, leebka iyo qaansada–iwm.

**Khayraadyada Dabeeciga oo la dhaqdo**

Khayraadyada dabeeciga ah oo laga shaqaysto ama la maal gashado waa arrin lagama maar-maan ah oo aad muhiim u ah. Iyada oo khayraadka dabeeciga ah aan la khasaarinayn in looga shaqaysto si bulshada faa'iido ugu jirto.

Farshaxanada taariikhiga oo la daryeelo waa arrin aad lagama maar-maan u ah dalka. Sida daraadeed sida muwaadiniinta kale ee dalka ardeyda wuxuu xil-weyni ka saaran yahay in ay illaaliyaan daryeelaan islamarkaana bartaan farshaxanada taariikhiga ah ee dalkoodu leeyahay.

***Hawsha (shaqo guri-koox-koox)***

- Sharaxaada layliska 6aad ku xigta shakhsi –shakhsi inta ay u akhriyaan 4 su'aalood ee layliska 7aad buugtooda ha kaga shaqeeyaan. Kadibna ha loo saxo.

## 6.6. CUDURKA EJ AYFII AYDHIS-KA (2-XIISADOOD)

***Qalabka Tix-raacayo***

- Sawir muujinaya carruur tag daraan oo rafaad ka muuqdo.

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Ej Ay fii Aydhis-ku waxaa uu yahay ma garanaysiin?waxaadka taqaainiin sheega.
- Ardeydu Ej Ay fii Aydhis-ka waxaa ay ka yaqaaniin in ay ka sheegaan ku macsuum.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Qodobka hoostiisa qoraalka ku xusan inta ay akhristaan labada su'aalood ee layliska 8aad ku xusan koox-koox ha uga wada hadlaan. Dhawr ka mid ah kooxaha sii fursad ay jawaabahooda ugu soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn faah-faahin kooban kasii ardey macnaha iyo siyaabaha la isugu gudbiyo iyo waliba waxyeelada uu carruurta u gaysto cudurka Aydhis-ka.

***HIV/AIDS-ku waa maxay?***

Luqada Ingiriisiga erayada Ej Ay fii Aydhis waxay u taagan yihiin akuwayridh; Imiyoon; Dhifisheensi; Sindhroom. Ilimaqabatayga (fayraska) dhaliya cudurka Aydhis-ka luqada ingiriiska waxaa loogu yeedha (HIV) ama Hu-iman Imiyonow Dhifisheensi fayrus ayaa loogu yeedha. Fayraskani wuxuu daciifiya dhiiga cad kadibna farsamada jidhku xannuuna isaga celiyo ayaa daciif noqota. Sida daraadeed waxaa jidhkeena ku dhacaya awood uu xannuunada faafa sida kaasarka oo kale isaga difaaco. Dadka xannuunku ku dhaco illaa heer dhimasho ayuu gaadhsiinaya.

Guud ahaan dadka cudurka Aydhiska ayaa ku dhaca marka la leeyahay waa marka arrimahan hoos ku xusan ay dhacaan.

(B) Iyada oo fayraska Ej, Ay fii uu sabab u yahay si isa soo taraysa ayuu awooda jidhku cudurada isaga difaaco ayuu burburiya.

(T) Awooda jidhku cudurada faafa isaga difaaco maadaama si isa soo taraysa u burburiyo waxaa si sahlan ugu dhacaya xannuuno isu ladhan ama cudurka kansarka loo yaqaano.

***Hawsha (shaqo-fasal-koox-koox)***

Iyaga oo koox-koox u wada shaqaynaya ha ka wada hadlaan siyaabaha cudurka Ej. Ay Fii Aydhisku la isugu gudbiyo. Kadibna kooxo dhawr ah jawaabahooda fasalba ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn faah-faahin kooban uga bixi siyaabaha ugu muhiimsan ee cudurka la isugu gudbiyo iyo waliba siyaabaha la isaga illaalin karo.

***Gabagabada Cutubka***

- Bare! Marka hore sii fursad ay ardeydu kaga waranto waxyaabihi ay ka faa'iidaysteen cutubka.
- Wixii ka dhiman adigu si kooban ugu sharax. Kadibna su'aalaha cutubka lagu soo gunaanaday ha ka shaqeeyaan.

# CUTUBKA 7: DHAQAN HAWL-KARNIMO

## (7-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan macnaha dhaqanka hawl karnimo.
- Gartaan xuquuqaha shaqo ee dastuuriga ah.
- Gartaan macnaha anshax wanaagsan ee aqoontu leedahay.
- Fahmaan sharafta shaqo iyo muhiimada dhaqanka hawl karnimo leeyahay.

| No. | Qodobada casharka | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Khayraadyo kale oo muhiim ah |
|---|---|---|---|
| 1. | Qodobada casharka | • Qeexaan muhiimada ay leedahay in shaqo la abuuro si loo noolaado iyaga oo tusaalooyin isticmaalaya.<br>• Sharaxaan in shaqadu ay sharaf tahay. | • Fiidiyo, filino, taswiiro iyo shaxano muujinaya dad shaqo haya. |
| 2. | In wax la cuno iyada oo aan la shaqayn | • Sharaxaan xaqa qof walba u leeyahay in uu ku shaqeeyo aqoonta uu takhasuuska u leeyahay shaqo la xidhiidha islamarkaana goobta uu ka shaqaynayo doorto. | • Pictorial representations that show people engaged in different activities. |
| 3. | Xuquuqda shaqo ee dastuuriga ah. | • Sharaxaan xaqa qof walba u leeyahay in uu ku shaqeeyo aqoonta uu takhasuuska u leeyahay shaqo la xidhiidha islamarkaana goobta uu ka shaqaynayo doorto. | |
| 4. | Macnaha Anshax cilmiga shaqo. | • Sharaxaan macnaha Anshaxa cilmiga shaqo. | • Sawiro muujinaya muwaadiniin shaqooyin waaxyo kala duwan leh ka shaqaynaya. |

### 7.1. SHAQO LA ABUURO (2-XIISADOOD)

***Qalabka Tix-raaca***

- Boostaro, footogiraafyo—iwm muujinaya dad shaqo ku hawlan.

#### 7.1.1. Macnaha Shaqo la Abbuuro waa maxay?

***Hordhaca***

***Sawirka 7.1 iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawirada korka ku xusan waxaa aad ka fahamteen qeexa.

- Noocyada hawlaha ka muuqda sawirka aqoonyahanada ku hawlan kuwa aad ka taqaanid fasalka u qeex.
- Sawirka 7.1 sida uu tilmaamayo su'aalaha hordhaca ee sawirada ku xiga Afka kaga jawaaba.

***Faah-faahin***

- Shaqo la abuuro waxaa ay tahay u sharax adiga oo tusaalooyin isticmaalaya.

**Macnaha shaqo-Abuurku waa maxay?**

Shaqo la abbuuro waxaa weeyaan halka shaqo dawladeed ama shirkad gaar ahaaneed ay ku shaqaalaysato islamarkaana aad mushaar aad ka heli lahayd inta aad ka kaaftoonto in aad shaqo gaar ahaaneed sammaysatid si aad naftaada iyo qoyskaaga u maamushis islamarkaana dadka kale fursado shaqo u abuurtid oo aad awood u heshid.Tusaale ganacsiyada yar-yar mid ka mid ah, shaqada geedka ama looxa, shaqooyinka kala duwan ee gacanta laga fuliyo–iwm shaqo inta aad abuuraan in aad isu-maamuli karaan ka dhaadhici.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

### 7.1.2. Xaaladaha Aasaasiga ah ee lagama Maar-maanka ah si aad shaqo aad ku Noolaatid aad u Abuuratid

***Hordhaca***

- Dadku shaqo noloshooda ay ku dabaraan si ay u abuurtaan maxay u baahan yihiin baad u malaynaysiin.
- Ardeydu jawaabo Afka ah ha kaga jawaabaan su'aasha korka ku xusan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Faadumo"qodobka leh hoostiisa taariikhda ku xusan inta ay akhriyaan layliska 3aad su'aalaha la socda koox-koox ha uga wada hadlaan.Inta uu wada hadalku socdana wixii taageerooyin ah ee ay u baahan yihiin sii.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Faah-faahinta layliska 3aad ku xiga inta ay akhriyaan layliska 4aad koox-koox ha uga shaqeeyaan.

Jawaabaha ay su'aalaha ka bixinayaan waa in ay ka koobnaadaan qodobadan soo socda:

1. Qof kasta shaqo uu naftiisa ku maamulo si uu u abuurto shuruudaha lagama maar-maanka ah ee looga baahan yahay in ay buuxiyaan waxaa ka mid ah in qofku marka hore la yimmaado is-xilqaan danayn iyo dadaal iyo in uu waliba shaqo kasta ixtiraamo.
2. Dhaqan hawl karnimo naftiisa iyo nolosha qoyskiisa in uu horrumar la taaban karo gaadhsiiyo islamarkaana sidii uu dalkiisa iyo bulshadiisa u kobcin lahaa ku dadaalo.
3. Shaqo kasta waa sharaf marka la leeyahay shaqo yar iyo shaqo weyni ma jirto weeyaan macnuhu.

***Gabagabada***

Inta aanad casharka soo gabagabaynin ka hors ii ardeyda fursad ay kaga waramaan wixii ay casharka ka faa'iidaysteen kadibna wixii ka dhiman u buuxi adiga oo u soo koobaya.

## 7.2. WAXAYNA SHAQAYSANIN (IYAGA OO AAN SHAQAYSANIN) (2-XIISADOOD)IN AY CUNNAAN

***Qalabka Tix-raaca***

- Boostaro, footogiraafyo—iwm muujinaya dad hawlo kala duwan fulinaya.

### 7.2.1. In ay wax Cunnaan iyaga oo aan shaqaysanin(1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- Carruurta marka ay dugsiyada ka soo laabtaan sahqooyin ay qabtaan hadi ay jiraan saaxiibadooda fasalka ha usheegaan.

- In wax la cuno iyada oo aan la shaqaysan in ay tahay wax aad u xun tusaalooyin qeexaya ku macsuun in ay sheegan.
- Ardeyda su'aalaha hordhaca ee korka ku xusan jawaabo Afka ah ha ka bixiyaan.

***Faah-faahin***

- Inay wax cunnaan iyaga oo shaqaysanin macna ahaan waxaa ay ka dhigan tahay sharaxaada buuga ku qoran faah-faahin uga bixi.

### 7.2.2. Iyaga oo aan shaqaysanin in ay wax Cunnaan Dhib aatooyinka ka dhasha

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Kolba sida awoodoodu tahay iyada oo lagu salaynayo shaqooyinka aad leedihiin wey jiraan ama way haystaan liis garee.

***Hawsha (Dood)***

- "Wax dhibaato ah ma leh in wax la cuno iyada oo aan la shaqaysan way fiican tahay iyo iyada oo aan la shaqaysan in wa la cuno waa arrin aad u xun" qodobka leh ama fikrada leh ha ka doodaan iyaga oo laba-labo u soo baxaya islamarkaana isku jawaabaya.
- Dhawr lammaane marka ay ka doodaan kadib waxyabaha ay labada qaybood soo jeediyeen iyada oo laga dhaqaaqayo ardeyda kale ee fasalka wada hadal kooban la yeelo-kadibna si kooban ugu soo gunnaanad dulucda casharka.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- "In wax la cuno iyada oo aan la shaqaysan" qodobka leh toostiisa faah-faahinta ku xusan inta ay akhriyaan saddexda su'aalood ee layliska 6aad uu wato buugtooda ha kaga shaqeeyaan kadibna u sax buugtooda.

### 7.2.3. Dul Saarnimada oo laga xishoodo

***Su'aasha Hordhaca***

- Dul saarnimadi ayuu nacay maxaa loo yidhaahda?
- Ardeydu su 'aasha hordhaca ah ee korka ku xusan Afka ha kaga jawaabaan.

***Faah-faahin***

- In ay muhiim tahay in dulsaarnimada laga baxo fahamsii.

**Dulsaarnimada oo laga baxo**

Dul saarnimada in laga digtoonaado ama lagu dadaalo in laga kaaftoomo waa arrin qof kasta lagama maar-maan u ah.Macnaha dulsaarnimadu waxaa weye caafimaad qab iyo awood (xoog )ay ku shaqaystaan ma laha wax shaqo ah ma qabtaan waxayna dul-saar ku yihiin islamarkaana quutaan cuno amah anti dad kale shaqaystay, ku daasha.

Dulsaarnimadu waxaa weeyaan iyada oo wax dadaal ah oo wax la quuto lagu shaqaysanayo aan la sammayn in cid kale hanti ama raashin dad kale u dhididay dulsaar lagu noqdo.Mida kale in si dhib yar xoolo cid kale dhaqatay lagu noolaado maadaama ayna ka duwanayn tuugnimo iyo boob waxaa lagama maar-maan ah sharafna ah in shaqo dulsaarnimada lagaga baxo la raadsado lana isku-filnaado.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Layliska 7aad sharaxaada ku xigta inta ay akhriyaan layliska 8aad buugtooda ha kaga shaqeeyaan kadibna u sax.

## 7.3. XUQUUQDA SHAQO EE DASTUURIGA AH (2-XIISADOOD)

***Qalabka Tix-raaca:***

- Booster, sawir–iwm muujinaya muwaadinin shaqooyin kala duwan qabanaya.

### 7.3.1. Qof kasta xaq uu u leeyahay in uu ka shaqeeyo shaqada uu rabo

***Hordhaca***

***Sawirka 7.2 iyo Su'aalaha Hordhaca***

- Dadka sawirka ka muuqda noocyada waaxyaha shaqo ee ay ka shaqaynayaan maxaad u malaynaysaan in ay yihiin?
- Idinku mustaqbalka shaqo noocee ah ayaad rabtiin in aad ka shaqaysatiin?
- Sawirka 7.2 iyaga oo fiirsanaya su'aalaha hordhaca ah Afka ha kaga jawaabaan.

### 7.3.2. Xaqa qof kasta u Leeyahay in uu Goobta uu rabo ka Shaqeeyo

- Weydi ardeyda goobaha ama dalka ay rabaan in ay ka shaqeeyaan.
- Shaqada ay ka shaqaynayaan nooca ay tahay iyo goobaha ama shaqada iyo goobaha ay ka shaqaynayaan cid kale hadi ay u doorato in ay sax tahay iyo in ayna ahayn iyo sababta ay sax ama khalad u tahay koox-koox ha kaga wada hadlaan.
- Koox walba natiijada wada hadalka ay ka soo saareen fasalka ha u soo jeediyaan islamarkaana ardeyda fasalku fikradahooda ha ka dhiibtaan.

### 7.3.3. Xaqa qof walba uu leeyahay in (1xiisad) uu yeesho allaab u gaar ah

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Allaab shakhsi macnaheedu waa maxay?
- Su'aasha hordhaca ardeydu jawaabo afka ah ha ka bixiyaan.
- Ugu yaraan saddex nooc oo ka mid ah allaabada ay rabbaan in ay mustaqbalka yeeshaan qofba mar ha liis gareeyo.
- In ay mustaqbalka allaabo noocan ah ay yeeshaanw ax ka hor istaagi kara in uu jiro iyo in uuno jirin in ay aminsan yihiin iyo in kale weydii. Jawaabahoodana sababo ha raaciyaan.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Sawirka 7.2 sharaxaada ku xigta inta ay akhriyaan sharaxaada layliska 10aad iyo 7.3.3 ku xigta inta ay akhriyaan layliska 11aad buugtooda ha kaga shaqeeyaan.

***Faah-faahin***

- Kadib xuquuqaha shaqo ee dastuuriga ah si kooban ugu faah-faahi.

  Xuquuqaha shaqo ee dastuuriga ah xuquuqaha shaqo ee qof kasta oo muwaadin ah uu leeyahay ee uu fasaxay islamarkaana ku qeexan Dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya ayaa loo yaqaana xuquuqo shaqo. Xuquuqaha shaqo ee dastuurka Dalka lagu qeexay waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

1. Qof kasta shaqada uu rabo islamarkaana uu doorto in uu ka shaqaysto xaq bu u leeyahay.
2. Qof kasta shaqada uu doortay iyo goob kasta oo dalka dhaxdiisa ah oo uu rabo isaga oo ku nool in uu ka shaqeeyo xaqbu u leeyahay.
3. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu dhaqdo ama yeesho allaab uu gaar u leeyahay.

## 7.4. AQOONTA/CILMIGA IYO ANSHAXA CILMIGA (2-XIISADOOD)

***Qalabka Tix-raaca***

- Boostaro, sawiro–iwm muujinaya muwaadiniin shaqooyin kala duwan fulinaya.

### 7.4.1. Macnaha Cilmiga iyo Anshax cilmiga (1-xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aalaha Hordhaca***

- xirfada marka la leeyahay muxuu ka kooban yahay?

- Anshaxa cilmigu/Aqoontu macno ahaan waa maxay?
- Su'aalaha qodobka hoostiisa ku xusan ee hordhaca ah ardeydu laba-labo ama koox-koox ha uga wada hadlaan hana ka jawabaan.

*Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)*

- Su'aalaha hordhaca ah sharaxaada ku xigta inta ay akhriyaan layliska 12aad buugtooda ha kaga shaqeeyaan kadibna isu-day in aad u saxdiid.

*Faah-faahin*

- Adiga oo soo gabagabaynaya islamarkaana soo gaabinaya macnaha cilmiga iyo Anshaxa cilmiga u faah-faahi.

**Macnaha iyo Anshaxa Cilmiga shaqo.**

uu sida ugu saxsan u dhaqan galiyo u sahlaya. Xirfadahani qof kasta oo leh takhasuska aqooneed ee shaqada marka uu hayo sida ugu wanaagsan ugu adeegsado waxyaabaha saxda ah iyo kuwa aan saxda ahayn ugu wada kaydsado/haysto.

### 7.4.2. Waxyaabaha Aasaasiga ah ee laga Sugayo qofka aqoon yahanka (I-Xiisad) ah

*Hordhaca*

- Anshaxa cilmiga iyo nidaamka ama asluubteeda oo lagu dhaqmo lana ixtiraamo macna ahaan waa maxay?
- Iyaga oo koox-koox ah su'aasha hordhaca ha ka wada hadlaan hana ka shaqeeyaan kooxuhu jawaabahooda ardeyda ha u soo bandhigaan.

*Faah-faahin*

- U sharax qof aqoon yahan ah in aqoon yahan wanaagsan in uu noqdo waxyaabaha aasaasiga ah ee laga sugayo waxaa ay yihiin.

  Qof aqoon yahan ah in uu noqdo aqoon yahan wanaagsan waxyaabaha laga sugayo in uu la yimmaado waxaa ka mid ah:

(B) Anshaxa cilmiga iyo xirfadaha ama nidaamka shaqada uu ku dhaqmo.

(T) Kartida cilmiga shaqo oo uu kordhiyo ama lahaado.

(J) Natiijooyinka cilmiga shaqo cida ka faa'iidaysanaysa waa in ay ku kal soonaato.

*Gabagabada Cutubka*

Bare! Inta aanad soo gunnaanadin cutubka ka hors ii ardeyda fursad ay kaga sheekeeyaan waxyaabihi ay ku soo barteen kadibna adiga oo soo koobaya u soo gunaanad kuna dhiiri gali in ay ka shaqeeyaan su'aalahan lagu soo gunnaanaday cutubka

**I. Weedhahan soo socda tii sax ah ku qor 'Run' tii khalad ahnak u qor 'Been'**

1. Run 2. Been 3. Been 4. Been 5. Run

**II. Su'aalahan soo socda mid walba jawaabta ku habboon u doorta**

1. X 2. B 3. B 4. B 5. X

**III. Su'aalahan soo socda jawaabo kooban ka bixiya (qodobada buuga ardeyga ku qoran ayaa ku filan)**

# CUTUBKA 8: ISKU-FILAANSHAHA

## (8-Xiisadood)

### Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Fahmaan macnaha isu-filnaanshaha.
- Fahman muhiimada ay leedahay isu-kalsoonidu.
- Gartaan faa'iidada ay leedahay ion diyaar loo noqdo in dadka kale wax laga barto ama laga faa'iidaysto.

| No. | Qodobka casharada | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Allaabo/khayraadyo kale oo muhiim ah |
|---|---|---|---|
| 1. | Macnaha isu-filnaanshaha. | • Gabagabada barashada casharka kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay: | • Taswiro, boostaro–iwm muujinaya ardey wax baranaysa, casharo akhrisanaya–iwm |
| 2. | Naftaada oo aad ku kalsoonaato. | • Sharaxaan macnaha naftaada oo aad ku kalsoonaato iyaga oo tusaale isticmaalaya | |
| 3. | Mawqifkaaga oo lagu socdo. | • Qeexaan macnaha iyo muhiimada ay leedahay in mawqifkaaga lagu socdo | • Sawir muujinaya dad doodaya ama murmaya. |
| 4. | Dabeecadaha lagu garto arragtiyada khaldan ee aynu nafteena ka qabno. | • Liis gareeyaan dhibaatooyinka ka dhalan kara arragtida xun ama khaldan ee aynu nafteena ka qabno. | • Sawir muujinaya dad wada hadlaya. |
| 5. | Kartidaada oo aad garatid diyaarna loo in dadka wax laga barto. | • Qeexaan macnaha kartidaada oo aad garatid waxaa uu yahay.<br>• Sharaxaan in dadka kale wax laga barto faa'iidada ay leedahay.<br>• Khibradaha iyo aqoonta dadka kale oo in laga faa'iidaysto oo lagu dadaalo. | • Sawiir muujinaya dad wada hadlaya. |
| 6. | Dhacdooyinka wax yeeleeya horrumarka iyo barwaaqaynta dalka. | • wax yeela horrumarka dalka. | |

## 8.1. MACNAHA ISU-FILNAANSHAHA (I-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo:

- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya ardey wax baranaysa, casharo xafidaysa–iwm

***Hordhaca***

***Sawir 8.1 iyo su'aalaha hordhaca***

- Labada sawir midka muujinaya isu-filnaanshaha waa midka?
- Si isu-filnaansho aad u gaadhin dugsiga iyo guryihiina shaqada aad ka qabatiin qofba mar ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan.
- Sawirka 8.1 iyo 8.2 iyaga oo fiirinaya su'aalaha hordhaca ah ee korka ku xusan Afka ha kaga jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Ardeyda wanaagsan" qodobka leh hoostiisa gabayga ku xusan ardeydu mid-mid inta ay isu taagaan ardeyda fasalka ha u akhriyaan.
- Labada su'aalood ee layliska 1aad hoostiisa ku qoran koox-koox inata ay uga wada hadlaan ha ka shaqeeyan.

***Faah-faahin***

- Adiga oo tusaalooyin isticmaalaya u soo koob hawlaha guriga iyo kuwa dugsiga marka loo fiiriyo faa'iidada iyo macnaha isu-filnaanshaha.

**Macnaha iyo Faa'iidada uu leeyahay isu-filnaanshaha**

Isu-filnaansho waxaa weeye in aynu aqoonteena, kartideena iyo awoodeena aynu adeegsano si aynu ula soo baxno waxyaabaha aynu u baahan nahay, kana digtoonaano in aan cid kale ka sugno in ay wax nooqabtaan, si aynu nolosheena ugu dabarno.

Hadi aynu soo koobno isu-filnaanshuhu waxaa weeye in aan ku dadaalno in aan shaqaysano nolosheenana ku filnaano si aan uga hor tegno in aan cid kale dul saar ku noqono.

Isku filnaanshaha ama in cid kale aan dul-saar lagu noqonin faa'iido aad u saraysa ayey leedahay. Tusaale carruurta halki laga sugayey inti awoodooda ah in ay shaqeeyaan si ay u caawiyaan qoysaskooda hadi ay doorbidaan in waalidiintoodu gogosha ay ku seexanayaan in ay u laabaan, waalidiintu nadaafadooda u illaaliyaan waxay ka dhigan tahay in ay carruurtu dulsaar ku tahay qoysaskooda. Waalidiintooda, hadi ay dulsaar ku noqdaana in ay waalidiintu ku faraxdo iska daayo in ay niyad jab ku ridaan ayaa dhici karta.

Hadi ay carruurtu dulsaarnimada ku sii waddaana waxaa laga yaaba in ay mustaqbalka noqdaan ma shaqaystayaal cid kale dulsaar ku ah islamarkaana sabool ah. Hadiise carruurtooda iyo waalidiinta laftigoodu kolba inti awoodoodu u ogolaato shaqeeyaan waxaa dhici karta in ay isu-filnaansho gaadhaan kana badbaadan in ay cid kale dulsaar ku noqdaan.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Su'aalaha la socda layliska 2aad kali-kali buugtooda ha kaga shaqaeeyaan.

## 8.2. ISKU KALSOONAAN (ISU KALSOON)

Qalabka Waxbarashada ee tix-raaca:

- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya ardey wax baranaysa, casharo xafidaysa–iwm

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca ah***

- Isu-kalsoonaantu waa maxay?
- Isu-kalsoonidu waxaa ay tahay dhawr ka mid ah ardeyda sii fursad ay afka kaga jawaabaan.

*Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)*

- "Axmed iyo Hooyadi" qodobka leh taariikhda gaaban eek u hoos qoran inta ay akhriyaan saddexda su'aalood ee layliska 3aad ka tirsan koox-koox ha uga wada hadlaan kadibna natiijada ardeyda fasalka ha u soo bandhigaan. Ugu dambayna ardeyda fasalku arragtiyadooda ha ka dhiibtaan.

*Faa-faahin*

- U sharax macnaha iyo faa'iidada ay leedahay isu-kalsoonidu kadibna u soo gunnaanad casharka.

**Macnaha iyo Faa'iidada ay leedahay isu-kalsoonidu**

Isu-kalsoonidu waxaa weeyaan si aad hawl ama shaqo u qabato ama arrin aad go'aansatay in aad fuliso in aad kartidaada iyo aqoontaada u adeegsato in aad hawsha fulinaysidna si kalsooni leh u xaqiijisid.

Isu-kalsoonidu faa'iidooyinka ay adamaha u leedahay kuwa waa weyn waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Isu-kalsooni hadi aynu leenahay waxay naga caawinaysa in aynu garano in aynu leenahay kartiyo aad u tiro badan oo innoo qarsoona ama aan ogayn in aynu leenahay.
- Isu-kalsoonidu waxay nagu dhiiri galinaysa in aan u jilib dhigno dhib kasta oo naga hor yimmaada si guuli ku dheehan tahayna aan uga baxno ama u xalino waxayna naga caawinaysa in aynu kartidan yeelano.
- In aynu karaamadeena illaalino islamarkaana waxyaabo fiican gaadhno ayey naga caawinaysa.

*Hawsha (shaqo guri kali-kali)*

- Sharaxaada layliska 3aad ku xigta inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 4aad ka tirsan marka ay ka shaqeeyaan u sax.

## 8.3. MAWQIFKA AMA GO'AANKAAGA OO AAD KU SOCOTO (2-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarashada laga tix-raacayo:

- Sawir muujinaya dad doodaya.

*Hordhaca*

*Sawirka 8.3 iyo su'aasha hordhaca*

- Sawirka kor ka ku xusan ayuuna tujsinaya?

Sawirka 8.3 inta ay fiiriyaan sawirku waxaa uu muujinayo si ay u sheegaan ardey dhawr ah sii fursad.

*Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)*

- "Faarax iyo saaxiibadiisa fasalka" qodob leh qoraal ka lagu soo bandhigay inta ay akhriyaan saddexda su'aalood ee layliska 5aadka tirsan koox-koox ha uga wada hadlaan. Dhawr kooxoodna sii fursad ay fasalka ugu soo bandhigaan jawaabahooda.

*Faah-faahin*

- Ugu dambayn macnaha in mawqif la yeesho iyo shuruudaha asaaska u ah mawqif yeelashada u sharax adiga oo tusaale adeegsanaya. Kadibna u soo gunnaanad.

**Macnaha Mawqifyeelashada iyo Shuruudaha Lagama-maar-maanka u ah Mawqifyeelashada**

Mawqif in la yeesho waxaa weeye hawsha, arrinka ama shayga aynu go'aansanay in aan qabano, qaadano si aan wal-wal iyo walaalahay in aynu u yeelno ama u qabano. Tusaale hal ardey hadi uu go'aan ku gaadho in uu natiijo wanaagsan keeno xiliga aan firaaqada leeyahay mooye wakhtiyada aan wax akhrisanayo ciyaar ku lumen mayo hadi uu go'aansado wakhtiyada uu ugu talagalay akhriska waa in uu si buuxda xiliga xafidaada casharada oo kali ah ugu lumiyo. Waa in uu go'aan kii uu gaadhay sidiisa u fuliyo.

Hadi xata saaxibadi ku qasbaan in uu mawqifkiisa ku adkaysto mooye marna mawqifkiisa in uu ka noqdo lagama yaabo. Go'aankiisa ma badalayo.

Sida daraadeed markasta waa in aynu mudnaanta koobaad siino mawqifkeena. Tani macnaheedu ma'aha in aynu fikradaha iyo tallooyinka dadka kalena siiyaan gabi ahaan diidno. Fikradaha ama tallooyinka na anfacaya waan qaadan karma.Hasayeeshe go'aan ki aynu qaadanay inta aynu burburino in aan fikrado dad kale ku socono ayaa xun waxaana suurta gal ah in aynu qorshaheena ka leexano kadibna jaah wareer nagu dhaco.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Labada su'aalood ee layliska 6aad buugtooda ha kaga shaqeeyaan si loogu saxo

## 8.4 ASTAAMAHA/DABEECADAHA LAGU GARTO ARRAGTIDA KHALDAN EE AYNU NAFTEENA KA QABNO (2-XIISADOOD)

***Qalabka tixraaca:***

- Boostaro, taswiiro---iwm muujinaya dad wada hadlaya.

### 8.4.1. Dareen Ugu Sarayn Ah (1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Dareenka ugu sarayn macno ahaan waxaa uu yahay waxaa aad ka taqaanin qeexa.
- Su'aasha hordhaca ee korka ku xusan afka ha kaga jawaabaan

***Hawsha (shaqo–koox-koox)***

- "Qoodax" qodobka leh hoostiisa taariikhda ku xusan int aay akhriyaan su'aalaha layliska 7aad ku xusan koox-koox inta ay uga wada hadlaan ha ka shaqeeyaan.
- Macnaha dareenka ugu sarayntu waxaa uu yahay iyo waxyeelada uu leeyahay si kooban ugu sharax. Sidoo kale dabeecadaha lagu garto aragtida khaldan ee aynu nafteena ka qabno mid ka mid ah in uu yahay ku qanci.

**Macnaha Dareenka ugu saraynta iyo Waxyeelada uu leeyahay**

Dareenka ugu sarayntu waxaa weeyaan amigo kali ah ayaa wax agaana ama aqoon leh, fikradayda ugu saxsan, dadka kale way wada khaldan yihiin, anigu nin karti lehbaan ahay, Dadka kale oo dhan aniga wada dhaama–iwm iyo dadka kale oo aad kaxummaato kartidooda iyo waxqabadkooda wanaagsan–weeyaan. Dareenka noocan oo kale ah wuxuu carqalad ku noqonaya is-fahamka, isjacaylka iyo in sinabadgalyo ah dadka kale loola noolaado. Arragtida noocan oo kale ah waxay noo horseedaysa in aynu lumino ama illawno sharafta iyo karaamadi dadka kale lahaayeen iyo in dadku sii kala fogaado colaad iyo dagaal dhaxdooda in uu ka abuurmo. Sidaa daraadeedna waa in aynu iska illaalino in aan yeelano dareen noocan oo kale ah.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Sharaxaada kooban ee layliska 7aad ku xiga inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 8aad ku usan buugtooda ha kaga shaqeeyaan.

### 8.4.2. Dareen Ugu Hoosayn (1-Xiisadood)

***Hordhaca***

***Su'aasha hordhaca***

- Liis gareeya waxyaabaha ardeyda ku dhiiri galin kara in ay yeeshaan dareen ugu hoosayn.
- Su'aasha hordhaca ardeyda afka ha uga jawaabaan.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu sharax macnaha iyo waxyeelada uu leeyahay dareenka ugu hoosayntu kadibna u soo gunnaanad.

**Macnaha iyo Waxyeelada Dareenka ugu hoosayntu**

Dareenka ugu hoosayntu waxaa weeyaan anigu dadka kale waxaa ay garanayaan ma garanayo, dadka kale waxyaabaha ay qabanayaan ma qaban karayo, dadka kale waa xariifiin aniguna waan liita, ....iwm aragti ah ayaa ku jirta. Waxqabadia dadka kale oo aad u bogtid waxqabad kaagana aad yastid ama karahdid.

Dareenka noocan oo kale ah wuxuu horseeda in aynu nafteena macno, hoos u dhigno iyo in aynu haba yaraate waxba qabsan karin in aynu amino.

*Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)*

- Qoraalka ku xiga layliska 9aad inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 10aad ka tirsan buugtooda ha kaga shaqeeyaan hana loo saxo.

## 8.5. KARTIDEENA OO AYNU GARANO DIYAARNA U NOQONO IN AYNU DADKA KALE KA FAA'IIDAYSANO MUHIIMADA AY LEEDAHAY (1-XIISAD)

*Qalabka tix-raaca:*

- Boostaro, taswiiro–iwm muujinaya dad wada hadlaya.

*Hordhaca*

*Su'aasha hordhaca*

- In midba midka kale wax ka barto (in wax la kala faa'iidaysto) macna maxay ka dhigan tahay?
- Su'aasha korka ku xusan iyaga oo labo-labo ah ha ka wada hadlaan. Jawabahoodana ardeyda ha usoo bandhigaan.

*Faah-faahin*

- Macnaha kartida aad leedahay oo aad garatid waxaa uu yahay dadka kalana faa'iidaysato muhiimada ay leedahay si kooban ugu faah-faahi kadibna marka ay fahmaan u soo gunnaanad.

**Muhiimada ay leedahay in uu qofku kartida uu Leeyahay garto Dadka kalana in uu wax ka barto diyaar u noqdo**

Kartida aad leedahay oo aad garatid macno ahaan waxaa weeyaan, adiga oo aminsan in aad ugu liidato kadibna kartida dhabta ah ee aad leedahay awoodi weydo in aad garatid, adiga oo aminsan in aad dadka oo dhan aqoon ahaan, caqli ahaan, aragti ahaan, karti ahaan...iwm ka wada islamarkaana ay kugu adkaato in aad la noolaato, la shaqaysato...iwm bulshada qaybaheeda kala duwan mustaqbalkaaga dambe oo dhan wuxuu noqonaya khasaare. Macnaha kartidaada oo aad garatid way ka soo hor jeeda arragtiyadan aynu korka ku soo sheegnay waxaana weeyaan in si miiisaaman aynu garano ama uu fahamno kartida aan leenahay inta ay leegtahay. Iyada oo aad aan loo sii buun-buuninayn dadka oo dhan in ay kartida, aqoonta iyo awoodaba ku kala duwaan yihiin waan fahmayna. Tusaale ardeyd ka mid ah ardeyda fasalku waxbarashada muwaadinimada iyo Anshaxa(Ethics) in uu kuwa kale aad uga yaqaana ayaan ogaan karma. Ardey kalena in uu xisaabta aad uga yaqaano kuwa kale. Sida daraadeed aqoonta iyo kartida aad leedahay in aad gartid waxtar weyn bay leedahay. Waxtarkuna waxaa weeye waxaa noo fududaanaysa in aynu garano waxbarashadeena mudnaankoobaad siiya, mida xili badan oo lagu xafido in loo qoondeeyo u baahan iyo in ay lagama maar-maan tahay dadka kale oo wax laga barto...iwm.

Kartideena oo aynu garano in aan dadka kale wax ka baranana diyaar u noqono in ay noo fududdaanayso in aan natiijo wanaagsan ka gaadho waa in aynu garano. Marka aynu heer Dal u fiirinana si horrumar iyo barwaaqo loo gaadho in Dalalka kale dawladahooda horrumarinta iyo kobaca ay gaadheen kaga dayano kana faa'iidaysano waa arrin muhiimad wanaagsan

leh sammayn heer kasta lehna ku yeelan karta dadaalada horrumarineed ee dalkeena ka socda.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Sharaxaado kooban ee su'aasha hordhaca ku xigta inta ay akhriyaan su'aalaha layliska 11aad koox-koox ha uga wada hadlaan. Jawaabahoodana fasalka ha u soo bandhigaan. Kadibna si guud ardeyda fasalka tallooyinkooda ha uga wada bixiyaan.

Sawir 8.4 iyo Su'aalaha Hordhaca ah.

- Ganacsiga koontrabaandhiga waa maxay? Allaabada koontrabaandhi ahaan ku soo gasha inta aad ka taqaanin qeexa.
- Ardeyda sawirka 8.4 inta ay fiiriyaan su'aasha hordhaca ah ha ka jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Daawada" qodobka leh toostiisa taariikhda ku xusan inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 13aadku xusan koox-koox ha uga wada shaqeeyaan.

***Faah-faahin***

- Macnaha koontrabaandhiga laga ganacsado iyo waxyeelada uu keeno si kooban u fahamsi. Koontrabaandhi waxaala yidhaahda ganacsiga aan sharciga ahayn ama sharciga aan waafaqsayan.Ganacsiga sharci darada ah waxaa weeyaan allaabada dalalka dibada ka yimmaada ee Dalka la soo galiyo iyada oo la qarinayo ama allaabada dalka laga qaado oo si sharci daro ah dalalka dibada loogu dhoofiyo iyaga oo qarsoodi ah.Allaabada sida qarsoodiga ah dalka lagu soo galiyo aa lagaga bixiyo waxaa sabab u ah cashuurta sharciga ah ee waajibka ku ah in dawlada la siiyo oo aan la rabin in la bixiyo islamarkaana lala dhuumanayo.

Ganacsiga koontrabaandhiga ama sharci darada ah dakhligi ku habboona in dawlada la siiyo ayuu ka hor istaagaya taas oo iyaduna carqalad ku noqonaysa horrumarinta dalka iyo maaligalintiisa. Waxaa kale oo mudan in la tilmaamo allaabada koontrabaanka ah gaar ahaan ta dalka dibada laga soo galinayo maadaama tayadooda aan la garanayn waxay bulshada soo gaadhsiinayaan dhibaatooyin illaa iyo dhimasho gaadhsiin karta. Tusale daawooyinka kala duwan, cuntooyin xummaaday, waxyaabaha la cabo, allaabaha dhismaha oo aan tayo lahayn–iwm.

***Hawsha (shaqo fasal-kali-kali)***

- Sharaxaada ku xigta layliska 13aad inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 14aad.

# CUTUBKA 9: KAYDSASHADA

## (6-Xiisadood)

### Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Fahmaan macnaha kaydsiga.
- Gartaan in dhaqanka kaydsigu gacan ka gaysto isu-filnaanshaha.
- Fahmaan sababta loogu baahday in dhaqanka kaydsiga deegaanadooda laga barto.

| No. | Qodobka casharka | Ujeedooyinka oo faah-faahsan | Allaabooyin kale oo waxtar leh |
|---|---|---|---|
| 1. | Macnaha isu-filnaanshaha | • Waxbarashada marka ay dhameeyaan ka dib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:<br>• Liis gareeyaan macnaha | • Jaantuusyo, filino fiidiyooyo ah iyo boostaro muujinaya qaramda, qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya |
| 2. | In qorshe iyo kolba awoodu sida ay tahay lagu socdo ama. | • Sharaxaan macnaha in qorshe iyo kolba sida ama inta awoodu gaadhsiisan tahay lagu socdo.<br>• Ku noolaadaan qorshe iyo kolba awoodoodu sida ama inta ay gaadhsiisan tahay. | • Qorshe sannadla ah, ee dugsiga, qorshe ha baraha ee sanadlaha ah, qorshaha bilaha iyo todobaad laha ee baris-barashada |
| 3. | Qoyska dhaxdiiisa waxyaabaha kaydsiga wax u dhima | • Liis gareeyaan waxyaabaha qoyska dhaxdiisa kaydsiga carqalad ku noqda. | • Carroosyada, casuumadaha–iwm oo sawiro lagu muujiyan. |

## 9.1. KAYDSIGA (2-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarashada ee tix-raaca

- Boostaro, sawiro–iwm muujinaya qalab ama allaabada lagu barayo kaydsiga

### 9.1.1. Macnaha Kaydsiga

***Hordhaca***

***Sawirka 9.1, 9.2 iyo su'aasha hordhaca***

- Labada taswiirood farinta ay gudbinayaani waa maxay?
- Qodobka hoostiisa sawirada 9.1 iyo 9.2 inta ay fiirsadaan su'aasha sawirka ku xigta afka ha kaga jawaabaan.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu sharax macnaha kaydsiga.

***Macnaha Kaydsiga***

Kaydsi waxaa weeye hantida ama dakhliga ku soo gala marka aad ka reebtid biilka qoyska iyo kharashka ku baxaya waxyaabaha kale ee lagama maar-maanka u ah wixii dheeri ah ee soo hadha in aad kaydsatid si mustaqbalka dhibaatooyinka kula soo gudboonaada ama arrima kale oo muhiim ah ugu bixisid.

Waxaa muhiim ah in waxyaabahan soo socda mudnaanta la siiyo:

- Macnaha kaydsigu ma'aha khaladaad la galay. Laakiin waxaa weeyaan naftaada qoyskaaga iyo dalkaaga si aad u dhistid wax kuu suura galinaya.
- Kaydsigu ma'aha wax marka lacago oo dheeri ah oo aad u badan la helo oo kali la sammeeyo. Dakhliyada aadka u yar-yar ba waalaga kaydsan kara.
- cid walba kolba awoodoodu sida ay tahay iyo kolba dakhliga soo gala in kolba wax yar laga reebo islamarkaana la joogteeyo mustaqbalka in ay wax badan noqonayso tijaabooyin horray loo sameeyey ayaa lagu xaqiijiyey.
- Kaydsi waxaa weeyaan lacagta iyo allaabada aynu haysano oo sida ugu habboon loo urursado.
- Allaabada dugsiga eek ala duwan sida allaabada baris-barashada, kuraasta iyo miisaska hadi si habboon aan loo isticmaalin xiligi loogu talagalay in ay gaadhaan iyaga oo aan la gaadhin ayey gaboobayaan, kala jabayaan, xummaanayaan—iwm. Tanina waxay dugsiga ku qasbaysa in kharash dheeri ah uu ku bixiyo dayactirka ama dib u qalabaynta dugsiga.

***Hawsha (shaqo-koox-koox)***

- Su'aasha hordhaca sharaxaada macnaynaysa kaydsiga inta ay akhriyaan labada su'aalood ee layliska 1aad iyo 3aad koox-koox ha uga wada hadlaan. Dhawr kooxood sii fursad ay jawaabahooda fasalkau soo bandhigaan.

### 9.1.2. Ujeedooyinka Kaydsiga (1-Xiisadood)

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Maxaad u malaynaysiin in ay tahay ujeedada ugu muhiimsan ee kaydsiga?

#### 9.1.2.1. In dadkale Dulsaaran lagu noqon

- Cinwaanka hoostiisa su'aasha hordhaca ah ee ku xusan ardeyda afka ha kaga jawaabaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- "Mudane warsame iyo marwo waris" taariikhdooda ha akhriyaan kadibna layliska 2aad koox-koox ha uga shaqeeyaan. Jaawabahana fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Ujeedada ugu muhiimsan ee kaydsigu in ay tahay cid kale in aan dulsaar lagu noqonin usharax. (qoraalka buuga ku qoran ayaa ku filan).

**9.1.2.2. Dhibaatooyinka Mustaqbalka iman kara in lagu Kantaroolo**

***Hawsha (jawaab afka ah)***

- Cinwaanka hoostiisa sawirada 9.4 iyo 9.5 ee kuxusan waxaa ay ka fahmeen afka ha ka sharaxaan.

## 9.2. IN QORSHE IYO KOLBA SIDA AWOODU SAAMAXDO IN LOO NOOLAADO (2-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarasho ee tix-raaca:

- Qorshaha dugsiga ee sanadlaha, qorshaha baraha ee sanadlaha, billaha, todobaadlaha iyo qorshaha waxbarasho ee maalin laha.

### 9.2.1. Macnaha in qorshe iyo kolba awoodu sida ay tahay in loo noolado (1-Xiisad)

***Hordhaca***

***Odhaahyo iyo su'aasha hordhaca***

Qofka Adamaha ah sida gurigiisu yahay maalinle sida Dariskiisu yahay uma noolaado.

- Odhaahdan waxaad ka fahamteen qeexa?
- Qorshe waxaa uu yahay ma taqaanin? Intaad garanaysiin sheega.

Bare! Odhaahda iyo su'aasha dabasocota jawaabo afka ah ha kaga jawaabaan.

***Faah-faahin***

- Macnaha in qorshe iyo kolba sida ay awoodu tahay in loo noolaado u sharax.

**Macnaha in qorshe iyo kolba sida awoodu tahay loo Noolaadaan**

Qorshe waxaa la yidhaahda mustaqbalka sida bari, sahan dambe, saakuun, todobaadka dambe, bisha dambe, ama laga bilaabo maanta illaa iyo sanada dambe–iwm hawlaha ama waxyaabaha ay tahay in aynu qabano oo horray loo sii go'aansado lana sii diyaariyo weeyaan.Waxyabaha aynu rabno in aynu sammayno marka aan go'aaminayno waxyaabaha loo baahan yahay in aynu mudnaanta siino aadbay u badan yihiin. Tusaale ardeydu si ay u diyaarsadaan qorshaha ay casharada ku xafidaan (akhristaan) waxaa looga baahan yahay marka hore in ay gartaan saacadaha ay firqaaqada ama fasaxa yihiin ee ka baxsan saacadaha waxbarashada ama dugsiyada Aadayaan (laga bilaabo isniin___ Jimcaha) inta ay dhan tahay.

Ugu dambayna "habbeenkii illaa iyo imisa saac ayaan casharada akhrisan karma?" su'aasha leh in ay isu-dayaan in ay jawaab u hellaan ayaa looga baahan yahay. Sido kale sabtida iyo Axada wakhtiga hawlaha guriga ay ku qabanayaan si ay u caawiyaan waalidkooda iyo wakhtiga ay ciyaarta u qoondaynayaan inta uu dhan yahay in ay ogaadaan ayaa waajib ku ah. Ugu yaraan 8 saac ilaa iyo 9 sac in ay seexdaan ayay u baahan yihiin, ugu badnaan illaa laga gaadhayo 4 saac hanti ay noqon weydo illaa 3-da habbeenimo (9cawaysnimo) waa in ay casharadooda darsaan/akhristaan. Iyada oo halka laga dhaqaaqayo Isniinta illaa iyo Jimcaha, sabti iyo Axad iyo waliba habeen-habeen inta saacadood ee wax akhris ku jirin karaan ayay garanayaan. Iyaga oo xiliyadan ama saacadahan aynu soo sheegnay ku salaynaya in ay diyaarsaddaan qorshe ay casharadooda ku akhristaan way karaan. Wax akhriskooduna wuxuu ku soconayaa qorshahan. Qorshaha marka ay diyaarsanayaana waa in ay u diyaariyaan kolba awoodoodu sida ay saamaxdo sababta oo ah hadi ay diyaarsadaan qorshe aynu lahayn awoodi ay ku fulinayeen suurta gal ma noqonayo in ay ku socdaan. Qorshuhu waa in uuna carqalad ku noqon saacadaha shaqada ama waxbarashada. Tusaale habeenka oo dhan (illaa iyo 6-da ama 7 saac ee habbeenimo hadi wax akhris ku gaadhaan waxaa ku adkaanaysa in ay ka dib dhacaan dugsiga ama Aadiba kari waayaan.

### 9.2.2. Qorshe iyo kolba Awoodu sida ay tahay in loo noolaado

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Qorshe iyo kolba awoodu sida ay saamaxdo oo loo noolaado macna ahaan maxay tahay?

  Ardeydu su'aasha hordhaca ah ee korka ku xusan jawaabo afka ah ha ka bixiyaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ardeydu ha ka shaqeeyaan layliska 7aad iyo 8aad.

***Faah-faahin***

- Ugu dambayn adiga oo fahamsiinaya qorshe iyo kolba awoodu sida ay saamaxdo oo loo noolaado macno ahaan waxaa ay tahay u soo gunnaanad casharka.

**Macnaha in qorshe iyo kolba sida awoodu saamaxdo in loo noolaado iyo Faa'iidada ay Leedahay**

Qorshe iyo kolba sida ay awoodu saamaxdo oo loo noolaado macna ahaan waxaa weeyaan sidii horay aynu u soo tilmaamnay waxaa lagama-maar-maan ah in loo qorshe iyo kolba awoodu sida ay saamaxdo in loo noolaado. In aynu nolol maal-meedkeena ku hagno qorshahan aynu soo sheegnay la dhaqan galiyo weeyaan.Qof kasta nolol-maalmeedkiisu waa in uu ku salaysnaado dakhliga soo gala kolba inta uu dhan yahay iyo kharashka baxay in uu dakhliga ka bato kadibna dayn uu galo ayuu qorshuhu kabad-baadinaya. Sidanina macnaheedu ma'aha in qof kasta qaab nololeedkiisu uu noqdo mid uu dadka kale kula tartamayo laakiin waxaa weeyaan in kolba xaalada qoysku sida ay tahay iyo awoodiisu sida ay u saamaxdo loo noolaado. Taasina waa in ay ku salaysnaato qorshe si wanaagsan loo diyaariyey.

### 9.3. KAYDSIGA GURIGA DHAXDIISA WAXYAABAHA AMA ARRIMAHA CARQALAD KU NOQON KARA (2-XIISADOOD)

Qalabka Waxbarasho ee la tix-raacayo:

- Carrooska casuumadaha–iwm sawiro, taswiiro, filimo–iwm muujinaya.

***Hordhaca***

***Su'aasha Hordhaca***

- Idinka oo fahamka illaa iyo hada aad ka hesheen kaydsiga ku salaynaya waxyaabaha carqalad ku noqon kara in guriga dhaxdiisa kaydsi laga sammeeyo waxaa ay yihiin qeexa.

***Faah-faahin***

- Su'aasha hordhaca kadib qoyska dhaxdiisa waxyaabaha in kaydsi la sammeeyo carqalad ku noqon kara waxaa ay yihiin u sharax adiga oo u soo gaabinaya.

Kaydsiga Guriga Dhaxdiisa Waxyaabaha Carqalad ku noqon karaa.

Waxyaabaha kaydsiga guriga dhaxdiisa carqaladayn kara kuwa ugu waa weyn waxaa kamid ah kuwan soo socda:

***Guurka (carooska) aan qorshaysnayn***

Xafladaha kala duwan ee la qabto xiliga carrooska ee dalkeena ka jira in kasta ay yihiin waxyaabo wanaagsan oo dhaqana ku salaysan hadii uu carroosku noqdo mid kala daadsan oo aan ku salaysnayn awooda dhaqaale iyo xaaladhaa nololeed ee jira wuxuu horseeda in dayn ama amah aan macquul ahayn lagalo. Arrimahan oo kale waxay meesha ka saaran kaydsi wax la yidhaahdo oo dhan.

***Tacsiyaha***

Xubin ka tirsana qoyska marka uu geeriyoodo waxaa jira duco iyo munaasabado kala duwan oo lagu xasuusanayo mar xuumka dhintay iyada oo sida ay diintu ogolaato loo fulinayo. Hadiise

ducada iyo munaasabadaha kala duwan ee lagu xasuusanayo qofka dhintay ay awood ahaan ku adagtahay waxaa dhacaysa in ay kharash aad u badan looga baahdo. Tanina waxay carqalad ku tahay in qoysku wax kaydsado.

Xafadaha siyaarada (siyaaradi sh. Hebel) qoysba diinta uu ku socdo ama aminsan yahay in kasta oo ay ku xidhan tahay waxaa jira xaflado kala duwan oo la qabto. Hasayeeshe siyaarada/ducada inta ku baxaysa wax ka badan hadii lagu kharash gareeyo waxaa ku lumaya hanti badan oo carqalad ku ah in wax la kaydsado.

***Ciidaha oo si xad-Dhaaf ah loo xuso***

Qoysku ciid ama xus kasta oo ay sammaynayaan hadi ay ku saleeyaan kolba awooda qoysku sida ay tahay wax dhibaato ah ma yeelanayso. Laakiin hadi lagu kharash gareeyo lacag qoysku awood u lahayn waxaa qasab ah in uu qoysku dayn badan galo. Taasina waxay carqalad ku noqonaysa in kaydsi la sammeeyo.

Cabitaanka Alkoolka cabitaanka alkoolku wuxuu horseeda in la barto sigaar cabitaankiisa oo caafimaadka waxyeelo aad u daran gaadhsiiya, kharashka daawada lagu bixin lahaana carqaladbu ku noqonaya, in shaqada laga hadho ama laga habsaamo ayaa dhacda taas oo sabab u noqon karta in shaqada laga eryo ama laga qaado. Kadibna in wax la kaydsado iska daayo waxaa dhici karta in aad dakhiba weydo.

***Balwada kala duwan***

Sigaarka lacabo, jaad laqaylo, khamaar la ciyaaro–iwm waxay burbur iyo hoos u dhacweyn ku keenaan nolosha qoyska.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Su'aasha hordhaca ee sharaxaada ku xigta koox-kood inta ay akhriyaan layliska 10aad iyaga oo ka wada hadlaya ha ka shaqeeyaan. Kadibna su'aalaha hoos ku xusan ha ka jawaabaan iyaga oo ku salaynaya qoraalka ay akhriyeen.

1. Qoyska dhaxdiisa in kaydsiga laga dhaqan galiyo waxyaabaha carqalad ku noqon kara liis gareeya.
2. Balwad macnaheedu waa maxay?
3. Balwaduhu siday carqalad ugu noqdaan in guriga dhaxdiisa kaydsi laga sammeeyo?

***Gabagabada Cutubka***

- Bare! Ardeyda marka hore sii fursad ay kaga waramaan waxyaabihi ay cutubka ku soo barteen kadibna adiga oo u soo koobaya u soo gunnaanad waxbarashada.

# CUTUBKA 10: KA QAYBGALKA FIRFIRCOON EE BULSHADA

**(6-Xiisadood)**

## Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashadu cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Gartaan macnaha ka qaybgalka bulsho ee firfircoon waxaa uu yahay.
- Fahmaan faa'iidada uu horrumarka dalka u leeyahay ka qayb galka bulsho ee fir-fircoon.
- Gartaan muhiimada ay leedahay in bulshadu ka qayb qaadato horrumarinta iyo maal galinta dugsiyada iyo dhisibilinka deegaanada.

| No. | Qodobka casharka | Ujeedooyinka oo faah-faahsan: | Khayraad kale oo muhiim u ah |
|---|---|---|---|
| 1. | Ka qayb galka bulsho ee firfircoon | • Qeexaan macnaha ka qayb galka firfircoon ee bulshadu waxaa uu yahay.<br>• Uga qayb galaan si firfircoon hawlaha kala duwan ee fasalka dhaxdiisa ka socda. | • Dad roodhi sammaynaya, inta ay is-urursadaan islamarkaana wada hadlaya. Dooranaya wakilo, nabad galyada iyo amniga sugaya–iwm oo lagu muujiyey sawiro, filim ama boostaro. |
| 2. | Muhiimada ay leedahay ka qayb galka firfircoon ee bulshadu | • Liis gareeyaan muhiimada iyo waxtarka uu leeyahay ka qayb galka firfircoon ee bulshadu | • Taswiiro, boostaro–iwm muujinaya ka qayb galka muwaadiniinta |
| 3. | Ururada bulshada rayadka ah. | • Sharaxaan macnaha ururada rayadka ah waxaa ay yihiin.<br>• Qeexaan faa'iidooyinka ay ka hellaan ka qayb galka kooxaha kala duwan ee dugsiga ka jira.<br>• Ka qayb gallaan ururada bulshada rayadka ah ee dugsiga dhaxdiisa ka jira. | • Booster, taswiir–iwm muujinaya dhaq-dhaqaaqa ururada rayadka ah ay sammaynayaan |

## 10.1. KA QAYGALKA FIRFIRCOON EE BULSHADA (2-XIISADA)

Qalabka Waxbarasho ee Tix-raaca:

- Booster, sawir–iwm muujinaya bulsho urur –urur u shaqaynaya.
- Booster, sawir–iwm muujinaya bulsho wada hadlaysa.
- Booster, sawir–iwm muujinaya bulsho wakiiladeeda dooranaysa.
- Filin, taswiir–iwm muujinaya bulshada oo deegaanka nabadgalyadiisa iyo amniga dabagalaysa.

### 10.1.1. Macnaha ka qaybgalka Fir-fircoon ee Bulshada

***Hordhaca***

***Sawirka 10.1 iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawirka korka ku xusan maxaad ka fahamteen?
- Sawirka korka ku xusan ardeyda ka dul muuqata hawlaha ay fulinayaan sababta ay doorteen iyo sida ay tahay qeexa.
- Bare! Ardeyda laba-labo ama koox-koox inta aad u qaybisid sawirka buuga ardayga10.1 ee ku yaala inta ay fiirsadaan labada su'aalood ee korka ku xusan ha ka wada hadlaan.
- Wada hadalka ka dib kooxo dhawr ah sii fursad ay jawaabahooda fasalka ugu soo bandhigaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Shaqada koox-kooxda kadib saddexda su'aalood eek u xiga buugtooda ha kaga shaqeeyaan. Kadibna u sax buugta.

***Gabagabada***

- Ugu dambayn si kooban ugu sharax macnaha ka qayb galka firfircoon ee bulshada.

**Macnaha ka Qaybgalka Firfircoon ee Bulshada**

Ka qaybgalka firfircoon ee bulshadu macno ahaan waxaa weeye in iyada oo la is-xilqaamayo arrimo bulshada iyo dalka faa'iido u leh si wada jir ah loo wada gabto. Hawlaha ay sida wada jir ka ah u fulinayaan dhammaantood waa kuwo rabitaankooda iyo firfircooni heer sare ay ugaga qaybgalleen. Heer dugsi ahaan ka qaybgalka firfircoon ee bulshadu wuxuu ku saabsan yahay hawlaha dugsiga iyo fasalada dhaxdooda laga fuliyo. Ardeydu dugsiyadooda dhaxdooda iyo goobaha dayrka baxsan in ay nadiifiyaan islamarkaana ay beeraan dhir midha leh iyo kuwa kale oo waxtar leh kadibna xannaaneeyaan. Ururada kala duwan ee dugsiga iyaga oo ka qayb qaadanaya xubnaha ka noqonaya in ay wax badan qabtaan ayaa laga sugaya.

Fasalka dhaxdiisana in ay kaabagalaas doortaan ama loo doorto, nadaafada fasalka illaaliyaan, sugaan nidaamka ama anshax iyo dhisibilinka fasalka...iwm ayaa laga sugaya. Waxaa inta dheer hawlaha kala duwan ee laga fuliyo goobaha la degan yahay ee waxtarka leh utsaale ahaan sida nadiifinta xaafada, beerida dhirta, sugida amaanka xaafadaha–iwm kolba inti awoodoodu u saamaxdo in ay qabtaan ayaa laga sugaya.

## 10.2. MUHIIMADA AY LEEDAHAY KA QAYBGALKA FIR-FIRCOON EE BULSHADU

Qalabka Waxbarasho ee tix-raaca:

- Nadiifinta dugsiga hadi ardeydu ka wada qayb qaadato mudo saacado gudahooda ah ayey ku dhammayn karaan.
- Xaadaha dhaxdooda hadi dhir in laga beero la rabo hadi bulshada xaafadu si buuxda uga qayb qaadato wakhtiyar bay ku dhammayn karayaan.

Sida oo kale dad aqoon iyo karti leh hadi ay si firfircoon uga qayb qaataan dalka iyo

Dadkaba horrumar aad u wanaagsan bay u horseedi karaan.

Guud ahaan ka qayb gal fir-fircoon oo bulshadu ku hawl gasho hadi la hello dugsiyada iyo deegaanada ama xaafadaha iyo waliba qoyska, goobaha caafimaadka –iwm horrumar midho dhal ah ayaa la gaadhsiin karaa.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Saddexda su'aalood ee layliska 2aad hoostiisa ku xusan koox-koox ha u soo bandhigaan.

***Gabagabada***

- Adiga oo si kooban ugu sharaxaya muhiimada ka qay galka firfircoon ee bulshadu leeyahay u soo gunnaanad casharka

## 10.3. NOOCYADA KA QAYB GALKA FIRFIRCOON (1-XIISADOOD)

Qalabka Tix-raaca:

- Taswiro iyo sawiro muujinaya ka qayb galka muwaadiniinta.

***Hordhaca***

***Sawirka 10.3, 10.4 iyo su'aalaha hordhaca ah***

- Taswiiraha korka ku xusan maxay muujinayaan?
- Taswiiraha labada ah ee korka ku xusan waxyaabaha ay ka siman yihiin waa maxay? Maxayse ku kala duwan yihiin.

Ardeydu sawirada 10.3 iyo 10.4 inta ay fiiriyaan su'aalaha la soo bandhigay koox-koox ha uga wada hadlaan.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ardaydu iyaga oo koox-koox ah saddexda su'aalood ee ka tirsan layliska 3aad ha ka wada hadlaan. Kadibna koox walba jawaabahooda fasalka ha u soo jeediyaan.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu faah-faahi noocyada ka qayb galka firfircoon ee bulshada

***Noocyada ka Qaybgalka Bulsho***

Noocyada ka qaybgalka bulsho aadbay u badan yihiin. Noocyada ka qaybgalka bulshada waxaa look ala qaybin kara labo nooc oo kala ah mid dugsiga dhaxdiisa laga fuliyo iyo mid dugsiga dibadiisa laga fuliyo.

Ka qaybgalka bulsho ee dugsiyada lag fuliyo waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Doorashada horjoogaha fasalka oo laga qayb qaato.
- Nadiifinta fasalada oo la fuliyo.
- Hawlaha dugsiga guud ahaantiisa lagu nadiifinayo laguna qurxinayo.
- Hawlaha dugsiga agagaarkiisa la xaadhayo.
- Ururada kala duwan ee dugsiga oo xubin iyo maamuleba laga noqdo.

Ka qayb galka bulsho ee dugsiyada dibadooda laga fuliyo waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Xaafada nadaafadeeda iyo quruxdeeda oo la illaaliyo.
- Hawlaha laga wado waddooyinka xaafadaha dhaxmara oo laga qayb qaato.
- Nabadgalyada iyo amniga xaafada oo la illaaliyo.

## 10.4. URURADA BULSHADA (1-XIISAD) INSTRUCTIONAL PREPARATION: INSTRUCTIONAL MEDIA

Qalabka tix-raaca:

- Taswiir, boostor-iwm muujinaya dhaqdhaqaaqa ururada bulshada rayadka ah ay sammeeyaan.

***Hordhaca***

***Sawir 105, 10.6 iyo Su'aalaha Hordhaca***

- Taswiiraha korka ka muuqda maxay qeexayaan?
- Labada taswiirood maxay isaga mid yihiin?maxayse ku kala duwan yihiin?

Ardeydu sawirka 10.5 10.6 inta ay fiirsadaan iyaga oo sawirada ku salaysanaya labada su'aalood ee la soo bandhigay koox-koox ha uga wada hadlaan hana ka shaqeeyaan.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu sharax macnaha ururada rayadka ah waxaa ay yihiin.

**Macnaha Ururada Rayadka ah**

Erayga si fig wuxuu ka yimiday erayga sifil.

Macnaha erayga sifil maamul ka madax bannaan ama ka duwan qaabdhismeedka dawladeed oo bulshada si guud u tilmaamaya weeyaan.Sida daraadeed ururada rayadka ah waa ururo rabitaanka bulshada iyo is-xilqaankeeda lagu dhisay oo loogu talagalay in bulshada loogu faa'iideeyo. Kuwa ugu waa weyna waxaa ka mid ah:

- Ma aha kuwa wax dheeri ah loo Aasaasay.
- Waa ururo xubnaha ka tirsani ay rabitaankooda iyo jacayl ay u qabaan kaga qayb qaata.
- Waa ururo dakhligoodu ka yimmaado iyo waliba ururada deeqaha bixiya.
- Waa ururo dastuurka dawlada ku duwan gashan oo aqoonsi leh.
- Arrimaha kala duwan ee bulsho iyo kuwa horrumarinta si firfircoon ka qayb gala.
- Waa ururo ka qaybgal siyaasadeed sammeeya.

***Hawsha (fasal-kali-kali)***

- Layliska 5aad kali-kali buugtooda ha kaga shaqeeyaan.

***Gabagabada Cutubka***

- Bare! Marka hore sii ardeyda fursad ay kaga waramaan waxyaabaha ay ka faa'iidaysteen cutubka.
- Kadibna si kooban ugu soo gunnaanad casharada.

# CUTUBKA 11: HAMIGA AQOON RAADISKA (RAADINTA CILMIGA WAXBARASHO)

## Ujeedooyinka Guud ee Cuutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonnaan in ay:

- Gartaan macnaha ka faa'iidaysiga aqoontu waxaa ay tahay.
- Fahmaan kaalin ta qofka aqoonta leh ay ka qaataan horrumarinta noloshiisa iyo kobaca bulshada.
- Fahmaan muhiimada ay aqoonta iyo xogaha caddaymuhu u leeyihiin in la qaato go'aan sax ah.

| No. | Qodobka casharka | Ujeedooyinka oo faah-faahsan: | Allaabo kale oo muhiim ah |
|---|---|---|---|
| 1. | Macnaha iyo faa'iidada aqoonta. | • Qeexaan macnaha iyo muhiimada aqoonta | • Buugta, koombiyutar sawiro muujinaya |
| 2. | Macnaha xoga ama caddaymaha? | • Qeexaan macnaha xogta/ caddaymaha.<br>• Liis gareeyaan hababka lagu darso/ ururada xogaha/caddaymaha.<br>• U hawl gallaan hanashada khibraha akhriska. | • Qoraalo kala duwanoo caddaymo ahaan loo adeegsado. |
| 3. | Dhaqanka akhriska. | • Qeexaan aragtida iyo fikradaha dib u dhacnimo in ay cadaymaha ama warbixinada caddaymaha ku salaysnayn iyaga oo tusaale ku xoojinaya. | • Odhaahyo kala duwan oo dib u dhacnimada ka hadlaya, qoraalo iyo buug odhaahyo dib u dhanimada la xidhiidha. |
| 4. | Dhaqanka akhriska. | • Qeexaan dhaqanka akhrisku waxaa uu yahay.<br>• Qeexaan waxtarka ay leedahay in dhaqanka akhriska la yeesho.<br>• Ku daddaalaan sidi ay u heli lahaayeen khibradaha akhriska | • Buug kala duwan waxbarashada raadiyoonka –iwm.<br>• Taswiiro, boostaro –iwm muujinaya aqoon yahanada buugta qora iyo saynisyahano. |
| 5. | Habka casharada waxbarasho loo akhristo. | • Diyaariyaan jadwalka ay wax ku akhristaan.<br>• Qeexaan akhriska casharadu sababta ay faa'iido u leeyihiin | • Jadwalka loo diyaariyey shir ama arrimo kale oo muhiim ah. |

## 11.1. MACNAHA IYO FAA'IIDADA AQOONTA (1-XIISADOOD)

- Boostaro, sawiro ...iwm muujinaya buugaag, koombiyuutar...iwm.

***Sawir 11.1, 11.3 iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawiradda korka ku xusan macnahooda iyo dadka waxaa ay u faa'iideeyaan qeexa,
- Allaabadan ama waxyaabahan sided u ogaan karteen?

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Ardeydu qodobka wada hadal leh qoraalka ku hoos xusan koox-koox ha u akhriyaan kadibna labada su'aalood ee layliska 1aad ka tirsan iyaga oo ka wada hadlaya ha ka jawaabaan.Jawaabahoodana fasalka ha u soo bandhigaan.

***Faah-faahin***

- Si kooban ugu sharax macnaha iyo faa'iidada ay aqoontu leedahay.

Aqoon waxaa lagu macneeya shay ama wax kasta fahamka, arragtida ama waayo aragnimada aad u leedahay. Aqoontu maadama ayna ahayn wax lagu cabiro wakht iyo samman ama xili ku eg adamuhu had iyo jeer waxay ku hawlan yihiin hawlo aad u badan oo cilmi baadhis ah. Sidaa daradeedna waxaan arkayna in xili walba in ay waxyaabo cusub oo horrumarka bulshada caalamka iyo borwaaqaynta kaalin aad muhiim u ah ka qaata oo ay ku soo biiriyaan.

***Hawsha (Dood)***

- Ardeydu kooxo kala duwan ha isu-qaybiyaan labo su'aalood si bakhtiya nasiib ah ama qori tuur ah ha loo siiyo kadibna ha ka doodaan. Labada su'aaloodna waa sedan soo socota.

1. B. Aqoontu waa wax mar kali ah aynu barano islamarkaana haysano.
   T. Aqoontu ma aha wax mar kali ah aynu barano kadibna aan haysano laakiin waxaa weeyaan wax xili walba isbadal iyo horrumar sammaysa oo adamuhu si joogto ah u barto.

## 11.2. HABABKA XOGAHA LOO HELLO LOONA DARSO

***Qalabka Tix-raaca:***

- Qoraalo kala duwan oo xog ama caddaymo ahaan loo adeegsado.

***Hordhaca***

***Sawirka 11.4 iyo su'aalaha hordhaca***

- Sawirka aad korka ku arkaysiin habka xogaha loo helo muxuu tilmaamo idinka siinaya?
- Halke, meelaha ama waxyaabo nooce ah in aan warbixinada ka helno ayaad u malaynaysiin?

1. Iyaga oo koox-koox wada shaqaynaya sawirada 11.1 illaa iyo 11.3 iyaga oo fiirinaya labada su'aalood ee korka ku xusan ha ka wada hadlaan. Kooxo dhawr ahna fasalka ha u soo jeediyaan jawaabahooda.

***Faah-faahin***

Ugu dambaynadiga oo u soo koobaya u sharax macnaha xog/warbixin iyo hababka loo helo ama loo ururiyo.

## 11.3. ARRAGTIDA DIB U DHACNIMADA (2-XIISADOOD)

*Qalabka tix-raaca:*

- Liiska odhaahyada dib u dhacnimada.
- Qoraalo ka hadlaya dib u dhaxnimada.

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Odhaahyada dib u dhanimo ee agagaaradiina lagaga hadlo liis gareeya liis gareeya.
- Arragtiyada dib u dhacnimo ee deegaanadiina laga yaqaano sida loo tirtiri karaya? Tallaabooyinka lagu tirtirayana maxay in ay noqdaanba dhici karta?

- Ardeydu kooxo yar-yar inta ay isu qaybiyaan sawirada 11.1 iyo 11.3 inta ay fiirsadaan labada su'aalood ee korka ku xusan ha kawada hadlaan kadibna kooxo dhawr ah jawaabahooda fasalka ha u soo jeediyeen.

***Faah-faahin***

- Adiga oo soo koobaya u sharax macnaha fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo waxay ay yihiin.

**Macnaha Fikradaha iyo Arragtiyada dib u dhanimo**

Fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimadu waa odhaahyo aan sax ahayn, khaldan, oo dhab ahaan xaqiiqada ka fog oo facba-faca ku xiga (jinba jinka ku xiga) la isu-soo gudbiyo oo meelaha qaarkood bulshooyinka ku nooli arrimaha qaarkood fikrada ama talo ahaan ay u yidhaahdaan oo dhammaantood qiyaas ama malo-awaal ah weeyaan.

***Tusaale***

- Ilmaha ha la ciyaarin qoribu kugu mudayaye
- Naag hadi ayna waxba garanayn rag ha dhammaado.
- Dumarku waa dhalaan raad weyn.

Hadaladan iyo kuwa kale oo aad u badan waa odhaahyo runta iyo sida ay xaqiiqadu tahay aad uga fog oo marnaba maskax caafimaad qabta aynu aqbalayn. Waa odhaahyo lidi ku ah in horrumar iyo barwaaqo la gaadho oo qaybaha bulsho kala qaybinaya. Sidaa daradeedna waxaa lagama maar-maan ah in laga digtoonaado sidi loo tirtiri lahaana loo hawl galo.

***Hawsha (shaqo fasal-koox-koox)***

- Labada su'aalood ee layliska 5aad koox-koox ha uga wada hadlaan. Dhawr kooxoodna jawaabahooda fasalka ha u soo jeediyaan.

## 11.4. DHAQANKA AKHRISKA (1-XIISADOOD)

Qalabka Tix-raaca:

- Buugaag, jaarnaalo, wargayso–iwm.
- Taswiiro, sawiro muujinaya aqoonyahano buugta qorta, saynisyahano–iwm.

***Hordhaca***

***Sawirka 11.5 iyo su'aalaha hordhaca***

- Carruurta aad sawirka ka dul arkaysiin maxay gabanayaan?
- Carruurtani hadi ay yeeshaan dhaqan akhris maxaad umalaynaysiin in ay tahay faa'iidada ay ka helayaan?
- Waa maxay xidhiidhka ay leeyihiin akhriska iyo aqoontu?

Ardeydu iyaga oo koox-koox ah sawirka 11.5 inta ay u fiirsadaan saddexda su'lood ee korka ku xusan ha ka wada hadlaan. Dhawr kooxaha ha u soo bandhigaan.

- Kadib fahamsii macnaha iyo faa'iidada uu leeyahay dhaqanka ahkriska oo la yeesho.

**Macnaha iyo Faa'iidada uu leeyahay dhaqanka Akhriska oo la yeesho**

Dhaqanka akhrisku waxaa weeyaan jacaylka iyo khibradaha aynu u qabno ama u leenahay akhriska. Jacaylka aynu uqabno wax akhrisku intu le'egyahay ama dhan yahay? Baaxada ahaan, badi iyo qoto dheeri ahaan intu dhan yahay? Buuga aynu wax ka baranayno kali ah ma'aha waxaa loo baahan yahay in aynu akhrisano laakiin waxyaabaha kale ee aynu helno sida buug, wargaysyada, jaraa'iidada–iwm had iyo jeer si dareen wanaagsan iyo xiise ama rabitaan ku dheehan yahay hadi aynu akhrin karno waa dhaqan wanaagsan oo aynu aqoon iyo khibrado tiro badan ku hanan karno.

Dhaqanka akhrisku wuxuu leeyahay faa'iidooyin aad u badan waaxtaga ana qaybaha kala duwan ee nolosha aqoon ballaadhan in aynu ku helno ayuu noo sahlaya.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Labada su'aalood ee layliska 6aad ku xusan qof-qof inta ay uga soo shaqeeyaan ha keenaan shakhsiyaadka sida wanaagsan uga soo shaqeeyay fasalka ha u soo bandhigaan.

## 11.5. HABKA CASHARADA LOO XAFIDO (2-XIISADOOD)

***Qalabka tix-raaca:***

- Jadwal wakhti loo diyaariyey arrimo kala duwan.
- Muunad jadwal cashaaro lagu xafidayo.

***Hordhaca***

***Su'aalaha hordhaca***

- Ka hor inta aanad bilaabin xafidaada casharada diyaar garawyada aad sammaysiin ardeyda fasalka u soo bandhiga.
- Xafidaada casharada marka aad dhammaysiin sided casharadi aad xafidaan u fulisaan?
- Dhawr ka mid ah ardey iyagu is-xilqaamaya ka codso in ay waayo aragnimadooda ardeyda fasalka intooda kale wax uga sheegaan.

***Faah-faahin***

- Si faah-faahsan u fahamsi macnaha xafidaada casharada, muhiimada iyo hababka wax loo xafido

**Macnaha Xafidida Casharada, Faa'iidada iyo haabka la adeegsado**

Xafidaada (akhriska casharadu) waa dadaal sida ugu habboon in aqoon lagu hanto loo sammeeyay. Gaar ahaan buugaagta kala duwan iyo qoraalada marka la akhriyo aqoon wanaagsan ayaa la hannan kara. Xafidaada (darsida) casharada waxbarasho iyo akhriska buugta iyo qoralada kala duwan labo sxhay oo kalaa duwan xafidaada casharada ka sokow fahamka aynu ka helayno waxaa aynu akhrinay, waa dadaal loogu talagalay in dhacdooyinka si wanaagsan loo fahmo islamarkaana la xasuusto.

Casharada waxbarasho in la darso ama la xafido waxay leedahay faa'iido aad u saraysa. Sida aqoon nagu filan aan u kasbano islamarkaana natiijooyin wanaagsan ku gaadhi karno waa akhriska. Faa'iidada akhrisku ma'aha oo kali ah in imtixaanka fasal illaa iyo fasal kale loogaga gudbayo oo natiijo wanaagsan laga keeno.

Waxaa kale oo uu kaalin muhiim ah ka qaata in shaqo aad u heer saraysa iyo karti mustaqbalka shaqooyin lagu abuuro in la yeesho. Tanina waxay ku xidhyan tahay natiijooyinka fiican ee ay imtixaanka ka soo hooyaan kadib marka ay akhristaan.

Hababka akhriska iyo xidhiidhkooda xafidaada casharadu waxay leedahay hab u gaar ah oo wax loo akhristo. Habkani wuxuu noo fudaydinaya waxyaabaha aynu akhriyeyno in aan fahano, waxyaabaha aan xafidayno mark aynu fahamno kadib siyaabaha aynu u xasuusan karno in aynu garano ayuu naga caawinaya.

Sida daradeed xafidaadu waxay leedahay habab u gaar ah oo kala horreeya ama xidhiidhsan. Sida natiijooyinka wanaagsan aynu uga keeni karno waxay ku xidhan tahay kolba sida hababkan aynu u dhaqan galino inaga oo u fiirinayna sida ay isugu ixgaan. Hababkana waxaa ka mid ah kuwan soo socda oo sedan soo socota isugu xiga:

- **Akhriska hore**

Ka hor inta akhriska hore aan la bilaabain waxaa lagama maarman ah in si wanaagsan loo soo urursado dhammaan waxyaabaha aynu u baahan nahay una diyaarsano.

Daragadan waxaa muhiim ah in aynu hagaajisano xiliyada, nidaamka aynu fulinayno, iyo waxyaabaha kale ee faa'iidada leh ee na caawin kara sida buugaag, allaabooyin kala duwan, goobaha aynu rabno in aan wax ku xafidno–iwm, gaar ahaan marka aynu wakhtiga soo qaadano waa in aynu aad uga digtoonaano. Xafidaadu

si ay u noqoto mid midho dhal ah waxyaabaha noo fudaydinaya midka ugu wanaagsan waxaa weeye in aynu diyaarsano jadwal (borogaraam) ku habboon oo joogto ah ama rasmi ah oo aan wax ku xafidno. Jadwalku waa uu noqdo mid daal badan oo awooda ama kartida qofka ka sareeya.

- **Akhriska dhexe**

Jadwalka xafidaada casharada iyo waxyaabaha kale ee muhiim ka ah marka aynu diyaarsano kadib waa in aynu jadwalka akhriska aynu dajisanay aan amino sida uu yahayna ugu socono. Marka aynu xafidayno casharada waxaa loo baahan yahay in aynu si buuxda mudnaan u siino waxaa aynu akhriyeyno si taxadar lehna ugu fiirsano. Si aynu u xasuusanay waxaa aynu akhrisanayno waa in aynu ku cel-celino akhriska waxyaabaha aan naqaanana barbar dhigno waxaa aan akhrisanayno islamarkaana ka baraan degno.

Qodobada ugu muhiimsan waxaa aynu akhrisanayno in aynu la soo baxno in aan ku dadaalo ayaana looga baahan yahay.

- **Akhriska Dambe**

Sidan aynu soo sheegnay marka aan akhriskeenu u wadano kadib waxyaabaha aynu soo akhrinay in aan dib u nakhtiino una qiimayno ayaa na looga baahan yahay. Qodob kasta arrimaha ama waxyaabaha muhiimka ah ee hoos imanaya, warbixinada, macnahooda iyo qaab aynu u xasuusano waa in aynu diyaarsano ayaa noo wanaagsan.

Si aynu u dhaqan galino waxyaabaha aynu soo sheegnay qodobo yar-yar oo aynu ku xasuusano waa in aynu sammaysano. Kadib marka aynu calaamadaha aynu fiirsano waxaan garan karma halka aynu marayno, qodobada aynu ka boodnay–iwm.

***Hawsha (shaqo guri-kali-kali)***

- Su'aalaha ku xusan layliska 7aad buugtooda inta ay kag a shaqeeyaan ha keenaan kadibna u sax. Qorshaha qof walba diyaarsaday fasalka ha u soo jeediyo.

***Gabagabada Cutubka***

- Bare! Ka hor inta aadan u soo gunnaanadin casharada dhawr ardeyda ka mid ah ardeyda sii fursad ay ku sharaxaan waxyaabihi ay cutubka ka barteen.
- Kadibna adiga oo u soo koobaya u sharax nuxurka casharka kadibna u soo gunnaanad casharka.